# Dhibbanaha

## dhex jooga



DULMI
DIIDOOW
DULMI
DOON
HA NOQON

Qore:
Cali Adam Cismaan (C/Ameeriko)

DHIBBANAHA DHEX JOOGA

Copyright @ Cali A Cismaan ‘’Cali/Ameeriko’’
Buuggan lama rogi karo, lama guurin karo, online laguma iibin karo, lagumana daabici karo, la’aanta ogolaanshaha qoraaga.

Rogiddii koowaad 2017

Dalbasho iyo faallo:
Udubprinting@gmail.com
Alishka5@gmail.com
Facebook: Suldaan Cali Ameriko
Whatsapp: +256791094309

Waxaa rogay buuggan
Udubprinting: Kampala-Uganda
**ISBN: 9789970969500**

**HIBEYN**

Buuggan waxaan u hibyaynayaa caruurtayda

Kunseyr, Cumar, Mahad, Bile

## MAHAD CELIN

Mahad dhammaanteed waxaa iska leh Eebihii igu mannaystay caafimaadka iyo garaadka aan buuggaan ku qoray kuna dhamaystiray.

Waxaan aad ugu mahad celinayaa Madaxweynaha Jamhuuriya Jaayuuti mudane Ismaaciin Cumar Geelle sida uu isugu xilasaaray ilaalinta iyo dhowridda afka Soomaaliga iyo ka ilaalinta inuu dabar go'o iyo dhammaan dowlada iyo dadweynaha reer Jaabuuti.

Waxaan kaloo mahad u celinayaa abwaan Khaalid Bashiir Maxamuud iyo Maxamad Jamaal {mo booliis} iyo Sihaam Axmad rooraaye sida ay garab iiga siiyeen turxaan bixinta buuggan iyo dhamman intii dhiirri galinta ila garab taagnay.

## HORDHAC

Waxaan rajaynayaa in buuggan uu wax badan ka badalo argtida dad badan {siiba da'da soo koreysa} ay ka qabaan hayb sooca iyo takoorida dad walalahood ah oo aysan
waxba dheerayn, in buuggan uu kiciyo damiirka dad badan
oo ku xad gudba diinta iyo bani'aadamnimada marka laga hadlayo beelo beelo, waxaan rajaynyaa in uu iftiimiyo
dhibka lagu hayo dadka soomaaliyeed qaarkood oo dhinac walba leh oo gaaray in siyaasadii laga dhigo dadkaas
qofkii u dhasha inuu yahay qof barkiis sida ka muuqata
baarlamanka soomaaliyeed oo lagu qaybsaday 4.5, taasna
ay caddeyn u tahay in si ula kac ah loo yiri nalama sinnidin, taasna ay keentay in ay waayaan xuquuqdii ay ku lahaayeen siyaasada dalka.

Aniga oo aan ku soo koobi karin buugaan iyo buug kalaba dhibka lagu hayo dadka soomaaliyeed qaarkood, ayaan jeclaystay in aan dhinac ka muujiyo dhibtaas inta awoodayda ah.

Ugu danayayntii waxaan filayaa qofkii akhriya buugaan in uu dareemi doono xad gudubka la gaystay ama soomaalidu u gaysaty dadnimada iyo diinta iyo damiirka qofnimo iyo
walaalaheena soomaaliyeed ee nala dhalsho iyo diin ah oo aan isku dayayno inaan ka xayuubinno xaquuqdoodii ku aadanayd, waxbarasho, siyaasad, guur, xil iyo nolol farxad leh.

**AKHRIS WACAN OO XIISO LE**

**DHIBBANAHA DHEX JOOGA**

**CUTUBKA KOOWAAD**

**MAQAAXIDA**

Salaadii casir markii laga soo baxay Kadiye masaajidka banaankiisa ayuu ku nabad galyeeyey raggii ay isla soo tukadeen qaar ka mid ah, wuxuuna u soo dhaqaaqay dhinaca maqaaxida shaaha oo ay ku sheekaystaan asaga iyo rag kale oo isa sheeka yaqaan tan iyo inta ay soo dhawaanayso salaadda maqrib oo ay markaas masaajidka isku raacaan, inta badan waxay isla soo tukadaan oo fadhiga shaahana isku soo raacaan saaxiibkii caruurnimada Warfaa, balse galabta aan la socon, Kadiya qudhiisu waa uu is weydiinayay meesha uu galabta ku maqan yahay Warfaa, intii uu u soo socday fadhiga oo aan ka dheerayn ayuu dhex kula kulmay oday Xariir oo markuu arkay ku yiri:

"Saaxiibkaa maanta kulama socdee ma wax dhib ah ayaa jira oo ayaajiyay?".

"Maya ee howl ayaa ku fakatay ayaan u malayn".

"Hadde Kadiya raalli naga ahoow xoogaagii yarka ahaa waan la soo daahnnaye, haddii Eebbe idmo aroortii ayaan keenayaa, xoogaa ayaa na soo gaaraye".

"Wax dhib ah maleh walaaloow, markaad heshid keen, haddaad wax kale u baahatidna ha xishoonin, dhibka in laysla qaybsado waa waajib diintu na farayso".

"Wanaagga iyo walaaltinimada waan kugu aqaanay, khayr allaha ku siiyo".

"Alle mooyee cid kale oo noo maqan maleh Xariiroow, annaguna inaan isku dulqaadanno, isku sabirno oo lays garab qabto waa waajib nawada saaran, lacagta

saan kuu sheegayba qayb waa qaaraan aan baxshay". Socodkiisiina sii watay markay is nabad galyeeyeen Xariir oo maqaaxidii aaday.
Xariir wiilkiisa oo tahriiba ah ayaa waxaa lagu haystaa Liibiya, nin Soomaalidu u bixisay magafe ayuu meel ugu xiran yahay oo lacag ka raba, Kadiyana lacagtii ayuu sii siiyay looga baahnaa oday Xariir, asaga oo qaar ku taakuleynayay qaarna dayn ay tahay.
Maqaaxida shaaha ee Dalsan jidka weyn ayay saaran tahay, illinka weyn wuxuu u sii jeedaa xaafadda, markaad marayso jidka laamiga ahaan jiray oo hadda bustu ka kacayso waxaa ku soo gaaraya bulaanka gudaha ka soo baxaya, ninkaan aqoon oo laamiga marayaa waxa uuba is dhihi lahaa meeshu buuq badanaa, waase maxay darbigaan laga yabqayo, ma jin ayaa wax ku qaybsanayana waa kugu soo dhici, Gudaheeda markaad soo gasho waxa u horeeya ee ishu qabanayso waa sida koox koox loogu fadhiyo.
Dhinaca koofur xiga ayaa ugu dad badan, qayladuna u badan tahay waxaana is kugu tagay rug caddaaga fadhi ku dirirka ee siyaasadaha falanqeeya, haddaad u dhawaato erayada dhagahaaga ku soo dhacaya waxaa ka mid ah.
"baarlamaanka ayaa ka fadhiya hadda, waana la ridayaa, Ra'iisul wasaaruhu sinnaba ugama fakanayo markaan".
"War aniga i weydiiya maraykan ma rabo madaxweynaha, lacagtii kolkii hore la soo siiyay dowlada asaga iyo wasiirka dhaqaalaha ayaa kala qaybsaday, laba bil ka badan haduu sii joogo waligiin ha i warsanina".
"Wallaahi Billaahi Tallaahi anigu haddaan fiirshay arrinta Soomaliya balaayo aan federaalka ahayn nama hayso, aan burburino federaalka waad arkidoontaan barwaaqadaan gaarno iyo nabada e".
"Shiinuhu wuxuu yiri dhaqaale aan ku bixinayo Soomaaliya ma jirto, dad daacad ah maahan, waxaase kale oo laga soo sheegay haddii suulgaab loo doorto madaxweyne in uu na kaalmeynayo, waayo suulgaab Shiinuha ayuu wax ku soo bartay saaxiib ayuu la yahay".

“Madaxweynuhu habeen dhaweyd si qarsoodiya ayuu ku tagay Israa’iil waa la soo cadeeyay, heshiisyana waa la soo galay, shirkadaha Israa’iilna sidii ay yihiin shirkado Maraykan ah ayay dalka ku imaanayaan oo kaga shaqaysanayaan, lacag fiicanna waa soo siiyeen Madaxweynaha, sida la hubo”.

“Reer dhuun dhagax waa waxa salka u ah dumista Dowladda, sad bursi ayay wadaan, haddaan loo yeelin sida ay raaayaanna go’aan ayay ku gaareen inay gataan xildhiayaanada oo dowladda madaxa loo rogo”.

Hadalladaas iyo kuwa kale oo badan oo aan waliba layska sugayn oo mid walba gees ka qaylinayo ayay ku hadlayeen.

Dhinaca waqooyi waxaa fariista koox wadaado ah markaad muuqaalka ka eegto oo garar waaweyn leh inta badana khamiisyo qaba, warkooduna uusan banaanka u bixin oo cid kale aysan maqlin, in kasta oo ayaga iyo dadku ay xoogaa ay isku jiraan oo beer ubax ku beeran yahay ay u dhaxayso, haddana waa dad aan buuq lahayn oo hoos u hadla, wax dhib ahna haba yaraatee aan cidna ku hayn, balse ayaga dhib lagu hayo oo intaas wax laga sheegayo sida.

“Ma aragtaan doofaarnimay isku urursadeen oo hadalka hoos ugu dhigayaan”.

“Deeqdii dowladaha muslinka ay ka soo qaadeen ayay meesha ku qaybsanayaan”.

“Dowladdu ma indhahay la’dahay, waaba kuwaan al shaabaabe may qab qabato”.

Kuwaa gaaray inay yidhaahdaan

“Xaddiisyo been ah oo ay nagu jaaha wareeriyaan ayay meesha ku allifayaan”.

Haddii qof xamasho la xantay loogu danbi dhaafayo, raggaas dhinaca waqooyi ee makhaayada Dalsan fariista ayaa loogu danbi dhaafi.

Bartamaha waxaa fadhiista dalaalleeyda oo laba jaad ah, dalaalleeyda dhulka iyo kuwa siyaasada, dallaaleeyda dhulka oo dhinaca irida soo xiga fariista qaylo badan maleh, laakiin hadal aan kala go’ lahayn ayaad ka maqli, waxaad maqlaysaa ayagoo leh,

“Dhulka laabaatanka ah ee laamiga saaran ninka raba xoogaa ha la war wareejiyo, asagaa lacag fiican ogolaane”.

“Habarta dhulka saddex iyo tobanka cabirkiisu yahay rabta oo shiikhu keenay mid wax ogol maaha waa in lagu bakhsaa ayadaa wanaaga diidaye”.
“Lixdan kun ka yar yaan la gadin, dhulkaasi waa dhul wanaagsan, waa meel wax fiican nooga soo boodi karaan”.
waxaa kale oo ay meesha uga tashtaan sidii dhulka loo kicin lahaa qiimihiisa ama hood loogu dhigi lahaa taas oo ay garab ka helaan dalaaleeyda siyaasada oo hadba war wanagsan oo xasilloonida dalka ku saabsan oo aan waxba ka jirin suuqa soo galiya ama war balaayo sheegahaya, dalaalayda dhulku waa iskaashato hawl badan qabata oo aan xafiisyo lahayn, waa dad xaasaskooda iyo caruurtooda siday u noolaysan lahaayen uun ku dadaala, digsigu dabka in uu u saaranyahayna ka shaqeeya, cid kalena aan dan ka galin.
Dalaalayda siyaasadu waxay aad ugu horumareen beenta iyo isku dirka, nin kastana iskama helo xubin ka ahaanshada dallaalleyda siyaasada, qofka ku jiraa ama ka mid noqonayaa waa inuu xariir toos ah la leeyahay ugu yaraan laba xildhiayaan, agtooda wasiir iyo Raii’sul wasaare balse madaxweyne waxba kama ahan, waxay rumaysanyihiin wax la yiraahdo motion, hubka culus ee ay adeegsadaan waa xildhiayaannada oo ay marna u shaqeeyaan marna ku shaqaystaan,
Waa ableey laba af leh oo dhan walba wax u gooysa, Ciddii lacag haysata waa u shaqeeyaan, waa war qaadayaasha u dhaxeeya xubnaha dowladda oo markay raabaana isku dira markay raabaana heshiisiiya, waa jeebka xildhiayaanada wax ugu soo dhacaan, dad iyo dal iyo diin kuwa aan u aabo yeealayn weeye, warkoodana lama maqlo inta badan mar mar ayaa dhagahaaga ay ku soo duulaysaa ayagoo leh,
“Amiirku waa la diyaar lacagta, anaa ka soo dhameeyay taas ee idinku soo dadajiya arrinta, ku dhaha sarkaalka iyo wasiirka qorshaha la wada in ay soo daayaan ragga xiran, lacagta anaa hadda Amiirka ka soo qaadaye”.
“Madaxweynuhu waxa uu raabaa Motion looga takhalluso Ra’iisul wasaaraha, howl culus ayaa noo taal ee xildhiayaanada ha lays ku soo duba rido”.

“Amiirku wuxuu raabaa in dhowr nin loo gudbiyo villa Soomaaliya oo hawshooda qabsada lacag aan caqli galayna waa ogol yahay”.

“Nin ayaa keenya iga soo wacay wuxuuna iga codsaday in aan la sheqayno madaxda sare ee ku howlan heshiiska badda ee Kenya lala galayo, waxa hortaagan heshiiskaas waa xildhiayaanada qaarkood ayuu yiri, awal ayaan dadweyne wax la warsanayne waa meeshaan saboolnimada ku tuuri lahayn oo hodan ku noqon lahayn, xildhibaanadu inay ogolaadaan weeye howsheenu”

Mid kale ayaa weydiiyay,

“Taas sow maahan inaan dalkeena oo la booayayo aan ogolaanay, waa dhib wallaahi”!!

“Wanaag nin dalka u samayn jiray ha is kaga key dhingin, tan kale madaxdii dalka u saraysay ayaa rabta oo diyaar u ah inay iibsadaan badda, hadde waa kuwii kitaabka ku maray danta dalka iyo dadka inay ka shaqeynayaan, anagu xaggee joognaa? maxaanse qaban karnaa?”.

Dhuunigooda waxay ku soo dhacsadaan dalaalayda siyaasaddu dhibka ay dadka iyo dalka iyo diinta ay u gaystaan. Waxaaba mar mar isleedahay hogaankii dalkuba waa ayaga, haddaad u fiirsatana si waa u yihiin, higsigooda weyn iyo hanqal taagoodu waa inay noqdaan dadka u dhaxeeye Soomaaliya iyo dalalka dhaqaalaha bixiya oo halkaa dalaal fiican uga soo baxo.

Meel yara laab ah oo dhinaca bari ah waxaa fariista rag akhyaar ah oo sheekadoodu aysan meelo fogfog garsiisnayn, kooxaha kale ee meesha fariistana waxay ugu yeeraan odayaal xaafadeed iyo odayaal ziyo, meesha waxay ku hayaan waa kaftan iyo waqti dhumis iyo salaada maqrib oo ay ku sugtaan.

Raggaan culus waxaa ka mid ah nin lagu naynaaso Yariisoow, waa nin dheer oo affar ila shan dhudhun ku dhow oo calool weyn, qosol weyn, muqaalkiisa oo dhan weyn yahay, ilkihiisu kuwa dadka kale aad u malaysid in ay ka weyn yihiin. aan hadal badnayn, Warfaa nin dhuuban bar yar kaftan badan oo galabta aan mesha ka muuqan, Af dheere nin dheer oo caata ah calool se leh, gar weyn leh, ilko soo dheer leh, markastana aad u malaysid inuu dhoolla cadeynayo “dhoollaynayo,” Siidoow

murqa kuus isku kawis ah hadal badan, duqayn badan, Macoow nin dhexdhexaad ah, xifaalo badan gar iyo shaarib midna aan lahayn, iyo Jirac nin dheer oo caato ah oo asagu jecel inuu la fariisto odoyaasha balse xanaaq badan oo aan saas loola kaftamin iyo Kadiye nin dhexdhexaad hilib ka ah, bashaash ah, garsooraha raggana ah marki lays qabsado, raggana kala dhex gala laguna kalsoonyahay.

"Dowladdu war ayay maanta soo saartay". Ayaa Jirac yiri:

"Haye noo sheeg hee, wariye", ayaa Macoow yiri asaga oo raba in uu ka qaylisiiyo Jirac.

"War bal tanoo kale war goormaan wariye idiin ahaa, ma anaad lacag igu siisaan inaan wararka idiin soo tabiyo". Siidoow ayaa kala dhex galay oo yiri

"Macoow iska hadal lee yaqaan, ee ha u bixin, ee dowladda maxay sheegtay?".

"Waxay tiri hubka waa la aruurin, ciddii hubka ay haysato keentana lacag ayaa laga siin". Ayaa jirac ugu war celiyay.

Af-dheere ayaa inta ilkihii dhaadheera bananka keenay yiri:

"Oo ma annagay raabaan inay fara bannaani na dhigaan sidii dumar, garaad yaraa ragga sidaas ku taliyay, kolley anigu nin ayaan ahayoo dhiibi maayo hubkayga".

Siidoow ayaa qoslay oo yiri:

"Walaahi Af dheere daayaal maahan, haddii qorigiisa iska dhiibo dadka see isaga celinayaa, faradheer feer ma kasayso, awooddooda hub lee waaye".

"Feer ma yaqaanaan baa? walle haddaan feer kugu dhufto inaad ku waalan i waraabshaay oo jirku ku holci".

Waa la wada qoslay Jirac oo warkii Macoow ka sii xanaaqsan maahine, Kadiye aa yiri:

"War bal noo kaadiya ninku war fiican ayuu wadaaye, Jirac warka xagee ka maqashay?".

"Intaanan idiin imaan wax yar ka hor ayaan muuq ayaahiyaha {TV} laga soo saaray war murtiyeed ku saabsan hub ka dhigista".

Yariisow ayaa yiri:

“Macoow hubka iska wareeji waad maqlaysaaye dowladdii waa soo jeesataye”. Qosol weyna raaciyay.
“Aniga hub hal qori leen ka gatay, tii iga raacdayna allaa og, baddaana ku tuuray asagoo dhan”.
Af-dheere oo yaab fooolkiisa ka muuqdo ayaa yir:
“War ma qori ayaad badda ku tuurta? waa lacag ku dheelistaas iyo garaad xumidaas, meel xun ka bax”.
“Maxaa dhacay ma i warsanaysid miyaa? yaa Af- dheere, haddii qori adiga qiimahaas kula leeyahay aniga ma ila laho, dhibkiisana waan arkay”. Ayaa Macoow ugu hadal celiyay.
Jirac oo barbar dhac raadinaya ayaa yiri:
“Haye bal noo sheeg maxaa dhacay awal baadan wax wanaagsan sheegayne, qori waxaad u tuurtay xilligaan la joogo waa doqonnimo kugu jirta say aniga ila tahaye”.
Macoow inta horey u soo fariistay ayuu yiri:
“Adiga jirac…..”
“Suga suga, buuq ha nagu furina, ma waxaad biloowdeen markaad mukulaal iyo jiir isku noqon jirteen, Macoow waxa dhacay kaliya noo sheeg oo heerkaas qori kuu necasiiyay” ayaa Kadiye yiri.
Macoow ayaa ku bilaaayay hadalkiisii oo yiri:
“Igaar aan dhalay ayaa aabe qori noo gad igu waalay waan isku ilaalinaynaa, wax badan ayaa ka diiday, markii danbe waan soo gaday sanduuq ayaana ku xiray, muddo ka dib egaarkaygaa yiri aabe qorigaan inaan fiirrino siduu u shaqeeynayo ma fiicnoo, waxan ku iri kii laga soo gaday suu u shaqaynaayo mana soo tusinoo? bes baraabar waaye qoriga waxba ma qabo waa fiican yahay, Ayaan ku iri, wax badan markii uu igu celceshay aan fiirino saas u shaqaynaayo, ugu danabayn waan oggolaaday haye ayaan ku iri, cawo dhabbartii siyeed saac ayaan guriga kor fuullay, gurigayga baddaas ku jeedaa, baraabar, qorigii ayaan badda u jeedinay igaarkaygaa hal xabbo ka riday, hubaal waaye hal mallaay ama labo mallaay waa dilay, waan iska xaraynay, haddiise waagii baryay dad lee guriga nagu soo garaacay, haddii

gurigii la furnaybo waa kanaa shan nin oo nin lug u duubantahay wada, gabarteydaa ii yeertay, baaba nimanaa ku raba, waan soo dagtay haye nabad ma jirtoo ayaan ku iri,

“Nabad weeye adeer” ayay dhaheen, “balse xabaddii xalay aad tuurteen ayaa ninkaan ku dhacday oo waa dhaawaac, hadde daawayntiisaa laydinka raabaa”.

Igaarkaygaa soo booday oo yiri:

“Asaga ninkaan jinni miyaa siyeed saac habeennimo maxaa bada ka samaynaayay, aniga xabbada badda leen ku ridey, yaab, xabbad badda lagu tuuray oo soo wareegtay oo shaneemo super horteeda nin iska taagan ku dhacday, aduunyo gaddoon waaye”

aniga Macoow ahaan wan gartay waxa meesha ka socda baad lee maahinoo, markhaankii ayaa go’ay waan kasay, waxaa dhan waxaa ii keenay wiilkaan, igaarkaygaan ku iri aamus waryaa edeb ma lihide nin dhaawacaa la wadaa ma u jeedidoo, walaalkeen oo dhib haysto waaye, i suga ayaan ku iri dadkii, qolkaan galay boqol kun ayaan u soo qaaday waana siiyay, igaarkana allaha noo bogsiiyo waa naga wada dhaawacmee ayaan ku iri, aamiin iyo mahadsanid ayay isku dareen waana baxeen, waan daba galay luuqaan ka fiirshay waaba kanaa, ninkii garbaha laga haayay waaba soconayaa, waxaan is iri Macoow adoon qorigaa ridin ayaa mar kale la dhihi doonaa qof ayaad ku dhaawacday ama ku dishay, habeenkaas dhabartii ayaan qorigii qaaday baddaana ku riday, markhaatiyaalna waan u yeelay, marka aniga hub mahaysto ee idinka hubka wareejiya, waanse idin kasaa waad duugaysaan ee hub dhibkiis waan aragnay, anaa ugu yar ana boqol kun aa been been layga qaatay, marka ha la wareejiyo hubka ayaan ku talinaya anigu”.

“Waa sheeko yaab leh, waana anshax xumaayeen kuwaas, adigana cidlaad ka carartay Macoow, odayaal ayaa jira iyo wax garad inaad u sheegto ayay ahayd, waa lagaa celin lahaa” ayaa Af-dheere yiri:

“Odayaal aa, aniga wax garad xamar ma ku arkin, waa dhici kartaa in ay jiraan mase badna, baraabar, Siidoow u sheeg odayaal iyo wax garad faradheer waxii ay ciddiina ku dhigeen”. Ayuu yiri asagaoo suulka ku fiiqaya Af-dheere.

“Aniga qof qof dhaama Soomaaliya ma ku arkin, dowladdaba ha ahaatee, warkaasna nagadaa Macoow, waxii tagay waa tageen, wax la faar faaro ma fiicno” ayaa Siidoow yiri:
“Walle waxa Siidoow oo hadal badnaa amusiyay wax yar maaha bal noo sheeg Siidoow see wax u dhaceen?” ayaa Yariisoow yiri, markuu cabayaar aamusnaa ayaa Kadiye ku yiri:
“Siidoow dalkaan balaayo waa ka dhacday, hadday dhinac kaa heshay bal noo sheeg”.
Siidoow ayaa hadalkisii ku bilaaayay waliba asaga oo aan jeclayn in uu arrintaas ka hadlo oo yiri:
“Igaar walaalkay dhalay iyo mid kale ayaa dagaallamay, kii kale waa laga xoog badshay saan idiin sheegay faradheer feer ma kasayso, kii waa rooray qoriyaa soo qaatay, igaarka walaalkey markii uu arkay ninkaan qoriga soo wata waa uu rooray, asaga oo luuq sii galaayo ayaa kii xabbad ku soo riday, igaarkii adeerka u ahaay luuqa markii galay asaga oo rooraayo ayaa nin kale ka soo baxay luuqii, xabbadiina kii soo baxayay ay ku dhacday, ninkii markiiba waa dhintay, madaxay kaga dhacday, yaas noqday ninkii dhintay ma kasee? kii xabadda riday beeshiisa lees noqday, dib ayay isugu noqdeen odayaashii beeshaas, galabtii markay tahay ayay yimaadeen guriga walaalkeey, aay jiijo xaaska walaalkeey lee joogtay guriga, markii la is nabdiiyay ka dib waxay dhaheen anagu waxaa nahay odayaasha beesha noocaas eh ee waxaan rabnay wiilkiina jeesto , aay jiijo oo naxsan ayaa tiri:
“Ma joogo ee maxaa jira duqowda?”.
“Nin ayuu naga dilay”. Ayaa mid yiri, aay jiijo waa naxday,
“Igaarkayga dhib malahayn, waligii ma laga soo dacwoon, maanta nimaas dilaa leedihiin, see camal akhyaarta?”
“Maya walaal saad u malaysay maahan arintu, asagu ma dilin oo gacantiisa kuma dilin ee xabbad uu u gooyay ayaa nin ku dhacday, marka saasuu ku dilay oo haduusan u goyn lahayn xabbada ninku ma dhinteen, sow hadda ima garan?”. yaa mid kale yiri:

“Haa waan gartay, haddii uusan u goyn lahayn asagay ku dhici lahayd dhibna ma jireen arrintu waa dhammaan lahayd maahinoo, aniga murugtaan maxaa ii soo arkay, xabbad aa loo gooyay beriga ka hor ma maqal, filimada hindiga leen ku arki jiray, haye hadda maxaa laga raabtaan hadii asagu ninka dilin?”.

“Wali warku ma daadagin gabadha” ayaa oday yiri kuna daray asaga oo jiijo la hadlaya “adeer ninka waxaa dilay xabbaddii wiilkaagu u gooyay, marka diyadii ninka dhintay ayaa laydinka raabaa, ninku cidla kama bixine, dad ayuu ka dhashay”.

Aay Jiijo intay yara aamustay ayay tiri:

“Runtaa waaye, us cidlo ma ka bixin anukaa geed cidlo ka baxay ah, beriga hadii asaga la dili lahaa diyo ma helneen, haddana nin aan asagu dilin aa diyadiis laga raabaa, hadii diidnana gummaadkii lee waaye, warkiina waan kasay, Ilaahaa joogo” oo u raacisay “odayaashaan u sheegayaa waa laydin la soo xariiraa, raallina noqda”.

“Raali waa nahay, anagoo dhanba dad walaalaa ayaan nahay dhib weyna ma jiro waxa kani waa iska dhamaan oo maalin kasta wax ka daran ayaa dhaca, ee farriinta odayaasha gaarsii nabadayna”.

“Habeenkii markii aan isku nimid odayaashii ciddeena, waxaan hubaal ahayd hadii diyada aan la dhiibin in igaarkeenna la dilaayo ama dhowr ciddeena ka mid ah, ilaahay maahine cid kale oo naga celin kartana ma jirin, annagana sacabooleey looma ooyaan eh ayaa nahay, tan kale diyada gardarrada nala ku saaray waa badanayd ma dhiibi karin, go’aan waxaan ku gaarnay in kistoo loo geeyo iyo faataxo, nin odayaasheena ka mid ah ayaa yiri faataxo dadkaas ma qaataan annagaa camal maahan, dadkaas beesa lee raabaan, haye, waxaan u badalayna kistoo beesa ah iyo baryo in laysugu daro, sidii ayaan samaynay kistoo ayaan u gaynay waana Tuugtanay, madaxay noo salaaxeen dad fiicanaa tihiin waa idin naqaanaa, haddii cid kale ahaan lahaydeen shillin ma idiin cafineen, balse dadkeenii oo ceeshoo milix isku ahayn ayaa tihiin, ayay dhaheen, yaab waxaa ahaa naxariista nala tusay, annagii diyada baadda eh laga qaaday ayaa naloo danbi dhaafay oo nala cafiyay, yaa, waxaa horey loo yiri cimrigaaga dheeraadaa geel dhalaayana waa ku tusaa,

welina mar markoo kuwaa noo yimaada, ninkii hebel walaakiisaan ahay, ina adeerkiisaan ahay, habaryartiisaa i dhashay, waxaasay noo sheegaan maalintaa marduufkoodana waa siinaa, nabad aan iibsano oo lacag kala baxno ayaan ku joognaa hadda" raggii meesha fadhiyay qoortaa la wada laalaadshay, war waa ka soo bixi waayay, wax badan waa soo arkeen soona maqleen tanise waa ku cusubtahay.

## DHIBBANAHA DHEX JOOGA

## CUTUBKA LABAAD

## WICITAANKII

Waxaa dhawaaqay siinkii Kadiye ee gacan qaadka ah, wuxuuna ku soodhacayay musigii heestii Soomaaliyay toosoo, oo dadka markii siinku soo dhaco ag jooga qofba dareen gooniya galisa, qaar ayaa rayn rayn gashaa sida dhallinyarada oo dhagaha uun ka maqlay Soomaali siday ahaan jirtay oo ku tallaba, sidii laydiin sheegi jiray oo kale goormaa Soomaaliya noqon doontaa, inta waaweyn murug iyo uur xumaa gasha markay fiirshan sida dad iyo dal loogu ciyaaray, sida halyeyadii gobonimada u soo huray naftooda iyo mood iyo noolba, cadowga kuwii la soo dagaalamay tacabkoodii meesha manta uu marayo ayaa ciil iyo calool xumo gashaa, Axmad Gurey oo Amxaaro iyo bortaqiis la soo dagaalamay markii danbana unuunka jareen, Sayyid Maxamad Cabdulle Xasan oo markay iska celin waayeen gumaystuhu diyaarado ku soo weerereen, waxayna ahayd markii ugu horeysay ee dal la gumaysto dalalka saddexaad diyaarad lagu weraro, taas oo markhaati ka ah inay dhulka iskaga celin waayeen.

Shiikh Xasan Barsame oo gaaladu u ballan qaaday magac iyo maal iyo nolol qaboow kase doorbiday inuu wad la kulmo asaga oo dalkiisa iyo dadkiisa iyo diintiisa ka ilaalsanaya gumeysiga, Nasiib buundo gabyaagii ahaana hoggaamiyihii jareer weyn oo gumeysiga har iyo hoy u diiday kuna noqday oodin ay iska siibi waayeen markii danbana {1928} jir dil ay ugu dileen talyaanigu xabsiga weyn ee xamar.

Maxamuud Xarbigii af iyo adin ku weeraray libintun u soo dhawaatay Soomaaliweyn in ay mid noqotana raadinayay oo Faransiiskuna markii danbe ay diyaaradda la qarxiyeen asaga iyo ragii la socday, Tima Cadde gabyaagii mar walba guuayaabada la dul tagnaa soomaali.
Sheikh Bashiir sidii geesnnimada lahayd uu ula dagallamay gumaystaha, Cumar Samatarkii gaalada hubka ka dhacay kalana soo horjeestay, dhallin yaradii SYL ee ka dhiidhiyay gumaysiga, Abdullaahi Ciise oo u bareeray inuu dhibta gumaystuhu nagu haayo ifka inta ku nool uu u sheego si gaarana ay isaga fiirin jireen gumaystuhu, Cabdirisaaq Xaaji Huseen iyo dad badan oo kale oo mood iyo muruq iyo af iyo maskaxba ku gadaalamayay.
Maalintii dhagaxtuur ee cadawgu qoryaha darandooriga u dhaca wateen Soomaaliduna dhagaxda ku dagaalamaysay, Xaawa taako ay wadnaha fallaar kaga dhufteen, gumeysigu xumaantii uu soomaali kula kacay, tabaryaridii nahaysay maalintaas iyo sidaan isaga celinnay, hubka ay ka fara marnaayeen Soomaalidu wax cabsiya ma galin, ul iyo dhagax iyo waran ayaa Talyaani looga soo dhacshay gobannimada dhiig badana ku daatay. Ururkii SYC SNL & USB ee intaa qaylinayay, Xaaji Faarax Oomaar iyo ragg kale ay ka dhiidhiyeen gumaysiga, ayadoon barya ahaynna gobonnimadii ka qaatay dowlada Ingriiska, Farnsiis Jaayuuti ma quureen ee dhib iyo qaxar ayaa looga qaaday, talyaani lagama baryin ee xoog ayaa looga soo dhiciyay gobannimada, dagaalkii 1964tii oo anagoo affar jir ah aan la galnay Amxaarada oo toban jibbaar naga badan, ahaydna dowlad weligeed soo jirtay oo aan gumaysi arag, wacdarihii aan dhignay iyo guushaan soo hoyinay dad oo dhami waa la yaabeen.
dagaalkii toddoayaatan iyo toddobo oo Soomaali oo ul iyo diir ah Amxaaro iska kaaya celin weyday oo dhulkii naga maqnaa aan gacanta ku dhignay, balse dowlado badan oo Ruushku ugu horeeyo u soo gurmadeen Itoobiya, kacaankii uu hogaaminayay sareeye gaas Maxamad Siyaad Barre oo ka hor intaan qoloqolaysi dad badan oo dowladda ka mid ahi aysan bilaabin la ogaa markhaati madoontana

ah horumarkii iyo awoodii ciidan ee dalka iyo dadku ku talaabsadeen, iyo haybaddii dadweynaha Soomaaliyeed dacallada ifka ay ku lahaayeen.
Siinkii ayuu qabtay oo haloow yiri, dhinaca kale waxaa ka soo yeeray cod weyn oo yiri:
"Kadiye miyaa?".
"Haa waa asagii".
"Waxaan kaala soo hadlayaa godka jilicoow ee nabad sugidda Soomaaliyeed walaal ee ma taqaan nin la yiraahdo Warfaa Buux".
Haa waan aqaan ayuu ugu war celiyay haddase ilama joogo, ma wax dhib ayaa jira walaaal? ayuu weydiiyay Kadiye.
"Wax dhiba ma jiraan ee anaga ayuu nala joogaa halkan".
Kadiye intuu ninkii ka dhex galay hadalka ayuu weydiiyay
"Maxuu ka samaynayaa agtiina, ma shaquu ka helay".
"Maya ee agteennuu marti ku yahay oo manta la keenay, in aad noo timaadana waan rabi lahayn", waa hagaag ayuu yiri siinkiina xiray.
Nimankii la fadhiyay mid ka mid ah ayaa yiri:
"Ma wax dareen ah ayaa la soo sheegay Kadiye?".
"Dareenna ka daran, Warfaa ayaa godka Jilicoow ku xiran, saas ayaa hadda uu ii sheegay qofkaan i soo wacay oo meesha iga soo wacay, ee bal waan soo fiirine, waa idinkaas" ayuu yiri
Nin raga ka mid ahaa oo kale ayaa yiri waan is raacaynaa ka la hari mayno, Kadiyese waa ka diiday asagoo leh, hadii cid la qabsan oo wahel looga dhigi Warfaa kaligay aan ahaado, dadkaan wax kasta ayaa ka suurooba, wuuna istaagay oo u dhaqaaqay dukaan meesha agteeda ku yalay, inyar ka dibna ka soo baxay oo baabuur yar oo meesha u yaalay fuulay horayna ka dhaqaajiyay.
Xoogaa ayay ku qaadatay Kadiye inuu gaaro godka jilicoow, inkasta oo aysan sidaas u fogayn haddana jajabka jidadka awgeed ayuu aayar u waday baabuurka yar ama dhabbacatada, markii meeshii uu tagay ilaaliyiihii illinka hore waxa uu u sheegay in uusan fatuurada meeshaan dhigan Karin ee uu meel uraadsado oo uu lug

ku yimaado, dantuna waxay noqotay in uu hoos u laabto oo uu dhigo meel ka fog sarta balse ilaaliyuhu ka arki karo si aan looga xadin, godka waxaa hor mara wadada ku dhamaata hotel Shabeele "oo aan hada meeshaba ku ool oo la rartay sartii oo dhan" iyo sarta Wakaaladda shidaalka oo ka sokeeysa, markii kor buurta dheer loo raacana ku dhamaata wdada Nasiib Buundo oo bidix loogu leexdo Villa Soomaaliya, midigna Boondheere iyo Shibbis.

Markii uu u sii socday godka wuxuu hormaray gurigiisa iyo kan Warfaa wuxuuna arkayay dhowr dumara oo fadhiya kabbiska la fariisto ee banaanka guriga Warfaa ku yaal, laabtana wuxuu iska yiri *xan badanaa wax kale uma fadhiyaan meeshaas.*

## DHIBBANAHA DHEX JOOGA
## CUTUBKA SADDEXAAD
## CASIR SHEEKAYSI

Casirkii dumarka xaafadu waxay isugu yimaadaan hoos galbeedka aqalka Warfaa oo kabis weyn leh, gurigu waa bari ujeed sidaa darteed kabbisku galabtii har wanaagsan ayuu leeyahay, subixiina inta qadada iyo quraacda u dhaxaysa dumarka qaar ayaa u soo sheeka doota oo waxaa ku yaal geed aad u weyn oo har weyn leh oo hareeya kabbiska iyo agagaarkiisa, dhinaca midig ee guriga oo ah halka fadhi ku diririku ka dhaco waxaa mara jid, dhinaca waqooyina guri kale ayaa uga dhagan, hortiisana waxaa mara jid 30 ah oo aad arkaysid galabtii inamada yar yar ee xaafada oo kubbad ku ciyaaraya meel koofur ka xigta aqalka Warfaa kase durugsan in doora.

Galabtaas markii laysku yimid oo Ugub iyo islaan kale uun maqanyihiin oo laba laba u sheekaysigii yaraaday ayaa la guda galay sheekadii weynayd ee casirkaan maanta ah laga hadli lahaa, Xaaran ayaa hadalkii furtay oo tiri:

“Naa Cambaro war ma haysid miyaa, odagii baas wuxuu sameeyay ma maqashay?”.

“Odaygee”.

“Kan xadiyo qaba xiniinyaha haka barare” Xaaran tiri:

Canbaro intay gacata calacasheeda xabadka iskaga garacday ayay tiri:

“Bismillahi ninka islaameed ha haayaarine, maxuu sameeyay?” dadka Canbaro yaqaan tan iyo hada waxay la yaaban yihiin in xabadkeedu caafimaad qabo oo qufac iyo qaaxo toona laga soo sheegin, waayo sideedaba Canbaro haday wax ay la

yaabto maqasho ama aragto xabadkay iska tuntaa, waxaase ka sii daran taa, wax walba oo ay aragto ama maqasho waa la yaabtaa Canbaro, tiro maleh inta dharayaaxyo ku dhacda xabadkeeda maalintii qudha, ilaahayna caafimaad ayuu uga daray is dilkeeda.

Xaaran intay kur kuursatay oo fadhigi qaabaysatay ayay tiri:

"Naa gabadhii Ubax ahayd ee uu dhalay, wax ma dhaluhu sow gurii kama uusan cayrin".

"Bismillahi oo maxuu uga cayrshay? habaarkiisa naga daaye" Cambaro weydiisay ayadoo xabadka iska jukaynaysa.

"Wacal ayay sidaa ayuu yiri gurigaygana sooma gali karto".

Mayran ayaa hadalkii ku soo biirtay oo tiri:

"Sow tii lalahaa waa la kufsaday maahan inantu?".

"Haa".

"Haa waa tii la yiri niman afduuban oo Al shaayaab loo maleeyay ayaa bakaaraha qori caaradii uga kaxaystay, dhowr maalmoodna guri black sea ku yaal ku haystay" Cambara tiri, oo inta Xaaran ku jeesatay hadalkii sii wadatay "sheekadu waa iga kala dhunsan tahay oo warka si fiican uma maqline bal noo sheeg Xaaraneey"

Xaaran intii ay alle ka rajaynaysay waa heshay, waa markii kontonaad oo ay ka sheekayso haddana xiiso ay u qabto sheegida sheekadaas hadda inay ugu horeysaad u malaysa ka sheekaynteeda, warkii ayay biloowday ayada oo hareeraha iska eegaysa, cid ay iska ilaalinaysana aysan garanayn, ayay hadalkii ku biloowday.

"Gabadha miskiintaa ayada oo bakaaraha wax ka doonatay ayaa niman afaf duuban qori ku qabteen oo ka xaysteen, oo dhinaca black sea la aadeen, cid ku dhacday inay ka reebtana ma jirin, waxaa loo maleeyay in kooxda Al shaayaab ay ahaayeen, shinniyi ha ku didee, tuhunka waxaa keenay kuwa ayaga ah ayaa meesha joogay mana ka celin, farna ma nuuxin markii gabadha miskiintaa la qafaalanayay" intay aamustay oo hareeraha iska eegtay ayay hadalkii sii waday oo tiri:

“Aniga Xaaran ahaan waxaan is iri ugu yaraan amiirka xaafada ayaa loo waday, gabadha waad taqaaniin idiin sheegi maayo waa biyo dahab, waxba yaanan warka idinku dheerayne aan idiin soo gaabshee, guri black sea ku yaal ayay la galeen oo ninkii lahaa maalmo ka hor la dilay cidda intii kalena ka qaxday in kasta oo dadka qaarkii ay dhahaan xoog ayaa looga saaray, taas ilaah ayaa iga og kuma danayaabi karo” ayaa Xaaran tiri ayadoo gacmaha kala fogayneysa oo sacabadda kor u jeedineysa iskana dhigaysa sheekaday hadda sheegayso inay hubto, inkastoo markii falku dhacayay ay gurigeeda joogtay, hadalkii ayay sii wadatay oo tiri:
“Yaanan warka idin ku daaline sheekada aan soo gaabshee, dhawr maalmood ayay miskiinta meesha ku haysteen oo niman af duuban iyo naago indha shareeran maahine cid kale oo guriga galaysay ama ka soo baxaysay aysan jirin, mar mar waxaa la maqlayay cabaadka iyo oohinta gabadha, anigu Xaaran ahaan waxaan is iri markaas oohinteeda la maqlayo kuwa guriga ku haystay miskiinta farsamada ayaa ka xumaatay, oo afka ayaysan si fiican uga xirin, ayaga oo xir xiran naarta ha lagu guro kuwaase, inta badan afkay ka xirnayd saan is iri, warka yaanan idin ku daaline dhowr maalmood ka dib ayay bannaanka u soo tureen goor habeen ah, halboowluhu ha go’o kuwaase, taaheedii dad jidka maraya ayaa maqlay oo u qaaday Isbitaal”.
Mayran ayaa ka dhex gashay oo tiri:
“Oo kuwa ciidan ka lagu sheegayaa meelahaas waaba yimaadaane maxay gurmad ugu samayn waa yeen gabadha”.
“Ciiddu ha cunto kuwaas ayagaa naftooda u baqa, waxay wax ka celiyaan iska daaye, waase gartood ayaan fili oo xaafadda waa looga badan yahay waase xoogaysan doonaan in shaa Allaah”.
Ayaa Xaaaran tiri hadalkiina sii waday oo tiri:
“warka yaanan idin ku daaline gabadhii si xun ayay yeeleen oo siday aniga Xaaran ahaan ii sheegtay waa iskaga dageen, darajada beela eebaan idiin baryee, gabdhii waa raysatay alla bogsii dhib kalaa yimid oo uur ayaa ku soo baxay aysan danbi ku

lahayn doqonkii dhalay dusha ha ka murxee wuxuuba soo istaagay wacal ayay sidaa ima sheegato, bal muslin allow cunugtaas maxay galabsatay, yaabanaye ”.

Canbaraa inta xabadka garaacday tiri:

“Ba’ay ba’ay ba’ay war ninku diin xumaa oo dadnimo xumaa, tii dhashayna maxay samaysay Xaraneey”.

Xaaran intay qosol dibnuhu xiran yihiin ku guuxday ayay tiri:

“Naa ma ayadaa hadli karta waa ogtihiin inuu cunaha kala siibayee, ayada oon waxba samayn waa asaga sidii awrkii ugu tuntee, cagaha alla ka gooyaha, qol ayay ku jirtaa oo iska barooranaysaa miskiintu, tabarteedii intaas ayay noqotay war gabadha ii daa waa ku dhici weyday inay dhahdo, wadnuhuu gooyay inkaar qabuhu wadnuhu ha qarxee”.

Ugub oo dul taagnayd in muddo ah oo aysan dareemin ayaa tiri:

“Dalkeena dad badan ayaa dulman dumarkuba ha ugu horeeyaane, anaguna haddaan xaawaleey nahay sheeko macna dara ah maahine inaan wax iska celino naguma jirto…..”.

Mayran ayaa ka dhex gashay oo tiri:

“Oo maxaad nagula talin, inaan hub qaadano oo raga laynaa oo odayaasha aakhiro u dirnaa, naa bal tanoo kale eega”.

Ugub ayaa qosashay oo tiri:

“Mayran saas kama wadee, ururro ayaa jira xuquuqda dumarka iyo kuwa dadka oo dhan ba u dooda, aan la xariirno, shirarka ka qayb galno diinta aan baranno wax ka wanaagsan diinta oo xuquuqda dumarka ilaaliya ma leh, dumar badan ayaa jira diinta si fiican u yaqaan ee ha laga faa’iidaysto, kuwa haweenka u dooda ha loo sheego dhibka dhaca iyo xad gudbka nala ku sameeyo, adigu haddaad ku bad ayaadi weydid maanta kuwaa dhashay ayaa berri ku badbaadi doona, arrinta gabadhaana waa inaan si dhaqso ah ugu gudbinaa”.

“Aniga kan i qaba ama aan isqabno aan dhahee, xariiqin ayaa noo kala taal aan laysku soo dhaafin, hadii kale kashaydaa gacanta iigu jirta, rag waa layska celiyaa, Manta asaga ayaa gacan ku gabbad ah toddobada caruurta ah haddaan u daadsho

xaguu gayn, maalin ayuu iga xoog badnaa maantase anaa ka xoog badan, sheekooy ku nacay”. Yaa Muslimo tiri Ugub baa ka dhex gashay oo tiri:
“Muslimo ragguna xuquuq ayay leeyihiin ha iloobin siiba miskiinkaan ku qaba oo aad har iyo habeen ka qaylisiinaysid oo aad dhagaha ka cuntay”
intas markay hadalkii marsiinayso Ugub ayaa Canbaro tiri
“Naa Ugub goormaa wiilkaagii Mahad ee baadiyaha aaday soo noqday sow qofkaas soo socda asaga maahan?”.
Ugub intay fiirisay dhinacii Canbaro eegaysay ayay tiri:
“Waa asagii, hadaa u socod ah adeerkiisii baadiye uu u aadayna waa la socda, war nabadey dadkaan ayaan soo dhaweyne”

## DHIBBANAHA DHEX JOOGA

## CUTUBKA AFRAAD

## GODKA JILICOOW

Asaga oo daallan ayuu illinkii godka Lilicoow soo istaagay Kadiye, kadin hayihii waxa uu weydiiyay ujeedka uu u socdo, wuxuuna u sheegay in meeshan laga soo wacay loona sheegay nin saaxiibkiis ah oo la yiraahdo Warfaa uu ku xiran yahay, in yar sug ayuu yiri oo mid kale oo ilaalada ka mid ah ku yiri:

"Yaxaas u soo sheeg ninkan la soowacay".

In yar kadib waa soo laabatay ilaaliyihii la diray oo yiri soo daaya si fiicanse u baara, baaritaan ka dib gudaha ayaa loo waday, waxaana la geeyay xafiis uu fadhiyo nin dhuuban da'da soddomeeyada ku jira oo timo badan oo jilicsan leh, kala qaadka afkana aad arkaysid ilko sigaar muddo lagu cabayay, gar aan lahayn hasa yeeshee shaaribo weyn oo si fiican u jaran ku yaalaan, ninkii inta istaagay ayuu weydiiyay Kadiye miyaa? haa ayuu ugu warceliyay, ninkii inta gacanta ugu tilaamay Kadiye kursigii dhiniciisa xigay kana soo horjeeday ayuu u sheegay inuu fariisto, ninkii ciidanka ahaa ayuu markaa ku yiri Warfaa ii keena, Ka dib markuu fariistay waxaa la weydiiyay waxay isku yihiin danbiilaha waxuuna u sheegay in ay saaxiibo yihiiin in ka badan konton gu'na ay ahaayeen ceesh oo milix ee loo sheego arrinta lagu soo xiray.

Yaxaas oo ahaa ninka xafiiska fadhiyay oo dadku naynastaas u yaqaaneen, wuxuu u sheegay in Warfaa uu dowladda eed ka galay oo sidaas loo soo xiray, waliba eedaysane weyn weeye ayuu ku yiri.

“Eed sideeya ayuu galay? waxaan ku naqiinay nin aad isku dhowra dadkana aan ku darsan oo afgaaban dowladanna jecele, ee see wax u jiran taliye?” ayaa Kadiya weydiiyay asagoo hoos ka leh *Eeboow ii danbi dhaaf,* ayaa ninkii ciidan ka ahaa oo dhar cadka ahaa oo hor fadhiyay ku yiri:

“Kadiye ninkaad tilmaamayso iyo ninka aan meesha ku haynaa isku caynad maahan, malaha waan is maan dhaafsiisanahay ayaan u malayne, magicii ninkaad raadinaysid?”.

Kadiye ayaa u sheegay inuu yahay ninka siinka loo soo diray ninka uu raadinayana la yiraahdo Warfaa buux, waa nin bar yar, bidaar bilow ah leh, maariin ah, dhaga waa weyn. Da’da kontomaad ka ah, dhabanka bidix dilaac yar oo waa hore bogsoody ku leh, sujuudu ka muuqato, xishooda afgaaban.

“Horta saad u tilmantay muuqiisu waayahay, hase ahaatee kani mid af gaaban maaha, aamus oo dadka nabad gali ayaa laga la’yahay, wax dhintay iyo wax nool ba cid ka baxsanaysa ma jirto, hadana waa la soo wadaa waa noo iman”.

Isla markaaba waxaa soo galay Warfaa oo lawado markii uu arkay Kadiye ayuu inta salaan u soo taagay ku yiri:

“War Kadiye ii waran saxiiboow?”.

“War adaan kaaga fadhiyaaye, maxaa dhacay Warfaa?”.

Warfaa inta kursi soo jiitay asagoon cidna weydiisan, illoowsanna ama is illoowsiinaya inuu xiran yahay ayuu fariistay oo yiri:

“Kadiye saaxiib waan sirmay, dimuquraadiyadaan run u maleeyay iyo dadku waa xor iyo qofku waxuu rabo ayuu sheegi karaa, hadaysan nabada dalka wax u dhimayn, ana waan rumaystay dimuquraadayadiina halkan ayay i keentay, ilayn ismaba ogine xabsi weyn oo kor ka furan ayaan ku jirnaa haddaan Soomaali nahay”.

Kadiyaa inta hadalkii ka dhex galay yiri:

“War Warfaa ma duulashii ayaa kugu soo noqday, neefkoodii haddii lasiiyay inay soo laabanayaan uma malayne, Bismillaahi Raxmaani Raxiim”.

Warfaa oo ujeedada gartay ayaa yiri:

“Maalintaan idin lahaa wankay dalbadeen oo madaxa guduudan u keena oo aad tiraahdeen waa la soo waayay oo mid madax madoow kenteen inaysan meel u socon waan dareensanaa, lacag khasartay dheh, tan iyo xalay indho iskuma gayn, balaa i hor maraysay markaan indhaha is galiyaba ilaa daraad…..”

Yaxaas ayaa ka dhex galay oo si yaab ku jiro ku yiri:

“War maxaad ka hadlaysaan waxba idinkama garane?”.

Kadiye ayaa u jawaabay oo yiri:

“Mudane waa sheeko dheer”.

“Meel aan hada u cararayo majirtee bal ii sheeg”. Yaxaas oo war jecli gashay ayaa yiri.

“Ninkaan wuxuu ahaa nin xaafidu Quraan ah” Kadiye hadalkii ku bilaaayay “aroor walba badda intuu tago ayuu laba juz akhrin jiray, wax badan ayaa lagala taliyay oo la yiri jooji baddaad aroorta aadayso jin ayaa jooga aroortiiye, *“jirkaya kharaare*” waa uu diiday, wuxuu yiri haddaan inaan iska daayo damco anoo tagaan ayaan arkayaa, illeyn nin la wato weeyee”.

Yaxaas ayaa kadhex galay oo yri:

“Qof jin wato maara looma helo, eedaday ayaan ku ogaaday, haye ii wad”.

**“***Waa jilcay Yaxaas af balaar”* ayaa Kadiye uurka iska yiri oo hadalkii sii watay oo yiri:

“Aroortii danbe naag meeshii fadhida ayuu ugu tagay, nabadayn ka dib Quraankii ayuu bilaaayay naagtuna waa dhagaysanaysay, markuu dhameeyey ayay ku tiri waxaan jeclaaday saad Quraanka u akhriso, oo aroor walba waan ku dhagaystaa, wuxuu ku yiri meeshaan qof aan aniga ahayn ma fariisto xilligaan imaadee adna kuma arkine side ii dhagaysan jirtay”.

“Akhriskaaga badda dhexdeedaan ka maqli jiray, qarkaas hoostiisa moolka ku yaal ayaan daganahay, cabsi yaysan ku galin kuligeen noole alle aayuurtaan nahay” ayay ku tiri.

“Sidee badda ugu hoos nooshahay”, ayuu ku yiri

“Ima garan miyaa, Jinni ayaan ahay, waana ku jeclaaday, inaan ooridaada noqdaan raabaa” intaas markii ay marayso ayuu inta istaagay soo cararay, miyirna markaas ayaa ugu danayaysay”.

Yaxaas oo yaaban ayaa yiri:

“Haye”.

“Quraan badan ayaa la saaray naagtii waa la gubay, hase ahaatee waa mar ay dulduleelisay asagii oo dhan, taas waxay fududaysay in wadaado galaan madax adag oo gaalo ah, ayagii ayaa ku soo noqnoqda hadda”.

“Shiikha kitaabo badne ma loo geeyay”.

“Meel aan la gayn maleh, waa kuwa madax adag, waa kuwa gala ah”.

“Waa run kuwa gaalada ah waa madax adagyiihiin” ayaa Yaxaas yiri asagoo uurka iska leh *kuwa Daacish ah ha ku jiraan haday raabaane waxaad wadid keen oo mar i dhaafa*.

“Bal hadda shiikhaad sheegaysid ayaan u geyn, waan maqlay magaciisa, Ilaahay inuu caafimaad ka siiyo”.

“Saa sameeya raalina hanala ka noqdo, nin saana uma malaynayn oo Jinni gaala ah oo dowlada neceb uu ku jiro, hadda waxa uu eedaysane ku ahaa qodobbo dhowr ah oo ay ka mid yihiin af lagaado uu madaxa wasiirrada u gaystay, xildhiayaanadii iyo wasiiradii oo uu u gafay, madaxweynaha oo uu liiday, marwada madaxweynaha oo ay ajnabi kala yihiin oo uu u caayay iyo magaca Al Shaayaab oo uu meel fagaaraah ku sooqaaday”.

Kadiye intau nin yaabay oo argagaxay iska dhigay ayuu yiri:

“Subxaanallaah, war Warfaa ma waalatay maxaa marwada madaxweynuhu qabo oo aad ajnabiga kala tihiin af kaaga u geeyey?”.

“Waxaas oo dhan mar danbe ayaa la ii sheegayaaye warba kama hayn, waxaan laba yaabanaa waxa meeshaan i keenay” ayaa Warfa yiri.

Yaxaas oo ay gashay inuu wixiisa si fiican u bislaysto ayaa inta Kadiye qumaati ugu jeestay yiri:

“Warfaa waxa uu dhigay wax la maqlay oo la arkay maaha, qof kale haddii loo keeni lahaa degdeg ayaa loo xukumi lahaa, xabsiga weyn ayuu dhex jiifi lahaa xilligaan, inta gef uu galay hadii layskugu daro shan iyo toban sano kama yara oo xariga haddaysan ka badnayn, aad ayuu u nasiib badan yahay anigaa arrintiisa gacanta ku dhigay intaan qof kale arag”

Warfaa ayaa hadal damcay Kadiyaa inta aamusiyay yiri:

“Khayr alaha ku siiyo mudane” hayena u raaciyay si yaxaas hadalka u sii wado.

Yaxaas ayaa hadalkii sii watay asagoo weli buun buuniskii wada oo yiri:

“Meel fagaare ah ayuu ninkaan ka yiri madaxa wasiirradu waa tuug tuug dhalay dalka asagaa laqay, Al Shaayaab hadday birayn lahayd asaga aniguna lax ayaan qali lahaa, wasiirada iyo xildhiayaanadu waa calooshood u shaqaystayaal ayuu yiri dad iyo dal aan dan ka lahayn, ciidammadu waa laaluush qaatayaal ayuu yiri, kii la xiro oo Al Shaayaab ah intay wax ka qaataan ayay sii daayan, bal beentaas fiiri iyo sharaf dhaca uu ciidamada nabada ilaaliya u geystay” hadalkiina sii watay “xaaska madaxweynahu waxa ay la barartay oo kaliyuhu la weynaadeen waa xooliha dadka ay iska cunayso ayuu yiri, madaxweynuhu danbi maleh ayuu yiri naarna arki mayo waayo waa xoolo, xoolana waxay halleeyaan Eebbe uma raacdo, ilayn markii horeba garaad ku filan ma lahayne, waxaa ugu daran oo kale, waxuu yiri ciyaalkii Al Shabab ee i gowrici rabay aniga oo aan waxba ka galabsan oo qof kale igu qalday ee Alle iga fakiyay dawlada ayaaba ka daran oo ka xun, markaad aragtid dowladu waa is haysataa Motion iyo balaayey sheegayaan, qas ayaa ka dhex socda, dhallin yaraduse amarka waa kala qaataan, dadka in la bireeyo ayay ku heshiiyeen buuq la’aan iyo ayagoon is qabqabsan ayay kaan raacin sidii xoolihii gowracaan, waxayse dhaamaan dowladaan aan mabda’ iyo u jeedo toona lahayn hadii si loo fiiriyo, waxaas iyo wax ka daran ayuu fagaare ka yiri, gafkuu galay mid yar maaha, dad ayaa loo toogtaa, ilaah baase aniga igu soo aadiyay oo jiradiisa dareemi kara, saan kuu sheegayna eedaday ayaa Jinkaan oo kale hayn jiray, waliba kuwa xeeb ka yimid oo hilib u haraadsan oo aan ku rafaadnay”.

Abaalkaaga allaa gudi kara ayaa Kadiye yiri asaga oo bakhshad u dhiibaya Yaxaas, si dhaqsa intuu bakhshadii u qaatay oo gacmaha miiska hoos galiyay oo fiiriyay, tiriyayna inta ku jirta ayuu yiri:
“Ilaah ayaan ku dhaartee intaan iyo in u dhow inaan qof kale ku sii daayeen, nin odaya oo ii yimid oo nin jirran raadinaya darteed ayaan u aqbalay, ee nabad Allaha idin nabad yeelo waana fasaxan tihiin”.
Dhex markay soo marayeen ayaa Kadiye yiri:
“War ma waalatay Warfaa side ayaad waxaas fagaare uga tiri hadalada cayn kaas ah, guryaheenaan ku baxsan la’nahay adna afkaad la galaysaa”.
“Waxuu sheegay inta badan waa been laaluushka ayuu ku bislaysanayay, dalkaan balaa u talisa haddii loo aamusana waa iloobayaan inay xun yihiin oo dad qumman ayay isku qaadanayaan waana ka sii darayaan, in la xasuusiyo waa fiican tahay, awalbaan wax laga qaadi karine”. Ayaa Warfaa yiri oo yara qoslay
“Hadda ma aragtay xasuusintii meelay ku gaysay iyo afka libaax ee Alle ka bad ayaadshay”.
Warfaa intuu madaxa ruxay ayuu yiri:
“War mahaysid ninyahow waxa dalka ka socda wax la qaadan karo maahan, godka waxaan ku arkay dhallinyaro sannad iyo ka badan ku jirta, waayo cidahooda ayaa saboola oo lacag keeni waayay markii horena been layskaga soo qabtay iyo xoolo aad ka heshaan, markii wax laga waayayna dilka loogu roonaaday sidii ay cidahoodu maqlayaan cabaadka caruurtooda oo lacagta ula soo dhaqsanayaan”, oo inta qoslay yiri “been kuu sheegi mayo ee waxaan meeshaas ku soo arkay cabsi ayay i galisay war danbana layga maqli mayo, dalkii laba koox ayaa haysata, kuwana adoo nool ayay ifka kaa qarin , kuwana aakhiarayba kuu diri adiga oo aan waxba halayn, Jannaaba lagugu raadsan aan jirin”.
“Looba joogee haddaad aamusayso” ayaa Kadiye yiri.
Markii ay baabuurkii ag yimaadeen ayaa intii aysan irdaha furin Warfaa yiri:
“Magaalda arageedu waa soo roonaanayaa ma is tiri”
Kadiyaa inta hareeraha fiirshay asaga oo aan wali illinkii baauurka furin ayuu yiri:

“Aboorkaba Soomaalidaa ka daran, bal sida saraihii waaweynaa loo raartay arag oo banaan cidlaa looga dhigay”

Wuxuuna ula dan lahaa sida hotel Shabeelle iyo sartii baarlamaanka hore ka dibna laga dhigay xaruntii dowladda hoose oo bartii ay ku yaaleen banana tahay oo dhagax dhagax loo qaatay.

Warfaa oo fatuuradii iridkeeda gilgilaya oo u maleeyay in la furay arkayse inaan Kadiye weli furin ayaa yiri:

“Kuwii sarahaas fuqsaday doqomay ahaayeen, bal may iska dagaan oo ijaar ka qaataan oo ilaaliyaan dalkay wax tar u noqon lahaayeene, waxaase iga sii daran kuwa soo socda”.

“Kuwa soo socdaa waa kuma”?

“Dowladda Ayaan ula jeedaa oo aan ka wadaa, waad ogaantoontaaye dhulkaas dad ayaa lasiin doonaa ganacsata ah oo gacanta dadweynaha waa ka baxayaa, musuq maasuq Soomaali ayaan kuu aqaan”, oo inta si fiican hareerihiisa u fiirshay yiri:

“Kadiyoow meeshaan qurux ay lahayd ma xusuusataa, Allaahu Akbar, dal lagu ciyaaray dheh”

Kadiye oo qushuuc ka muuqdo Xamartii horena dib u soo xasuustay ayaa yiri:

“Tacabkii kumaan kun gu’ sidaan ayaa u danayaysay”!

**DHIBBANAHA DHEX JOOGA**

**CUTUBKA SHANAAD**

**XAMAR**

Xamar oo macnaheedu yahay cassaan ayaa magaalda loogu magac daray maadaama sara cas cas oo badan ku yaaleen, dhul carro cas ahna ay ku taalay, waxaa kale oo loo yaqaan magaca Muqdisho oo asagu ka kooban laba eray oo ah muuqa iyo disho oo markii laysku qabto noqonaya Muuqa- disho, waxaana magacaas ugu yeeri jiray dadkii reer miyiga ahaa oo markay yimaadaan magaalada la yaabi jiray buuqeeda saraheeda iyo jidadkeeda aan indhaha qof baadiye iyo cagaar ka yimid aan u roonayan, tan ama magaaladan waa muuqa dhisho ama muqaal disho ayay oran jireen, xilliyo badan ka dibna waxay isku rogtay odhaahdii magaca Muqdisho, inksata oo sooyaalka qaar yiraahdaan magacu wuxuu ka yimid Faarisi oo macnihiisu yahay kursigii boqorka “Maqcad al Shaah” hadana inta badan waxaa laysku racaay in magacu yahay Soomaali ahaana muuqa-disho. Muqdisho ama Muuqadisho waxay ku jirtaa magaalooyinka aadka u fac weyn ee aduunka, laga soo bilaabo faraaciintii waxay ahayd meel ganacsi oo aduunku isugu yimaado waxna laysku dhaafsado, xamar waa meeshii ay ku dhalatay qarnigii koowaad ilabaxnimadii loo yaqaanay ilabaxnimadii Sawaaxilka, oo koofur u gaaratay tan iyo Mozambique kuna can baxday hadannimadeedii iyo ganacsigeedii, ahaydna ilabaxnimadii salka u ahayd markii danbe soo bixida afka Sawaaxilga oo asagu ka bilowday magaalada Kismaayo oo koofur u fiday balse aan waqooyi u soo fidin.

Ibnu Batuuta, badmareenkii Carbeed ahaana fiqi oo gu'gii 1331 Soomaaliaya yimid qorraalladii oo ka qoray waxaa ka mid ahaa kan oo uu ku yiri:

"Saylac markaan ka soo baxnay shan iyo toban maalmood ayay nagu qaadatay inaan nimaano Xamar oo dad badan ay ku nool yihiin, magaalo weyna ah, waxaana jooogay geel aad u fara badan oo maalintii boqolaal la qalo, markii aan soo gaarnay Xamar waxaa naga horyimid huuriyaal dhallin yaro saaran tahay, ganacsade walba oo soo gaara Xamar wuxuu ku dagaa guriga ninka dhalinyaradaa ee uu martida u yahay, marka laga reebo ganacsatada mar walba timaada oo dadka iyo magaalada yaqaan oo ayagu meeshay raabaan ku daga, marti galiyuhu asaga ayaa alaabta u gada ganacsadaha wuxuu rabana u iibiya, haddii ganacsadahu uu wax ka gato ama wax ka iibiyo qof, marti galiyihii oo maqan beecaas waxaa laga soo qaadayaa mid aan waxba ka jirin, habkaana faa'iido weyn ayaa ugu jiray dadka meesha dagan. Markii dhallinyaridii ay doontii soo fuuleen ayaa mid ii soo dhawaaday kolkaas ayaa raggii ila socday mid ka mid ahi ku yiri, ninkan ganacsade maahan ee waa Fiqi {sheikh}, ninkii dhallinyarada ahaana wuxuu si kor ah ugu sheegay raggii kale {ninkan qaaliga ayuu marti u yahay}, waxaana ku dhex jiray dhallinyarada nin ka mid ah ragga Qaaliga oo qaaligii u soo sheegay imaatinkeena, Qaaligiina wuxuu soo istaagay xeebta asaga oo qaar ardadiisa ka mid ahi la socdaan, mid ka mid ahna waa uu ii soo diray, markii aan soo dagnay oo aan u nimid aniga intii ila socotay waan salaannay, asaga iyo intii la joogtay ayaguna waa na salaameen, ka dib wuxuu yiri

"Bismillaahi, in mariya shiikhaan u tagaynaaye".

"Suldaanka magciisu wuxuu ahaa Abuubakar, wuxuuna ku hadlayay afkiisa Banaadiriga ah inkastoo uu yaqaanay afka Carabiga.

Saddex maalmmod markaan joognay oo cunno sadex jeer maalintii naloo keenyay ayaa maalin afraadii oo Jimce ahayd aan aadnay Masaajidka, markii suldaankii na tujiyay oo uu soo baxay waan salaamay asna waa uu i salaamay, dacas meesha yaal ayuu gashtay ana ii sheegay inaan mid kale oo meesha yaal aan gashto waxaana u dhaqaajinay dhinaca aqalkiisa anaga oo lugaynayna, dadka intiisa kale waa caga

cadaayeen, waxaa suldaanka madixiisa korkiisa ahaa dallad afar gees leh oo gees walba shimbir dahab ah ay ka lulato, martiqaadkii qasrigu markuu dhamaaday dhamaan waan salaanay suldaankii kana soo tagnay, Xamar waxay lahayd maamul leh boqor, wasiiro, la taliyayaal iyo dhamaan adeeg dowladnimo".

Qarnigii shan iyo tobnaad bad mareenkii caanka ahaa Vasco DaGama wuxuu qoray in Xamar ay ahayd magaalo weyn oo ay ku yaalaan saro waaweyn oo ilaa shan dabaq ah, waxaana ka muuqday munaarado Masaajidyo oo badan.

Qarnigii lix iyo tobnaad Duarte Barbosa oo ahaa sarkaal Bortiqiis ah wuxuu sheegay in boqrtooyadii "Cambaya" ee hadda loo yaqaan Hindiya ay doomahoodu aad u imaan jireen Xamar ayagoo sida dhar iyo xawaashi, ayaguna gadan jireen oo dib u qaadi jiray dahab, fool maroodi iyo xabag, wuxuu yiri waa meel aad ay u buuxaan hilbaha, qamadiga, masagada, miraha iyo farduhuba, sidoo kale Giriigii iyo Roomankii waxay Xamar u yaqaaneen Sarpion waxayna sheegeen in ay ahayd magaalo ganacsi fiican ka soco, waxaa la filayaa in magaaladii Sarpion ee hore ay ku taalay koofurta Xamar meel hadda laga helay lacagtii Roomanku adeegsan jiray.

Yaqur al Xamawi, sooyaal aqoonkii suuriyaanka ahaa wuxuu sheegay in dhulka la yirihaado "Bilaad al Berber" dhulkii Berber-ta oo ah magac Carabtii hore u taqaanay xeebaha Soomaaliya siiba Xamar ay daganaayeen dad madow oo berber ah horumar dhaqaale oo xoog lehna sameeyay, ganacsina la leh aduunka inta badan, Carabta, Hindiya, Yurub iyo Shiinaha oo 1416 xamar ay danjirayaal u dirtay boqrtooyadii Ming dynasty Ee shiinaha oo xariir wanaagsan ka dhexeeyey.

Xilligii gobonnima doonka xamar waxay ka mid ahayd meelihii ay ka bilaabtay dhinblihii gumeysi diidka oo ururo ka abuurmeen sida SYL iyo kuwa kale oo dagaal af iyo adin ah ba la galay gumaysiga, Talyaaniga markii lagu jabshay dagaalkii laayaad oo ingriisku dalka qabsay

waxay Ingriisku fuqsadeen oo tareenkii isku xiri jiray xamar iyo jowhar oo afgooyi sii mari jiray oo la dhisay 1914kii ayagoo Soomaaliada ugu darnaanayay.

Tan iyo burburkii laga soo gaaro magaalada Xamar waa sii dhismaysay waxayna ka mid ahayd magaalo madaxyada Afrika kuwa ugu qurxoon iyo tan ugu nabad

badan, waxaa ku yaalay carwda ugu weyn ee Afrika oo dhan, markii ay burburaysay Xamar waxay ahay magaalada ugu badan ee qalabka electronic lagu gado Afrika, warshado aan qiyaas lahayn ayaa ku yaalay, intaasna waxaa u sii dheeraa bilicda magaalada.

Kadiye iyo Warfaa oo aan midna midka kale la hadlin oo murug foolashooda ka muuqto ayaa fatuuradii galay oo dhaqaajiyay,  Warfaana uu dib u soo jalleecayo arrigii banaanaa ee saraha laga rartay.

## BUUGGA-DHIBBANAHA DHEX JOOGA-Q-11
## CUTUBKA LIXAAD
## BAXSASHADII WARFAA

Gu'giisii tobnaad ayaa waxaa ku dhalatay inuu magaalo aado, Warfaa asaga oo ujeedkiisa ugu weyn ee magaalo aadidiisu ay ahayd inuu ka baxo dhibkaan uu ku jiro iyo noloshaan canaadkaa waxa uuna go'aan ku gaaray inuu lugeeyo asagoo lacag helayn darteed oo haddii jidka dad ka sii qaada uu helo uu raaco haddii kalena tan iyo Xamar uu lugeeyo oo cidahaa miyiga marba mid ku sii hoydo, miyi waa is yaqaanniin, *sida aan ku jiro dhimashaa dhaanta* ayuu nafta ku dhiirri galiyaa markuu inuu tagaba ay ku soo dhacdo.

Xilli adag oo aayaar ah ayuu dhashay hooyadiina ku umul raacatay oo tii Eebbe u timid shan bilood ka dib dilkii ninkeeda lagu dilay ceel xoolo laga shuayayay, Warfaa ifka markuu yimid wuxuu ahaa agoon iyo rajay iyo madi, dad walaal hooyadii dhashay oo uusan arag iyo adeerkiis ayaa u xigay, adeeer ayaana xil qaaday korintiisa, aad ayuu adeerku u lexa jeclaysan jiray Warfaa oo nay naastiisu ahayd barre, waxaana magacaa loogu bixiyay asagoo dhinaca bidix feerta laayaad iyo tan saddexaad dhexdooda bar ku leh, adeerkiis Daynab waxba kama hagran sida kuwa uu dhalay iyo ka wanaagsan ayuu u soo koriyay oo wuxuu jantaba jimic u siinayay si uusan u tabin kalinnimada uu ifka ku yahay, agoonnimada, rajaynimada iyo madinnimada, inkastoo uu jiray

wiilkaa hooyadii dhashay oo weyn balse uusan arag waligii. Daynab wiil ayuu ka dhigtay inta badanse Daynab guriga waa ka maqanaan jiray oo geela ayuu u badnaa

labadiisa wiil iyo gabadhuba waxaraha iyo ariga ilaalintooda ka badan ma qaban Karin.

Nolosha Warfaa waa ay fiicnayd intii uu ka garaadsanayay markiise uu garaadsan raayay ayuu wuxuu dareemay guul guul iyo gees u riixid ay wado xaaska adeerkiis oo si xun ula dhaqmi jirtay markuu kaligii isla hadlayo wuxuu ugu yeeri jiray *eedo Abeeso,* arrintu waxay sii xumaatay markii wiilkii curadka u ahaa uu dhintay oo Eebbe oofsaday hase ahaatee ay eedadii asaga ku eedayn jirtay ayadoo ku leh maalintaad dhalataad ayaas la dhalatay aabbahaa intaadan dhalan bilo ka hor ayuu dhintay hooyadaa waa kugu ummul raacatay, dayrtaad dhalatay roobkii Alle waa joogsaday oo laga gaaro gugii dhibic lama arag ayaaskaad xanayaarsanayd iyo naxuusnimadii cidaydaad la soo gashay wiilkaygiina uu ku qur baxay.

Wax badan waa uu u soo dul qaatay asagoo qatan uu seexdo caruurta ay dhashayna ay caloosha u ayuuxiso ciil iyo murugo iyo gaajo waa la seexday, markii ilmuhu ciyaarayaan asaga mar walba shaqaa u taallay alabtan dhaq iyo halkan iyo xaaq, ariga raac, iyo adeerkaa haddaad u sheegtid oo ku dhahdid si xun ayaa layla dhaqmaa dhurwaagaan ku siin ha ku cunee, Carruurtii uu ifka dad ka weheshanayay waa ay ku dirtay oo si kale ayay u arkaan xin iyo xumaatay ku wadaan intaas.

Intaas waxaa kaga darnaayd oo oodin aan ka fuqin ku noqotay dabakeen ayaas wata ayaa tahay, aabahaa nuxuusnimadaaduu u dhintay hooyadaana sidoo kale iyo curadkii cidda iyo waligaa liiayaani maysid sidaan ayaad dad u tuugsan oo dul saar ugu ahaan, hadaladdii eedo ku tiri aad ayay u gubeen in kastoo uu da'yaraa marmarna waaba rumaystaa in sida ay ku sheegayso uu yahay kana baqaa dad inta ifka uga joogta adeer iyo caruurtiisa haduu sii joogo armaa ayagana ayaas ku habsadaa, hadana ra'yi kalaa ku soo dhaca oo dhahaya eedo waa beenleey nacayb ay kuu qabto uun ayay saan u dhihi ee dhurwaaayay igu handadaaye liayaax cuna Allaha u keeno ayada, in kastoo uu jeclaan lahaa inuu iska joogo oo eeddo cirka

Eebbe balaayo uga keeno haddana dhib iyo dhaga hadal intaan ka badan waa qaadi kari waayay.
Habeenkaas hurdo gama' ma siin, waxa uuna go'aansaday in berri uu wadada gacta saaro, inta badan hurdada waxaa u diiday habeenkaas waxay ahayd baqdin uu ka baqayo socdaalka kaligiis ah oo duur uusan waligii arag sii marayo habar dugaag iyo halaqna ay ayuuxaan, liayaaxu shan qabo shanna sii daa yahay dhurwaa warkiisaba daa qorraxdoon dhicin ayuu cidaha ag yimaadaa, murug waxaa ku taagnayd magaalo uusan cid ka aqoon oo uu tagi doono hadi Eebbe ka badayaadsho jidka waxa uu ku sii maridoono, waxa uu kaloo la seexan waayay ciil iyo caro iyo sida eedadii ula dhaqanto sida ilmaha kale u faraxsan yihiin asna mar walba oodintu ugu taagan tahay
ilmaduna indhihiisa u saran tahay inta badan, sida macaankii caruurnimo uu u waayay oo asagoo laba jir ah eedo xamaali u noqday iyo caruurteeda, wuxuu kaloo ka seexan waayay walwalka adeer haleeli doona markuu waayo, adeerkiisa uu jeclaa oo markuu joogo kaliya uu dareemo inuu dad yahay caruurtana la siman yahay, adeerkiisa aan waligii caruurtiisa wax u keenin in uu asna u keeno maahine, adeerkiisa marka uu joogo uu ka nabad galo dhibta iyo dilka eedo, adeerkiisa uu aad u jecelyahay oo qof u naxa ama u naxariista uu kaligii ka arkay, adeerka uu dhabtiisana uu ku gam'o intuu la joogo, illin kulul ba ka soo daadatay Warfaa wuxuu isku ciil kaambiyay haday hooyaday iyo aabahay ii noolaan lahaayeen haddaan walaalkayga hooyaday dhashay ee adeer ii sheego aan la joogi lahaa haddaan weynaan lahaa haddaan haddaan haddaaan, asagoo illintii ka socoto ayuu gam'ay go'aanse gaaray.
Waagu markuu baryay oo cirka iyo dhulku wali isku jiraan ayaa eedadiis kicisay, in kasta oo uu xalay dhafray hurdana in yar ka arkay haddana horuu ka soo booday oo waa ogyahay mar haday dhahdo kac waxyahow dadka is mooday oo uusan kicin waxa ku xigaa waa ul, horuu ka istaagay shaqadiisana waa yaqaanay oo tan iyo laba jirkiisii ayuu qabanayay ulna waa lagu soo baray xaabadii ayuu horey ka doonay, banaanku waxa uu ahaa qaboow dhaddaana saaranayd geedaha iyo cowska dushiisa

codka shimbiraha iyo ciga ariga mooyee sharqan kale ma jirin, barina waa waxaa ka soo kaahayay iftiinkii waabari oo hogol cas ayaa ka muuqatay, gacmaha intuu is gashatay oo xabadka ku dhajiyay ayuu asagoo gariiraya oo jirkiisa yari wada bood boodayo guriga gadaalkiisa u Dhaqaaqay, meel aan aqalka ka fogayn markuu marayo ayuu bilaaayay inuu xaabada gurbiyo asagoo la hadlaya xaabadii ayuu ku yiri:

"Mindhaa maalin danbe idinma gurbiyo".

Markii dabkii eedo shiday ayuu soo ag fariistay si uu u kulaalo waxayse ku tiri war orod meelahaas fariiso hana soo hoos galine aroor kastana waa ay dhahdaa asna dhag uma dhigo wuxuu sugaa inta qori dab leh ay ku soo tuuri oo ariga soo lis ay ka tiraahdo inta ka horreysana waa is naayaa si uu jirka u kululeeyo, markuu arkay inay qorigii ay la soo baxayso ayuu inta booday oo aqalka galay dhiilihii soo qaaday oo ag keenay si ay u cusho ka dibna ari lisid ayuu bilaaayay, markuu dhameeyay lisiddii ariga ayuu waxarihii u daayay si ay u nuugaan xerada agteedana iska istaagay, intay u yeertay ayay tiri war hooy kaalay shaahan cab, shaaha ay aroortii siiso wuxuu ahaa libta kaliya ee uu u hayo eedadii waayo dhaxantuu ka kiciyaa, shaahii markuu caayay ayuu aqalkii gadaal u galay oo buraashad adeer lahaa oo meesha taalay biyo ka ayuuxiyay aqalka gassadiisa danbana ka tuuray si uu hadhoow horey ugu sii qaato ayadoon la dareemin, arigii ayuu ooda ka qaaday oo dareeriyay kabihiisii saanta ahaa oo adeer gugii hore u keenay oo uu ifka waxa yaal uu ugu jeclaana cagaha sii gashtay ul yar oo xerada agteeda u taalayna sii qaatay labadaas kuma ekaane xoolo adduun intuu ka lahaa horuu u qaatay, qaydkiisii uu guntanaa, funaanad uu xirnaa iyo go'yar oo uu sii huwaday iyo buraashadii adeer ee uu xaday.

Dhinaca koofur galbeed ayuu arigii u dareershay in door ah markii uu socday ayuu dib u soo eegay aqalkii uu inta badan ku noolaa, ilmaa indhihiisa ku soo istaagtay wuxuu dhib soo maray markuu soo xasuustay iyo hayjadda cidladaa ee asagoon garaadsan lagu qasbay inuu naftiisa halis ku galiyo, cidlada uu u amababaxay iyo cid la'aanta haysa, carro uusan aqoon oo uu u kicitimayo iyo waxa dhib iyo halis

wadada ku sugaya, saadna buraashad biyaa uu ka wato iyo quraac la'aanta uu ku soo baxay, wuxuu dusha ka arkayay eedadii oo aqalka hor fadhida iyo ilma adeeradii oo ciyaaraya, markuu ka soo jeestay oo uu ilamadii iska tiray Warfaa waxuu ahaa nin yar oo garaadkiisu ka weyn yahay, meeshuu ka yimidna fiiro labaad uma celin.

Arigii markuu meel caws leh geeyey ayuu geed hoos fariisty, in muddo ah markuu fadhiyay ayuu inta kacay oo ri' uu aad u jeclaa qaruufay oo caano ka cabay arigiina dusha ka eegay yiri:

"Nabad allaha idin yeelo wehel iyo walaal ayaad ii ahaydeene", oo arigii dhinica guriga u dareershay saan bahal cidladaan ugu helin dibna u soo laabtay jidkana cagta saaray, lugihiisa yar yar intay qaadi karaan oo socod ah ayuu ku dhaqaaqay asagoo ka cararaya in cidlo gabalku ugu dhaco, in aan cidi soo raadinayn waa uu ogaa oo adeeer ma joogin, habar dugaag in ay gabbal dhacay gadaashii helaan ayaa cabsi weyn ku haysay, xoogaa markuu socod boobsiiyay ayuu talaabadisii isku hallayn waayay oo is yiri saan meel kuma tagaysid, orod ayuu is qaaday, qorraxduna dhabarkiisa ayay ku beeganayd, buraashadii dhiniciisa bidix ayay ka lalmanaysay, go'a faraqiisuna gadaal ayuu ka baf lahaa, ushii yaraydna gacanta midig ayuu ku sitay, koofur galbeedna waa u roorayay.

Cadceedii markay dhinaca galbeed u badatay ayuu sheeda ka arkay reer meel daggan oo marinkiisa ku aadan, waa reer Dulyar waa yaqaan,

waa nacab kale eedday isku qolo yihiin, intay dhib marsheen iyo intay adeer ku direen ma uusan illoobin, intii uu ka durki karay ayuu ka durkay tan iyo intii ay kala qarsoomeen asaga iyo aqalkii Dulyar, orodkii inta joojiyay ayuu socod galay, *cidla weynaa Alloow i nabad yeel* ayuu uurka iska yiri, gabbalkii waxuu ugu dhacay meel cidla' ah, hareeruhuu fiirshay wax dhaqaaqa maleh, jiiq jiiq cayayaan, sharqanta geedaha iyo ci dhurwaa mooye sharqan kale ma leh, ilmaa soo dhaaftay, geeri go'an iyo gabiib cidlaa ayuu ku soo dhacay, orod ayuu jaanta qaaday asaga oo weli ooynaya ,xoogaa fiican markuu ordayay oo daalay oo uu is leeyahay geed dheer oo aad fuusho raadso ayuu maqlay waxaro cigood, firfircooni hor leh ayaa

gashay nabad iyo magan galyo meeshas waxaruhu ka ciyayaan ayaa kuu ah ayuu nafta u sheegay, codkii waxaraha ayuu raacay asaga oo ordaya, in doora ka dib yabaq dad ayuu maqlay iyo asagoo ku yimid aqal dhabarkii, markuu la wareegtay ardaagii wuxuu hor istaagay odaygii cida oo salligii maqrib uu ku tukaday fadhiya oo wardinaya.

“War ma qof ayaa?” ayuu yiri ninkii oo raaciyay “waa ilmo ya,r innaa lillahi wa innaa ileehi raajicuun, adeer kaalay”

Warfaa waa u soo dhawaaday asaga oo baqaya isna leh amay yihiin dad qalatadii lagaaga sheekayn jiray, naf ayaase waddee waa uu u tagay ninkii.

“Kaalay soo fariiso adeer xagee ka timd”. Warfaa waxaa ku taagan in uusan sheegin inuu baxsad yahay wuxuuna yiri:

“Waan dhunsanahay adeer, ari ayaan la jiray waan seexday markaan kacayna arigii ma arag, guriga aad ayaan is iri waana waayay”.

“Dhib maleh adeer, waa aad damaaday way dhacdaa saan oo kale, Magacaa?”.

“Warfaa”

“Ina ayahaa?”.

“Warfaa buux ayaa lay dhahaa”.

“Allow anaa tol beelay ma ina buux baa ninka caawa cidlada marayaa, aabahaa si fiican ayaan iska naqaanay, nin fiican ayuu ahaa iyo hooyadaaba jannada Allah ka waraabshee” oo inta dhinicii aqal isku babcay ku qayliyay “Axadooy shaah iyo caana la soo orod marti ayaa noo timide” kuna soo jeestay Warfaa oo yiri:

“Sow adeer lama aad joogtid?”.

“Haa”.

“Asagana caawa jiif uma yaal mar haddaad maqan tahay, dhibse maleh adeer caawa halkan iska bari waa gurigaagi, waagu hadduu baryana waa lagu wadi”.

“Adeer ma joogo waa maqan yahay, geelii ayuu jiraa” Warfaa yiri

“Eedo meelay kuu doonto ma taqaan oo caruurta kale kama tagi karto, waan ogahay, Ilaah baase ku keenay, dhib maleh adeer ee shaah iyo caano ayaa laguu soo wadaaye naso”.

Axado shahii iyo caanihii markay kentay ayay si naxdin iyo murugo ku jirto ku tiri: “Allaa wa ilmo yar” oo inta cabitaankii dhulka dhigtay tiri:

“Hooyo ma soo dhuntay? mise xoolo baxsadaad raadinaysay?”.

Warfaa waxuu uurka iska yiri xoolo *baxsadaan raadinayay maxaan u oran wayday in lay celiyo layskuma dayeene, talo iskuma kaa sheegto*

“Maya waan soo dhumay barrinkii ciddu daganayd ayaan aqoon waayay”.

“Hah, waa lagu geyne hooyo ee waaga Eebbe ha noo bariyo”.

“Waa ina buux gabanku” ayaa ninkii yiri

“Tolla’ay ma ina Cambaraa, Eeboow janadii geey, hooyo, hooyadaa oo kalaan ahay murug yaysan ku qaban ee ii cab shaahan iyo caanaha cunnan kuu keeniye”. *Fiicanaa dadkaan, eedaday hadday ahaan lahayd naagtaan caawa saan uma rafaadeen,* ayuu uurka iska yiri, waxuuse tan iyo hadda garan la’yahay waxa eedada adeerkiis qabo ay saan ugu necebtahay, waxay sheegaysay wax ka weyn ayaa jira, yaase kuu sheegi haday jiraan?

**DHIBBANAHA DHEX JOOGA**

## CUTUBKA TODDOBAAD

## IMAATINKII MAHAD

Markii uu soo qubeystay Diiriye oo kursi dayrka yaal ku fariistay shaahna loo keenay ayaa Ugub oo ayana kursi kale oo agtiisa ku fadhida ku tiri gabar meesha maraysay, hooyo ku soo dhaqsada cunada raggan gaajaa ku dhagane.

Diiriyaa yiri:

“Gaajo nama hayso walaal maraan fogayn ayaan wax ka soo cunnay meel gaarigu istaagay”.

Shahii ayaa loo keenay, aad ayuuna u kululaa shaahu xaraarradna waa u haysay Diiriye cabitaankiisa, markaasuu fiiqsaday weliba si aad loo maqlayo, Ugub ayaa ku tiri:

“Cidii iiga waran Diiriye see lagu ahaa carrigaad ka timid?”.

Inta shaahii ka baday oo dibnaha muudsaday, koobkiina miiska saaray ayuu yiri:

“Waa lagu fiicnaa intaan ka war haayay, gadaashay Allaa og, balse ogaalkay dhib majirin jiilaalkii ayaa bilaawday, carruurtii waa nabad qabeen, Eebaa mahad leh”

“Diiriye wax badan ayaa lagu yiri miyiga ka soo guur hadda adigu sidii hore ma tihid, da’ ayaa kaa daba timid, carruurtii hadda waa weynaadeen oo waa ayagaa guursaday oo kala dhaqaaqay, ee iska soo guur wax badan ayaad dadaashaye, naso bal hada”

Diiriye intuu qoslay ayuu yiri:

“Inaad wanaag ila rabto waan ogahay, balse reer magaalka waan la yaabaa, maba oga haddii aan miyi jirin inaan magaalo jirteen, caanahaan macaan, subagga, hilbahaan baruurta leh, saliidaan carfoon, intaas iyo in ka badan ood ku raaxaysataan waa howl reer miyi soo qabtay, haddii miyiga la soo baneeyo oo laga soo tago magaalo gaajo ayaa layskugu cuni lahaa, waa run miyi sidii hore maahan oo waa dhib batay, miyi lamaba dhihi karo hadda oo magaaladii ayaa soo gaadhay, qaad iyo sigaar wiilal ruugaya oo cabaya ayaa geela ilaalsha, anagii ayaaba dhaqan gaddoon nagu dhacay saan samayno ayaan garan la’nahay, roobkii waa yaraaday waxa magaalada ka dhacaya dil iyo dhac iyo diin xumo ayaa caro Alla keentay annagana na saamaysay, tan kale Ugub magaalo dad kaama joogo, wiilkaan Mahad markuu ii yimid waan yaabay, war wiilku ma meel ayuu ku xirnaan jiray ayaan is iri, waa ninka i weydiiyay adeer kan geela u horeeya oo gambaleelka [koorta] leh geela dhan waa ka danbeeyaan ee ma asagaa ugu xoog badan?, kuwa kale ma ka baqayaan? guddoomiye camal miyaa?”.

Ugub ayaa qosol kal iyo laaba ku dhufatay oo tiri:

“War illeyn waxbaa lagu tusay”

“Shib dheh, tan nakala raacday aniga iyo asaga wax la soo koobi karo maahan ee anaa kuu sheekayne casir maanan tukane aan iska saaree weeyso ha la ii keeno”.

Dhinaca kale Mahad waxa uu galay qolka Sagal**,** labadoodu waa dad isa sheeko yaqaan, waa dad walaala ah haddana saaxiibo ah, Mahad walaashiis aad ayuu u jecel yahay lagamana ag maro, jacaylka ayada iyo Galladna ninka la socdaa waa asaga in kastoo aysan waxba qarsoonayn oo dad oo dhan ogyihiin in ay isla socdaan, balse meesha wax u marayaan iyo inta xariirkoodo qoto la egyahay baan la ogayn, Mahadse waa ninka sida gaarkaa ula socda oo ay u sheegato wax kasta iyo halka wax u marayaan, aad ayuuna ugu farxay intii Sagal yariisay nin uusan aqoon la socon lahayd in ay saaxiibkii Gallad la socoto, asaga iyo Galladna waa far iyo faraanti, xaafadda waxaa looga yaqaan mataanaha, Sagal aragtidii Mahad kadis

ayay ku noqotay ayada oo buug akhrisanaysa ayay eegtay qofka soo galay, inta buugii tuurtay ayay ku soo booday hab siisay, ayadoo leh Alla waa walaalkay, waa ay isku duubtay oo illini ka timid oo tiri:

"Waan kuu xiisay walaaloow markaad tagtay cidlaan dareemay, walaahi waan kuu xiisay".

Inta dhabanka ka dhunkaday ayuu ku yiri:

"Anigaba waankuu xiisay yariisay" oo si kaftana u yiri: "See u cidlootay aaway ninkii saaxiibkay ahaa, asagaaba howl kuugu filane". Sagal oo yara xishootay ayaa tiri:

"Waa joogaa meel igama aadin ee labadiina wadnaha labadiisa qol ayaad kala dagan tihiin, jacaylka walaaltinnimo ee aan kuu qabo iyo kiisu waa kala duwan yihiin" oo inta qososhay la kaftantay oo tiri: "Adiga dhan miyi ayaa kaa soo uraaya, ari camal ayaad ushiiree, ee ka waran miyiga ma fiican yahay".

"Markii hore ilama fiicnayn maxaa ku keenay baan is iri, balse markaan la qabsaday waxaan ogaaday nolosha dhabtaa in ay miyi taal, Soomaali waxay tahay ayaad ogaan, dhaqankeena iyo meeshaan ka soo jeedno ayaad arki, ciyaaraha dhaqanka iyo hiddaha la ciyaarayo oo aad u qurxoon fiirsashadooda kama dhargaysid, hadalka miyigu markii hore waa ila qalafsanaa qaab darro ayuu ila ahaa waase arkay in uu murti yahay, waxaan Xamar ku hayno, aboowe maxaa tiri, abaayo maxaa tiri iyo heesahaan aan dhagaysano, *madaxaan kaa xiiraa wallaahi* war maahan"oo inta yara qoslay yiri: "Ani iyo adeer markii hore waan is garaad keeni weynay wax baa na kala raacay".

"Hee, ii sheeg hee warka isii".

**DHIBBANAHA DHEX JOOGA**

**CUTUBKA SIDDEEDAAD**

**TAGIDII MAHAD EE MIYIGA**

Mahad waxaa ku dhalatay inuu miyi soo fiiriyo, adeerkood oo dhowr jeer miyi ka yimid marar badana farriimo soo diray wuxuu markasta odhan jiray caruurta miyiga ha la keeno ha soo cimilo gadistaane, balse caruurtu waa diidi jireen, wax kalena uma diidi jirine waraabe iyo waraabe dadoow ayaa jooga, biyo qaboow maleh, baabuur maleh oo waa la lugayn iwm ayay odhan jireen oo ku diidi jireen, Mahad ayaase xiniinyo iska ayaaray oo ku dhiirraday.

Socdaalkii jidka aad ayuu ugu rafaaday, waayo meesha u fog ee baabuur u raaco waxay ahayd Suuqa xoolaha, haddase waxa uu galay socdaal maalmo qaadanaya jidka la sii marayo oo xun owgiis, markii uu tuuladii tagay oo u waraystay dadka inay adeerkiis yaqaannaan, waa laguu yaqaan ayaa layiri, Diiriye meel dhow ayuu daggan yahay dad galabta carraabaya ayaad hore u sii raacine iska sug ayaa lagu yiri, meel maqaaxi ah ayuu is ka fariistay oo ka qadeeyay, in kasta oo uu ka waayay moos uu qadada ku cuno hadana hilibka ayaa aad ula macaanaaday, uurkana wuxuu iska yiri *hilibka Xamar saan uma dhadhamo ee ma xoolo jiran ayay reer miyigu magaalada keenaan,* Cassirkii markii la gaaray ayaa nin u yimid oo ku yiri:

“War ma Ina Warfaa ayaad ahayd adeer?” haa ayuu ugu war celiyay ninkii ayaa markaa yiri:

“Anigu adeerkaa ayaan ahay, aabahaa ina habreedkiis, dadkuna waxay ii yaqaanaan Hangool, ee magacaa adeer?”.

“Mahad ayaa lay dhahaa adeer” ayuu ugu war celiyay.

“Haddaa la ii sheegay inaad joogto oo ceel meel meeshaas ah ku yaal ayaan xoolo ka waraabinaynay, caruurtaase soo kaxayn xoolaha ee annagu waan ka sii hor mari, sow diyaar ma tihid?”.

“Haa adeer”.

“Haye ina soo mari marka” ayuu yiri Hangool siina watay hadalkii oo yiri “ma waxaad tuulada uga baahan tahay ayaa jira?”.

“Maya adeer”

Waa la dhaqaajiyay oo dhinacaas iyo bari ayaa tuuladii laga aaday, cabbaar hadii la socday oo bannaan cidla ah mooyee sanku neefle la arag ayaa Mahad weydiiyay:

“Guriga adeer Diiriye ma fogyahay?”

“Maya maya” ayuu yiri Hangool “Waa meel dhow, maqribkaba inaan ku tukannaan jeclahay”, oo u raaciyay “Adigu ma tukatadaa Mahad?” Mahad oo weydiinta ma tukataa la yaabay ayaa yiri:

“Haa adeer sow nin muslin ah maahi”.

Hangool intuu qoslay yiri:

“Ha ila yaabin adeer wax kale kuuma weydiine, waxaan maqlay dadkii magaalada ku noolaa siiba Xamar dhaqan waa ka tageen, diinta si fiican uguma dhaqmaan oo salaad iyo soon in yar maahane dadka inta badan iskuma hawlaan, wixii Eebbe naga reeayayna inta badan waa banaysteen”.

“Walaahi adeer dad aan tukan waa jiraan siiba dhalinyarada, balse ma badna ayaan filayaa, ee reer miyigu ma wada tukadaan?” ayuu weydiiyay Mahad adeerkiis.

“Inta tabarteen ah, in kasta oo hawl aduun oo badan nagu xariirto hadana waan dadaalnaa, dhalin yarada qaar waa jiran sida geelleeyda oo illoowsan in salaad iyo soon lagu leeyahay, Eebbese ha soo hanuunsho”.

Sheekadii ayay sii wateen Hangoonal waxuu bilaaayay inuu Mahad kala baro geedaha magacyadooda sida jeerin , jirriqoole, qurac, qansax, xarran xarreeb iyo kuwa kale oo Mahad la yaabay tiradooda, cabbayaar kale markii la sii socday oo maqribkii dhowyahay ayuu Mahad is yiri warka dhan ee uu wado Hangool waa maaweelo asaga uu ula dan leeyahay ee carro ma dhawa, waana uu daalay oo socod

kuma jiro, waxa uuna go'aan ku gaaray in uu dhaho *meeshaan u soconno berri ka hor gaari mayno, waan ogahay reer miyi inay been ka sheegaan socdaalka waana maqlaye ee na seexi adeer,* inta uusan oran ayaa talo kale ku dhalatay oo ah haddii aad duurkaan seexataan oo bahal idin ku cuno ka waran, socodkaa roon ayuu tashi ku dhameeyay balse intuu istaagay ayuu yiri:

"Adeer meeqa saac camal ayaan soconnaa, waa dhownahay lee ku haysaaye".

"Ma daashay adeer, ma nasanaa xoogaa, degmadii reerku hadda nagama fogee", haa inuu dhaho ayuu damcay hadana cidladaan gabalku ha kuugu dhaco wadnuhu waa siin waayay.

"Maya adeer waan soconaynaa ee meel dhow leen u haystay in gurigu yahay".

"Hadaba ma foga oo wax badan sooma aynaan socone, rag iska dhig", ayuu yiri Hangool asagoo og in Mahad daal iyo cabsi inataba hayaan ayuu tusinayay inuu nin ad adag uu yahay, oo dad badan ka fiican yahay sheeka beenana uga sheekeeyay oo yiri:

"Hada ka hor wiil magalada ka yimid ayaa saan oo kale ii soo raacay, markaan in yar soconay oo weli tuuladii noo muuqato ayuu inta fariistay yiri ee aaway hee gurigii manta dhan socod ayaan ku jirnaaye, markaasaan ku iri waa dhow yahay ee soo soco, taagaas gadashiisa ayaa reerku yaallaaye, waxuu yiri ani taag ma kasaayi waa dhow yahay gurigii miyaa, haa ayaan ku iri, durbadiiba gabalkii ayaa dhacay waana uu joojiyay markaan tuuladii ayaan ku laaban uu galabtoo dhan ku hayay, waayo waxaan ku iri qashin qubka tuulada ka sokeeya waxaa iskugu yimaada bahallada oo waxay cunaan ka raadsada, sidaas ayuu warkii ku daayay oo dani ku qasabtay inuu ila jaanqaado in kasta oo uu daalanaa".

Mahad oo niyadu u dhisantay isna yiri kaas waaba ka fiican tahay ayaa yiri:

"Kaas wax jira maahayn, ciyaal maamuu ahaa"

yididiilo hor lehna sii gashay, raganimana muuji is yiri sida kan looga sheekaynayo yaan adna berri lagaaga sheekayne, si fiicana waa ula jaan qaaday Hangool oo hoosta ka qoslaya arkayna wiilkii oo asaga ka orod badan.

Aaskii markuu madooayaaday ayaa mukul laba aqal u muuqatay, waxaro dhawaaqoodna dhagahooda soo gaaray iyo cigii ariga, in yar ka dibna ardaagii aqalka ee soke ayay soo gaareen, Diiriye oo markii hore aan shanqarta maqlayn oo bulaanka ariga la maqli waayay, ayaa markay soo dhawaadeen maqlay oo inta ardaaga uu fadhiyay gadaal u eegay yiri:

"War waa kuma?".

Hangool ayaa ku yiri:

"Waa anaga Diiriyoow".

"Ma Hangoolbaa qofka ila hadlayaa?".

"Haa iyo marti kuu socota".

Waxay la soo wareegeen ardaagii, Diiriye inta go'ii uu garxaydsanaa oo jilbaha iyo dhabarka isku hayay iska furay oo istaagay ayuu ka hortagay oo yiri:

"War sow nabad maaha, ragu muxuu shaagay?".

"Waa Eebbe mahadii, wax dhib soo ma maqlin" Hangol ayaa ugu hadal celiyay.

Diiriye hangool ayuu gacan qaaday ka dibna Mahad oo yiri:

"Ninkaana kumuu ahaa?".

Intaan Mahad hadlin ayaa Hangool la soo booday oo yiri:

"Waa wiil aad adeer u tahay oo Xamar ka yimid".

Mahad ayaa markaa yiri:

"Adeer waa Mahad Warfaa".

"Waa wiilkii walaalkay, adeer waad weynaatay kuma garteen". oo raaciyay "Soo dhawaada halkan ii soo fariiso adeer walaal aan jeclahaan kaa dugsane, Carrooy marti ayaa noo timide shaah bal dabka saar".

Carro oo ah xaaska Diiriye oo maqasha xirxiridoodii gabadheeda Aragsan ku soo dhaaftay ayaa u timid, durbadiiba waxay garatay Hangool markaasay tiri:

"Hangool marti kama ahan gurigaane……".

"Ina Warfaa ayaa la socda oo xamar ka yimid oo uu guriga soo marsiiyay", ayaa Diiriye yiri inta warkii Carro ka dhex galay.

Carro intay u soo dhawaatay ayay tiri:

“Eedo see tahay?”.
“Waan fiicnahay eedo”.
“Kabaha iska siiba oo nasta, shaah ayaan idinla soo ordayaaye iyo caanee”.
Markay gadoontay ayaa Mahad isha la raacay, Carro waa dhirir xigeen caataa oo dabacsanaan iyo jiljileec meelna aysan ka soo galin, sidii gabar yar ayay saanta u qaaday oo durbadiiba aqalkii kale gashay.
Hangool ayaa yiri:
“Anigu waan sii dheelmanayaa xilli fiican inaan ciddii gaaraan raabye”.
“Horta shaah cab oo naso, dayaxii ayaaba mar dhow soo baxayee, tartiibtaada ayaad u sii socone, bal warka isii, aduun maxaad war ka haysaa kii xumaa oo aan dhagaysan jirayna waa iga dab beelee”.
Mahad aad ayuu ula yaaayay labadada nin midna asaga oo guri jooga ayuu habennimadaan waan sii socon leeyahay, adeerna waaba ka daran yahay oo waaba sii daahinayaa, in kasta oo miyiga fiid iyo sideed saac habeenimmo ay isku mid tahay, geesinnimmo waa dhammeeyeen ayuu uurka iska yiri, *duurkaas cidlada ah oo bahalladu buuxaan dadka habeen iska socda, Kumaando iska daaye Mutun xataa geesinnimadaas maleh, ma ku dhaco inuu maro kaligii, xataa Ajeeyna haduu soo wato kuma dhacaan,* tan kale waxa uu la yaabay, ninkaan aduunka uu ka war haayo waa maxay, tuuladaan ayuu gaaray kana soo laabtay, tuulada intii yarayd uu joogay maahine tan iyo xalay socod ayuu ku jiray iyo xoolo waraabis.
Waxaa galay Mahad welwel hor leh iyo baqdin iyo yaab isla socda, sidee loogu noolyahay duurkaan aan guri fiican lahayn, nal iyo biyo socda haba sheegin, bahalladu iska socdaan cid ay kaaga haybaysanayaan aysan jirin haday raabaan inay ku cunaan Eebe oo kaa cesha mooyee aan laga badbaadi Karin,, ciga xoolaha maahine sharqan kale maleh, xoolaha qudhooda ayaa wax laga baqo ah, bal day geelaan dhirirka badan hadduu maskaxdiisa ka maagoo inuu kugu durduriyo yaa kaa celin kara, mas kaaba ugu daran aan loo jeedin oo dhulka loo seexanayo, haduu sariir yar horey u soo qaadan lahaa maalintii dhulka waa iska fiirin lahaa, gabbalku

markuu dhacana dushuu uga bixi lahaa sariirta, halkaas ayuu dadka uga sheekayn lahaa, talo iskuma kaa shegto, arigaaba ugu daran lagamaba seexan karo.
Waxaase uu ilaa hada ku qoslaa markuu soo xasuusto maalintii geela adeer rati ka dhumay oo uu arkay adeer oo isku diyaarinaya inuu baadi goobo, wal walna ka muuqdo markaas ayuu ku yiri:
“Adeer dhib maleh ha isku buuqin, waa la helayaa hadii la waayana hal rati lee waaye”.
“Xoolo beel xoolo muxuu ka yaqaan, hal rati lee waaye”, ayaa adeerkii yiri asagoo gafuurka tuuraya oo canjilaya.
“Walaahi adeer geelaan dhib ayaad ku qabtaa, hadda waa kanaa waa dhumayaa waad raadinaysaa, libaax ayaa cunaya hadduu rabo, dabaal weeye geel waa iska tagayaa, arigaa ka fiican meel dheer ma aadayo Walaahi arigu caadi maahan”.
“Magaalooy balaaya ku dagtay, saddex magac Ilaahay ratigaas dhumay ayaa reer magaalka garaad dhaama, war meesha ma moos inaan ku goobeeyo miyaad u malaysay, sow xoolo nool maahan waxaan hayaa”.
“Moos haddaad goobayn lahayd oo beer iska samaysan lahayd saan uma rafaadeen”.
“War iga leexo ha i daahine, xoolahaygaa cirka lagu maalayaaye aan meesha ka cararee”.
Mahad oo waxa uu dhagahiisa uu ku maqlay rumaysan la’ ayaa yiri:
“Cirkana xoolo miyaa kuu jira adeerkiis?”.
“Yaahuuu war iga leexo, iridka ii banee”, oo si uu uga sii yaabiyo Mahad yiri “haddaan xoolo ii jirin cirka, awr-ka cirka yaa leh hadaa” asaga oo arrini ka qasan tahayna meesha uga tagay, Mahad intuu sii fiirshay adeer ayuu yiri:
“Caadi maahan adeerkay, sawir ayuu ii maleeyay, wuxuu rabo ayuu ii sheegayaa”.
Wuxuu la yaabo miyiga, markii danbe waa uu bartay dhaqankii miyiga waana la qabsaday, neecaaw macaan oo udug leh oo ur xun aan la socon, caana hada la soo lisay oo xoor dhusha ka saaran tahay oo dhiil culan laga soo shuayay oo carfaya, hilib aan lagaba dhargayn macaankiisa, buuq la’aan, dhawaaq baaayuur oo dhagaha

kaa dhiba maleh, dadka miyiga dagan oo kala fog fog haddana iska war haya, isku gurmada, is garab siiya, nolol adag oo haddana ku raali galinaysa, caafimaad aan magaalada lagu haysan, miyi waa hoy nolol fiican leh.

Aragsan xishoodkeeda wax uu u dhigo maba uu san arag, miyirka ay u hadasho, markuu wax ka qosliya uu u sheego say hoos u eegto oo u qososho, xasilloonida ay tallaabada u qaado, gacmaha garaaraha leh oo ay ku laafyooto markay soconayso, tinta tidcan ee dhabarka dhaaftay, jirkeeda aan saxar baruura lagu ogayn ee siman. Geela wax ka raacistiisa waa uu u diiday, waayo waxuu rabay in uu Aragsan ag joogo, ariga la raaco, la joogitaan keeda kamaba dhargo, see buuse uga dhargaa gabdhuhii uu yaqaannay oo dhan mid la mid ah ama u dhow kuma jirtee, shukaansigii markuu ku yiri inaan ku guursadaan raabaa ma aysan qaylin oo ma boodin, hayena horay kama dhihin ee garbasaarka intay hagoogatay ayay tiri, labadii calaf isku galo is gafi mayaan, talase aabe iyo hooyo ayay ka go'daa, asaguna talo maalintaas ayuu meel dhigtay in aysan dhaafin Aragsan ayaa taladiisi ku dhamaatay.

**DHIBBANAHA DHEX JOOGA**

**CUTUBKA SAGAALAAD**

**QARAABA SALAAN**

Markay in doora wada sheekaysnayaeen Sagal iyo Mahad, ayuu yiri waxaan soo salaamayaa reer adeer Kadiye ee ma i raaci, maya ayay tiri adeer ayaan ka qaraaxaysan anoo yar ayaa iigu danayaysaye, waan xasuustaa kaftankiisii iyo caydiisii, galabtaanse ka dhargi ee waa inoo hadhoow,

Mahad iridka reer Kadiye oo soo laaban ayuu inta riixay galay, waa caado hore oo ay barteen caruurta reer Kadiye iyo reer Warfaa inaan laysku qaraacin guryaha, waayo midba guriga uu tago waa gurigiisii, walaalo isla dhashay inay yihiin oo kale ayay isku haystaan, marka uma baran inay hoodi hoodi dhahaanba, markuu galay gurigii ayaa waxaa isha ku dhuftay Siraad oo ugu yaraayd gabdhaha reerka oo ayadu aan weli guursan intii kalese reero yeesheen, intay kursigii ay ku fadhiday ka soo booday ayay isku duubtay ayada oo leh alla waa aboowgeey, asna hab ayuu siiyay,

“War reer miyiyoow warka isii” ayay tiri Siraad,

inta qoslay ayuu yir:

“Waan fiicanahay reer magaaleey”.

“Waan kuu xiisnay wallaahi, waad soo caatowday, wax ma cuni jirin miyaa, mise geelaa raaci jirtay, mana u malaynayee”.

“Ariga iyo waxaraha Ayaan raaci jiray”, ayuu yiri.

“Aboow aaboow war waxaas dadka ha u sheegin waa ceebe, caruurtaa ariga raacdee iyo gabdhahee”.

"Anba sow caruur maahi", waa qosleen, wuxuu u gudayay gudaha iyo qolka fadhiga, eedo Dhuuxeey oo fadhiga fadhida oo sidii caadada u ahayd tusbax haysta oo wardinaysa ayaa aragatay oo tiri:

"War ninkaas ma Mahad baa?",

haa hooyo intuu yiri oo foorarsaday ayuu gacanta ka dhunkaday ag fariistayna, Siraadna kursi ka soo horjeeda ayay fariisatay, Dhuuxeey intay tusbixii dhabta gashatay ayay tiri:

"Bal ii waran, miyi see lagu ahaa? cidii reer adeer".

"Waa fiican yihiin, adeer waa ila socdaa".

"Adeer Diiriye ma kula socdaa".

"Haa".

Dhuuxeey intay qosol guuxday ayay tiri:

"Walle xifaalo waa timid, dad wax waa haystaan, see ayuu yahay maandhoow da'na waa haysaaye, anagoo dhanba waa nahaysaaye".

"Iga xoog badan, waa iska yara sheeganayaa saas owgeed ayuu magaalada u yimid". Mahad ayaa tiri:

"Hooyo hadaladii reer miyiguu soo bartay, reer miyi camal ayuu u hadlayaa", oo qososhay Siraad.

"Naa wiilka daa doqomo aan wax kala ogayn waa idinkee oo ifkoo dhan inuu Xamar yahay u haystee"

"Hooyo Xamar haddaan ka baxaba inaan dhimanayaan u haystaa", ayaa Sagal tiri.

"Naa iga aamus ha i harraadine, gabigiin ba wax matarayaal ayaad tihiine" ayaa Dhuuxay tiri oo inta Mahad ku jeesatay tiri:

"Galladna hadda dhow ayuu yimid, suuliguu ku jiraa quayays, orod hooyo qolka sii fariiso". Siraad ayaa inta soo booday tiri:

"Soo bax" oo gacanta qabatay kicisayna

"War yaysan idin waaline iska so cayrsha" Dhuuxeey tiri

"Anaa shaqadeeda aqaane iska dhaaf hooyo, ayadoo cararaysa mar dhow waa kuu imaane"

“Hooyo wax yar baan ka qaraaxaysan reer miyigaan jilfaxda leh”ayaa Siraad oo qoslaysaa tiri.
Dhuuxay waa xaaska Kadiye, waa qof aad u af gaaban, war ay sheegtayna aan labo ku murmin, gurigeeda gudihiisa iyo carruurteeda qof ku eg weeye, markastana aad arkaysid ayadoo Wardinaysa, dumarka darisku waxay u yaqaanaan shiikhada, waxay ka soo jeedaa qoys diinta ku fiican aabaheed waxuu ahaa shiikh caan ah oo dad badan wax baray, cida oo dhamina waa culumo aad loo ixtiraamo.
Siraad qof firfircoon oo kaftan badan weeye dariska oo dhamina jecelyahay,
qolkii Gallad ayay
galeen oo sariirta ku fariisteen, ayay tiri
“Ninyahow xaafada adaa shidi jiray, saad u baxday wixii gabar ahaa gurigiinay ku ag meeraan, bal inaad timid fiiriyaan”. Intuu qoslay ayuu yiri:
“Adiga kii kugu ag meeri jiray aaway?, Shidane”.
“War waxaas iyo shukaansi ma aqaan gabar yar baan ahay, maba qaan gaarine”.
“Da’i kuuma dhinnee wax ma kuu sheegaa Shidane agtiisa yaanan kugu arkin, ninkaas waan is naqaanaa, si fiican waliba, hor u socod maaha, nolosha luuq luuq maroow ayuu ka bartay, agtiisa haddaan kugu argo labada lugood ayaan ku jabin”.
“Mahadsanid aboowe waan ogahay inaad iga naxaysid, kaasna mar horaan rosso siiyay wuxuu yahay waan ogaaday”.
Asaga oo soo galaya qolka ayaa Gallad yiri:
“War tuugga walaasheey iyo qolkayga la wareegay
waa kuma”.
Waa isku soo boodeen Gallad kursiguu fariistay Mahadna sariirtiisii ayuu ku noqday.
“Saaxiiboow ii waran maba maqline goormaad timid”.
“Haddaan imid ee warka isii, caafimaadka ka waran”.
“Waan fiicanahay maqnaanshahaaga maahine wax kale ma jirin, wax kasta waa saad ku ogayd, ee maxaad nagu soo kordhisay”. Mahad intuu Siraad fiirshay ayuu yiri:

“Tan day waxay dhagaha taagto, orod waxaan cabo ii keen abaayo”.

“Waxaad sheegtaanba anoo abaal idin kaga hayn ayaan maqli doonaa,
waligiinba qarqarsha, ee maxaan idiin keenaa”.

“Aniga shah”, ayaa Gallad yiri

“Anna sidoo kale”.

Markay baxday ayaa Mahad yiri:

“Nin yahow gabar adeer dhalay ayaan la soo balamay, quruxleey ah”.

“Waaaaaw, geesinnimaad iska raadisay saxiib waa ok, adeer ma ogyahay?”.

“Tuhun inuu galay ma aqaan, balse wax ma oga, aabe Ayaan raabaa inaan ka dhamee idhaahdo”.

“Amaa waa yartahay lagu dhahaa ee sug?”.

“Adiga miyaan kaa yarahay?”.

“Dhowr sano inaan kaa weynahay ma illoowday yariisoow?”.

“Waan illooayay inaad ma kore ahayd oo da’ walba la fila”, ayaa Mahad yiri.

“Ninyahow gabar miyi ma is keeni kartaan, mase is fahmi kartaan?” ayaa Gallad weydiiyey.

“Reer miyi sida loo maleeyo maahan, i warso aniga, waa dad dhaqan leh oo meel loo raaco leh, gabdhaha miyigu ku jeer ayay ka fiican yihiin kuwa magaalada, raalliyo haddaad maqasho iyo naag nolol wax ka taqaan miyi ayay jirtaa”.

# DHIBBANAHA DHEX JOOGA
## CUTUBKA TOBNAAD
## SAGAL

Sagal maqrib markii la tukaday ka dib ayay soo fariisatay kabiska guriga ee banaanka, ayada oo og in mar dhow ay Gallad iyo Mahad magaalada ka soo noqonayaan, waxayna meesha u soo fariisatay caawa in ay labadooda isku qabato ayaga oo isla jooga oo arrin meel la saaro, jacaylkii gu'yaasha la soo waday waa inuu mira dhalaa, xilligii ay gacaliyaheeda baalka ka gali lahayd waa in la gaaraa, Sagal ma mooga dadku waxay hoos uga nux nux leeynayaan, balse warkeedu waa cad yahay, geed dheer iyo geed gaabanba waa u fuulaysaa inay hanato jacaylkeeda, hadda ka hor ayay ahayd markay isku dagaaleen ayada iyo Gallad markii ay tiri kaalay Daafeed aadnee oo is soo mehersano, ka dib ciduhu ha ogaadaan anaga oo is qabnee, markaas wax nala ka qaadi karo ayaa iska yare, Gallad waa uu garanayay halka hadalkeedu ku biyo shubanayo iyo warwarka ku jira Sagal oo ah ama laguu diidaa waa nasab dhimman oo ma guursaneysid la dhahaa, asaga qudhiisu ma moogayn dhaqan xumida Soomaalida in kastoo ilaa hada wax dhib weyna aysan ka hor imaan, sidii horena dhallin yarada inta badan aysan u garaad xumayn, balse cid ayay ka dhalatay Sagal, odayaal wixii laga tagay wata ayaa jira oo talada wax ku leh, waxaase wax kasta kaga darnaa oo jacaylkiisa kala weyn waa inuu Warfaa oo abihii Kadiye oo kale ah uusan daba mar ku sameeyn iyo gacan dhaaf, meelna waa ku jiifaa in aan Warfaa wax ka halaynayn haddaan cadaadiska reerihiisu ka xoog badin, waana uu hubaa asaga iyo Mahad inay adeer Warfaa isku mid u yihiin oo u

siman yihiin. Ayadoo isla sheekaysanaysa wax kalena aan war ka hayn ayaa waxaa soo dul istaagay Muslimo oo ku tiri:

“Eedo maskaxdaadu ma joogto caawa, in dooraan ku agtaagnaa warba iimaadan hayn, ee ma dhib ayaa jira?”.

“Maya eedo wax dhiba maleh”.

“Waa garan karaa amuuraha jacylka waa isoo maray, hadana waa i hayaa oo igama marna,tan iyo intay naftu hanato qofkey rabtay bog hur dhammaan mayo, jacayl dhab ahise ma dhamaado eedo, la joogistiisa iyo hoos kaga jirkiisa xanuunkaa yaraan maahine wadnaha kama go’o, in yar markaad arki weydaba welwel ayaa kula darsi, waliba markii la isla nool yahay ayaa sii daran, markuu in yar kaa maqan yahay ba toloow ma soo nabad noqon ayaa ku gali, duco aan adiga mooyee cid kale maqlayn ayaa wadi manta oo dhan, Allow nabad keen, Eebboow dhib ha tusin, illinka markuu ka soo galo ayaa waa cusub kuu baryaa oo rayn rayn meel aad is dhigto weydaa”.

“Waaaaaw, eedo romantik ayaa tahee, waligay uma malayn inaad saan u tahay romaantik, islaan qaylo badan oo duqeeda madaxa ka cuntaan kuu haystay, raalina ka ahoow hadalkaygee”.

Muslimo intay tartiib u qososhay ayay tiri:

“Waxba maadan halayn eedo, runtiina waan jeclahay xaajigayga, balse rag lays kuma jilciyo, dushay kaa fuulayaan haddaadan gacan adag iskaga qaban, adoo nool ayay ku duugayaan, dadnimaday kaa saarayaan, ragga Soomaalida dhulka layskuma dhigo, xushmad uma hayaan dumarkooda, waxayba u haystaan naagahu in ay yihiin muuq baahiyaha guriga u yaal oo kale, markay raabaana daarayaan markay raabaana daminayaan, qof asaga oo kala ah oo dareen leh oo wax raba waxna dhibaan inay yihiin dumarku umaba haystaan, warshad caruurta u soo saarta markay raabaana isku neefiyaan ayay naaguhu u yihiin, waa siday is leeyihiin ama noo arkaan eedo”.

“Labada qof in ay is maan gartaan ayaa fiican, oo qof waliba xilka saran ka soo baxo, intaas haddii la isla meel dhigo in wax ha laabayaan u malayn maayo, far kaliyihi fool ma dhaqdo mahoo, wadajir iyo is afgarad haddii lahelo waa ok”.
“Dadkiinaan yar yar waad naga duwan tihiin haddaan nahay da’deenna, malaha reer magaal nimada ayaa keenaysa ayaan u malayn, iyo wax barashada, xilligaan yaraa oo kale haddaad ku soo aadi lahaydeen adiga iyo gacaliyahaagu ma wada qososheen, maba is aragteen, dadku aad ayay u qaab darnaayeen, waan u bogaa markaan idin arko idinka oo isla socda oo wada qoslaya, waa nin wanaagsan Alalha isku kiin daayo eeddo”. Sagal waa yaabtay,
“*Muslimada caawa Muslimadii aad taqaanay maahine see wax u jiraan, meeshay wax ka qarxin doonto waa xagee duqdaan aamin ma gashee”*, yay uurka iska tiri.
Waxaa markaas soo istaagay Warfaa iyo Diiriye oo masaajidka ka yimid, Muslimo markay aragtay ayay inta xagooda u dhaqaaday tiri:
“Culumo Alla, sow nabad maaha?”.
“Waa nabad, ee see tahay Muslimo?”.
“Waa nabad walaalow meeshaan ayaan aniga iyo Sagal ku haasaaweynaye, ninkii kula dhashay miyaa ninkaana?”.
“Haa”.
“Maashaa Allaah, waaba laydin kala jeexay”
Warfaa ayaa uurka iska yiri *been badanaa.*
“Bal adiga ii waran laysma arkin maalmahaane, odaygii iyo caruurtii see yihiin?”.
“Waa ladan yihiin, Alle mahadii” oo inta geesaha fiirisay hubisayna in aysan Sagal maqlayn tiri:
“Goormaa aroosku dhacayaa waan sugaynee, aan ka buraanburnee”. “Arooskee?”.
“Horta Warfaayoow nin muslin ah ayaa tahay oo Ilaah yaqaan, maanta nin kale hadduu ahaan lahaa waxuu odhan lahaa, ma anaa nasab dhiman gabar ku darsanaya, adiguse nin Rabbi iyo Rasuul yaqaan ayaad tahay oo dadku u wada siman yahay”, waxay fiirinaysay markay hadalka waday inta badan Diiriyee oo ay rabtay in ay

dhagaha ugu shubto, oo warku ku daadago, foolkiisana waxay ka dareentay inay la heshay halgaadii. Warfaa ayaa si miyira u yiri:

“Waxaad ka hadlayso maba garan Muslimo”

“Gabadhaada Sagal iyo ina Kadiye ayaan ula jeedaa, mise lama socotid ba in gabagabo arintu marayso, awal ayaa la yiri qof wax ogaada odogaa ugu danbeeya, Ilaahay ha isku daayo waa laba qof oo isku qalmee” markay ogaatay in fariintii ay rabtay ay gudbisay ayay tiri intaan midkood hadli,

“Dukaankaa layga xiranaaye nabadeey culima Allaay”. horayna u dhqaajisay.

Diiriye oo meel warku u socdo iyo meel uu ka socdo aan garan ayaa yiri:

“Maxay balayada ciddiyaha shaydaan ka lihi sheegaysaa?”.

“Warkeeda is ka daa, waa saad u sheegtay waa Ibliis xoolihiise”.

Markii guriga ay galeen oo fariisteen ayaa Diiriye yiri:

“Naagtaas cududada weyn warkeeda waxa baa ku jiree waa maxay Warfaa? ma Sagal ayaa ina Kadiye guursanayaa adna aadan la socon”?

“Walaaloow wax is guursanaya ma aqaan”.

“Ma gabadha iyo wiilkaa wax ka dhaxeeyaan”.

“Waa wada socdaan meelaha waan ka maqlayay, tan iyo caruurnimadoodii waa isbada socdeen, waa ilmo isla soo koray waxse intaa dhaafsiisan war uma hayo. Haday jirto waan ogaan lahaa”

“Walle Ibliisadaas warkeeda waxaaa ka jira, waxii la qariyo oo dhan naag ayaa og, waa xoolo shaydaan duulku”.

Habeenkaas markii ugub iyo Warfaa ay qolkooda galeen ayuu weydiiyay arrinta Sagal iyo Gallad, waxayna u sheegtay in muddo badan ah ay wada socdeen, balse wax dhab ah aysan ogayn, in kastoo ay maqashay in ay aad iskugu dhowyihiin, arrin guur iyo wax u dhow midna ma maqal wax warkeed haya, Warfaa waxa uu ku yiri bal warso sida wax u jiraan, in kastoo aysan aniga wax iga qarinayn oo aan ogahay, hadana say adiga kuugu fardi baxdo iigu fardi baximayso anigee.

Sagal ayada oo meesheedii fadhida oo heeso ka dhagaysanaysa gacan qaadkeeda ayaa waxaa u yimid raggii ay sugaysay, in doora markii la sheekaystay ayay waxay tiri:
“Mahad waan ku sugaynay imaatinkaaga, Allana waa ku keenay’’.
“Haye imide, wax dhiba miyaa jira?”.
Intay gallad oo dhinaceeda fadhiyay suxulka jug ku siisay ayay tiri: “Usheeg”.
“Adaaba bilaabee maad dhamystirtid” oo yara qoslay asagoo ayada ku dhibaya.
“Adaa ninkii ah, ee ma ku kor boodayaa”. Intuu qoslay ayuu yiri:
“Waayahay”.
Wuxuu u sheegay Mahad in ay ka soo guuxayso labadoodo in ay is guursadaan oo aqal galaan, arrintaana ay asaga la sugayeen in ay kala tashtaan qaabka u haboon oo loo fool saari lahaa.
“Aniga waxaa ila quman in aabe toos ugu sheegtaan, ama adeer Kadiye u sheegtaan oo uu aabe la soo xariiro”.
“Aabahay waan aqaan asaga oo xumaan ka wadin, ayuu maya oranayaa”.
“Waayo”
“Mahad idinka waxaan idiin ahay wiilkii adeer kiin dhalay, walaal aad isla soo korteen, dadka kalese si kale ayay wax u arkaan, waxa aabe ka baqayana haddaan fiiriyo waa isku dhac iyo xumaato ka dhex dhacda aabahaa iyo tolkiisa oo annagu aan abuurkeeda leenahay, ma i garatay, hadda arrinataan ha la joojiyo ma lihi oo Sagal la’aanteed anaaba noolaan Karin” intuu yara aamusay ayuu hadalkii sii watay oo yiri, “Tan kale waan u sheegay Sulub, wuxuuna yiri waa ok balse aan sugno mahad oo tashiga badinno ”.
Sulub waa ninka ka weyn Mahad oo nin aad u afgaabana dadkana wax ku darsan, xaasna leh oo guri aan saas uga fogayn reerkiisa la daggan, wuxuu dhaqan raacay hooyadii Ugub, bakhaarka iyo masaajidka iyo gurigiisa meelaan ahayn laguma arko, dadka biibitooyinka ama maqaaxidaha shaaha fariista ma ahan, taas iyo af gaabnida waxa uu kaga duwanyahay Warfaa waxa uuna ka raacay Ugub.

Falanqayn badan ka dib waxaa lagu heshiiyay in Kadiye ay isku raacaan Mahad, Gallad iyo Sulub oo loo sheego arrinta, Sugulle iyo Barre oo Gallad la dhashay oo aan magaalada joogin talada waa laga saaray, waxay weydiiyeeen Sagal in ay adeer Kadiye ula tagayso waayo aad ayuu u jeclaa warkeeda inuu diidayo uma malaynayaan, balse waxay tiri

"Gabar rag doonayaan oo ayaduna dhinac ka ordaysa, oo nin isku doonaysa ma la arkay, dhaqanka yaan lagu ciyaarin, in la i doonaan raabaa ye in aan nin doonto, waa wareey adeer waaba isoo cayrin".

Waagu markuu baryay oo quraacdii la karinayo ayaa Ugub u yeertay Sagal waxayna weydiisay waxa ka dhaxeeya ayada iyo Gallad.

"Hooyo waad ogtahy Gallad waa walaalkay, maxaa naga dhaxayn lahaa oo walaaltinimo ahayn".

"Sagal i maqal aniga iyo aabahaa waxaan instaas ku wada joognay xilligaas dheer oo gurigeennu ku dhaqanyahay idinkuna ku dhalateen waxay ahayd runta, waligeen midna kan kale been uma sheegin, idinkana saas ayaan idinku soo korinay hooyo, caruurtaan dhalay qof been yaqaan kuma jiro, ma adaa hada bilaaayaya"?.

"Maya hooyo".

"Waan ku jiifaa been in aad ii sheegto in aadan ii quurin, arrin ayaadse qarinaysaan aan qarsoomayn oo aniguba aan dareemi karo in wax ka jiraan, ee sida dhabta ah ee wax u jiraan ii sheeg hooyo".

"Hooyo runta markaan kuu sheego waad ogtahay adiguba aniga iyo Gallad inaan saxiibo nahay".

"Waan dareemi karaa jir waayeel waa wada indho ayaa la yiri, haye".

"Waan is jecelnahay aad ayaana u jeclahay, adaa yiri wax ha iga qarin, waxaan kuu sheegayaa in aan go'aansanay in aan is guursanno oo adeer Kadiye aabe iga soo doono, arrinna halkaas ayay marysaa".

"Adeer ma la socdaa oo ma u sheegteen?".

"Maya, ee haddaan rabnaa inaan u sheegno, adigana waaban kuu sheegay hadda, waxaad ogtahayna aabe kama qarsoona meel ayaan ku fadhiyaa".

Ugub intay is taagtay oo qososhay ayay tiri:
“Asagaaba i soo diray ee bal quraacda u diyaari.”
Farriintii laga sugayay Ugub siday ahayd ayay u gudbisay, in yar markuu aamusnaa ayuu yiri: “Haye Ugub maxay kula tahay”?
“Talo waad taad ku taliso gacaliye”.
Gacaliye iyo gacaliso waxay ahayd erayada aad u badan oo ay adeegsadaan labadoodu markay isla hadlayaan, dumarka xaafaddu markay hoos u sheekeysanayaan waxay ku tilmamaan labadooda, labada isa suureeya.
“Guriga xubinta aan warkeeda la garab mari karin ayaad tahay, qayb lixaad lehna waad ka tahay, waana og tahay waligay go’aan in aanan gaarin kaligay, adna sidoo kale, ee maxay kula tahay”?
“Markaad isoo guursatay waan yaraa, oo Sagasheenna ka yar, gurigaan iyo agtaada yaana ku garaadasay iyo saaxiibkaa Kadiye, waxaad ii sheegtay oo ahayd dadka Eebbe aburay ha kuu sinnaadeen, cid cid ka gobsan maleh, muslin iyo Soomaali ayaan wadannahay, talo ka fiican oo aan qaadan lahaa maleh, ayadii ayaana ku taagnahay, tan kale Kadiye dad kale kaama aha ana igama aha, saad isku tihiin waa aqaan, Galladna wiilashaada inuu kuula mid yahay waan ogahay anna waa iila mid, nin ka fiican oo aan is oran lahaa Sagal siiso ma jiro, intaad i weydiisay sow si fiican kuuguma cadayn?, marka tala aaday kuu taal”.
Intuu istaagay oo foolka ka dhunkaday ayuu yiri:
“Talo waa taad ku Talisay, gacaliso”.
“Fariiso aan quraacda kuu keene” inta tiri ayay ugu dartay “Talo aday kuu taal waxaan ka wadaa Diiriye iyo odayaasha ciddiinaa saad wax ugu sheegi lahayd”.
“Oyadaal ciddayda wax dhib ah iguma hayaane, waa walaalkay ninka aan raalli ahaanshada ka raabaa”.
Warfaa aad ayuu u xushmeyaa walaalkiis, waa ninka soo gacan qabtay oo soo taakuleeyay marka laga reebo Bulxan iyo Birre, dadka reer miyiga oo magaalada soo aadaya ayuu neefaf ariya ugu soo dhiibi jiray si uu u gato oo aan wax barashidiisu uga dayacmin, markuu magaalada yimaadana talo iyo moodba {maal}

waa isugu dari jiray, kuna dhiirri galin jiray wax baro walaaloow intaan noolahay, mugdi anaa ku soo koraye, haddaan dhinto war maba yaalee, intaan dhaqdhaqaaqayo wax baro, Bulxan, Birre iyo Diiriye noloshiisay leeyihiin, waana uu ogyahay taas oo nin lib dhaca maahan. Birre caruur la’aan ayuu dhintay, Eebbe ha u naxariisto, quraanka uu u akhriyo iyo duco ma dhaafo iyo siyaaradiisa oo uu dhawr wadaad u yeero oo quraan loo akhriyo, Bulxan la’aantiina bahalladaa ayaa cuni lahaa, wiilna waa ka dhigtay, Bulaxanna kama dhimane waa ka dhuuntay, kuwuu dhalay iyo kuway sii dhaleen ayuu dhex joogaa, Diiriye walaal wanaagsan waa nool yahay, xushmad iyo jacayl intaba waa la garabtaagan yahay waana u hayaa.

Quraacdii markii loo keenay ayuu ku yiri Ugub Sagal iigu yeer, Sagal ayaa soo gashay ayada oo wadnuhu bug leeyahay haa aabbe ayay tiri, fariiso ayuu ku yiri, markaasay geeskiisa fariisatay, maya hortayda soo fariiso ayuu ku yiri, hortiisay soo fariisatay ayada oo hoos eegaysa markaasu yiri:

“Awalba hoos igama eegi jirine maxaa jira manta?”.

“Waxba aabe”.

“Waad weynaatay kulama yaaayayo, wadna kurkur yaanan kugu diline, hooyo say ii sheegtay miyaa arrintu”.

Warfaa carruurtiisa wuxuu ku soo koriyay in aysan ka baqin, xushmad iyo ciseyn iyo kadanbayn inay labadooda waalid u hayaan ayuu soo baray, waligii cunug uu dhalay ma dilin, waano iyo wax u sheeg iyo canaan ayay carruur wax ku leeyihiin ayuu yiraahdaa, dilku waa kaga daraa ilmaha kumana toosaan oo madax adayg ayay ka sii qaadaan.

“Haa aabe” ayay tiri

“Waad isla meel dhigteen miyaa go’aankaas, waad gaarteen”.

“Haa aabe”.

“Haa aabe waxaan ahayn maanta lagaa waaye, orod in uu shaqadii aaday iyo in kale soo fiiri, oo haduu joogo inta aanan bixin ha ii yimaado”.

“Haye aabe”.

Waa ay baxday Warfaa oo hoos ka qoslaya, cagahay inta dhulka ka qaaday oo gurigii reer Kadiye gashay ayad oo aan cidna salaamin qolkii
Gallad oo aysan garaacin dalaq tiri, asaga oo shaatigii xiranayana u gashay, markaasuu ku yiri, yaa ku cayrsanaya, qofna ayay tiri, hadaladii ayada iyo hooyo dhex maray iyo ayada iyo aabbe ayay u sheegtay haddana aabaa ku raba ayay tiri, Gallad oo arrinta oo dhan kadis ku noqotay ayaa yiri, maxuu iga raabaa? , Ilaah ayaa rag kaa dhigee soo ogoow adigu, ayay ku tiri, inta kabihii gashtay ayuu yiri haye hee na mari, libaaxa noo gee, markay dayrka sii marayeen ayaa Dhuuxeey waxay tiri war ma wax daran ayaa jira, maya eedo ayaa Sagal tiri, ayada oo diidan in waqti dhumo.
Qolkii Warfaa ku jiray ayuu gargaraacay, soo gal ayaa layiri, adeer Warfaa oo markaas quraacdii dhamaysaty ayuu u galay, fariiso ayuu ku yiri, Galladna kursi gees ka xigay ayuu fadhiistay sidii Sagal, maya hortayda soo fariiso ayuu ku yiri, waana fariistay.
“Ma soo quraacatay mise waa laguu keenaa”? ayaa Warfaa yiri
“Maya adeer, waan soo quraacday”.
“Bal ii warran see tahay? hooyo cidii see yihiin?”.
“Dhammaan waala fiica yahaya adeer”.
’’Maashaa Allaah” oo sii raaciyay “Waxaan kuugu yeeray sow ma ogid? waaba ogtahaye”.
“Haa adeer”.
“Haye bal warka isii”.
“Wallaahi adeer saad u maqashay weeye arrintu”.
“Waryaa sidii nin raga ah iila hadal, nuucnuucdaan qaab darada ah oo adiga iyo gabadhaan maanta aad wadaan war maahine, si fiican warka iigu sheeg”.
Warfaa waa canaanan jiray Gallad tan iyo miilintu dhashay, tanse ka duwan, “*xiniinyaha banaanka soo dhig weeye, jileec yuusan kaa arkin iyo baqdin, nin jilicsan naag laguma darsadee”*, ayuu laabta iska yiri.

“Adeer aniga iyo Sagal muddaan wada soconay waana is jecelnahay, si soohdin ka bax ayaana u jeclahay, inaan isguursanana waan ku tashanay, balse marka aan adiga iyo aabe idiin soo bandhigno, oo ogolaansho iyo duco idin ka helno”.

“Wanaag ayay ku dhammaan adeer, sidii roon Eebbe ha noo yeelo, laba labayna yaysan ku galin, awoowgaa Bulxan iyo intuu dhalay meel ayaad iiga taalliin”.

Gallad raynrayntii ayaa ka badatay adeer Warfaa gacmaha iyo foolka ma ka dhunkataa, ma u ducaysaa ayuu is yiri, haddana waxa uu soo xasuustay, adeer in u mar walba dhihi jiray, nin raga iska dhig, noloshu nin jiljilicsan marabto, warna ha lagaban waxaad rabtana ha ka waaban, waa yahay adeer mahadsanid ayuu yiri, asaga oo inuu duulayo iyo inuu socdo kala aqoon ayuu illinka ka baxay oo Sagal oo war ka sugaysay oo banaanka fadhiday u tagay.

Gallad shan gu’ ayuu ka weyn yahay Sagal, sida uu asagu sheegana waa uu xasuustaa maalintii ay dhalatay, wuxuu ku yiraahdaa maalintaad dhalatay qof aanan u jedin ayaa ila hadlay oo igu yiri

“wehelkaagii nolosha ayaa manta dhalatay”

Ayaduna waxay ugu warcelisaa

“markii laguu wan qalayee, waa wiil la yiri baa, anna lay waxyooday”, taasi waxay u ahayd kaftan ay isla yaqaanaan, balse kaftan jacayl huwan ayuu ahaa, wadnayaal is raba dhabtood ku dheehan tahay, markii Sagal yarayd Gallad waa uu ciyaarsiin jiray, hadday indhaha saartana oohin ayay la dhici jirtay ilaa uu ka xamayaaro, in kastoo asaguba ilmo ahaa markaasay, markaas ayay qososhaa oo dhabanka ka jiid jiidaa, sidaas ayay iskula soo koreen.

Markay soo yara kortayna gabdhaha yar yare ee darisku waxay ku xifaalayn jireen, ninkaagii ayaa soo socda, ninkaagii waa kaas iyo haddallo jaadkaas ah, ayaduna ku dhihi jirtay, ila dhaafa warkiina xunka.

In kasta oo ay yarayd haddana waa ay ogayd inaan Gallad dadka ula sinnayn, way dareemaysay in ay aragtidiisa ku faraxdo, balse affar iyo toban jir ay tahay da’deedu, waxba uma kala cadayn, qalbigaan gudaheeda ka soo dhex qaylinaya waxuu sheegayo ma garanayn, rayn raynta gasha markay aragto ama maqasho

codkiisa meelay u socoto ma ogaan Karin, hubaalse waxaa u ahayd inuusan dadka ula sinnayn, waxayse dareensanayd in uu si gaara ugu dheer yahay, walaaltinimmo wax ka weyn inay jiraan oo jiidaya, awood qarsoon in ay wado.

**DHIBBANAHA DHEX JOOGA**

**CUTUBKA KOW IYO TOBNAAD**

**BANDHIGGII JACAYLKA**

Gu'geedii toddobo iyo tobnnaad ayada oo kabbiska gurigooda hor fadhida goor fiid ah, ayaa waxaa ku soo leexday Gallad oo meesha marayay waana uu la fariistay, sidii ay horeyba isugu taqaanay dareenkii mar walba gali jiray markay aragto ama maqasho asaga ayaa ku biloowday, waxaa ugu daran calaalaha dhididku wada qooynayo oo aysan marka kale isku arag, rayn rayn culays Watada, ma ku durugtaa aad dareentitd kulaylka jirkiise oo ay is dhahdo, waxay ku hammisaa meeshay rabto ha ka dhacdee xabadkiisa isku tuur, barkin ka dhigo, asna gacmihiisa xoogga badan ha ku huwiyee, macaanoow waan ku jeclahay ku dheh, waxyaabo kale oo isbadal ah oo ay aad ula yaabto oo ay isku aragtayna waa jiraan,

Sheeko ayay Meeshaii ku qabsadeen, inta sheekadu socotayna siduu isku yaqaanay asna naftiisa ayuu guuayaabo ku wadaa iyo dhiirri galin,

"*hadal doqon yahow nin ayaa Alla kaa dhigaye, waxa uurkaaga ka guuxaya banaanka soo dhig, jacaylkaan kaligaa ku daashaday dibada u soo bixi, sidaad u jeceshahay ayaduba waa ku jeceshahay oo waad ka aragtaaya, balse waa dumar waa xishoone ee Allaa rag kaa dhigee afka furo, wax waliba soohdin ayay leeyihiin intaan ka badan ma qarin kartid jacaylkaaga, waxaad qarsataa waa ku qarsadaan, caawa waa kala bixiiye"*

xagee ayuuse hadal ka bilaaayaa gabar walaashaa oo kale ah jecloow waa murug iyo yaab, tan la dhalatay waxba ugama duwana, haddana wadnahaan waa uu u talin waayay, iskiis ayuu isku maamulayaa, asaga oo dhan ayuu maamulayaa, in badan

ayuu isku dayay inuu maanka ka saaro, maankuse waa uu diiday Sagal maahine ma qof kale ayaa jira, go'aanka wadnihiisa eek ama danbasta ah kaas ayuu ahaa, garaadkiisu waxa uu kula doodaa haddaad taan rabay iga dheeraysid xaggee ii wadaa, maskaxdu markay arinta rogrogtaba muuqaalka sagal maahane wax kale ma aragto, naftu ayaday u nugushahay oo meel kale ku nasan mayo ayay u sheegtaa, indhuhu waxay daawadaan ayaday ugu jecel hiyiin una qurxoon, dhaguhuna waxay maqlaan codkeedaa u macaan, luguhu intaas na kaxee ayay ku hayaan, aadideeda kama daalaan, gacmuhu intaas waxay ku tallamaan goormaad taaban dusheeda xariirta ah oo salaaxi doontan, afka mac sii ayada waxaan ahayn kuma hammiyo, dumar kale inuu lahadlo maba rabo, wuxuu samayn lahaaba Gallad maanta waxaa wada oo ka awood badan waaxyaha jirkiisa oo wadnuhu horseed u yahay.

In door ah markay sheekaysanayeen ayuu yiri, caawa arrin ayaan raabaa inaan kuu sheego ee ha ila yaabin hana qoslin, ma waalli, waan miyir qabaaye, waa maxay arrintu ayay weydiisay, see ugu sheegtaa intuu is lahaa ayaa afkii hadalkii ka xaday oo la soo booday:

"Waan ku jeclahay Sagal, waligayna waan ku ku jeclaa".

Ifka waxay maqasho eraygii ugu macaan badnaa ayuu ahaa eraygaas, wadnuhu inuu uurka ugu dhacay ayay u maleysay, imisay sugaysay inay afkiisa qurxoon ka soo baxaan hadallo caynkaas kaas oo kale ah, samraa ayaa sadkiis hela waa run, ilmaa indha ka qoysay, hoos ayay fiirisay oo garbasaarta isaga tirtay.

"Sagal maxaa kugu dhacay ood la ooyn?" ayuu yiri.

Ayadoo weli hoos u jeeda oo ilmadii tiri, ayay ku tiri:

"Rayn rayn ban la oyn iyo riyadayda i rumoowday" oo inta madaxa kor u soo qaaday oo eegtey ku tiri:

"Malaboow, aniguba waan ku jeclahay, tan iyo maalintan garaad yeeshay adaan ku eeganayay". *Ma qaylisaa oo dadka ma isugu yedhaa rayn rayntaan ila qaybsada ma ku dhahdaa* ayuu laabta iska yiri, ayada ayuu eegay, qurux badanaa Sagal caawa, foolkeeda shuban ee dhabannada yara kuusan leh, indhaha cadcad ee birta madoow leh ee daymada qurxoon, dibnaheeda madoow ee aad moodo bil

dhalanaysa iyo bil dhacaysa oo lays dul saaray, qoorteeda dheer ee cabayaadyaha leh, sankeeda dhirir iyo gaabni u dhaxeeya, midab keeda somaaliga ah, eegmadeeda dareen kaca leh, dhoolla cadaynteeda laab qaboojiska ah, anshaxa iyo wanaaga ay canka ku tahay ayaa intaa u sii dheer.

Habeenkaas waxii ka danbeeyay sheeko dheer iyo soo jeed ayaa u bilowday, waxay har iyo habeen ka wada sheegaysan jireen labadooda siin ee gacan qaadka “mobile” fariimmo qoraallo aan dhamamaadka lahayn ee sida erayada macaan ee qalbiga u roon, dhambaalada jaceylka ay isku gudbiyaan, labaduba waxay ilaalo ka yihiin markasta gacan qaadyadooda ay ku wada xariiraan, markay isla joogaana dhago iyo indho aan ayaga ahayn maleh, dhulku hadduu dhinac ka soo dumo dareen uma leh, waa cusub ayaa labadooda u baryay iyo nolol cusub, xaafadina waa la dareemay isbadalka labadooda ku yimid, wax weynse looma arkin, waayo waagoodii horeba waa isku lammaanaan jireen in kasta oo la kala baqi jiray, waxna laysku sheegan jirin, balse markasta labadoodu ma kala maarmin, socdaal dheer oo nolol wadaag iyo ka tashi aayatiin iyo dhisid jacayl dhidibo adag ayaa caawa u bilowday labadooda.

**DHIBBANAHA DHEX JOOGA**

**CUTUBKA LABA IYO TOBNAAD**

**XAN FUDUD**

Maalintii Warfaa uu la hadlay Gallad oo dareen ogolaansho uu u muujiyay maalintii ka danbaysay arrinta labada is jecel xaafada ayaa lagu wad waday, ayada oo warkiiba loo badalay in wax kasta dhammaaden oo arooskii mar dhow la dhigayo, toddobaad haday ugu badato ay ka hartay.

Sidii caadada u ahayd dumarka xaafadda bar kulankii ayaa casirkii lays kugu yimid, maantase maalmihii hore waa ka duwan tahay oo nux nux ayaa socota, laba laayaa afka lays kula jiraa, markii Ugub guriga ka soo baxday warkii waa joogsaday, ayada oo aan weli fariisan ayay tiri:

“Maxaa loo aamusay, warka maa la wado mise waan idin ka qasay”.

“Mayee sheeko caadiyaan wadanaye soo dhawoow oo soo fariiso”. Ayaa mid tiri,

Markay fariisatay walina la’aamussan yahay ayaa warkii waxaa bilowday Xaaran oo wax la qariyo aan aqoon, warkana runta ka sheegta waxayna tiri:

“Maxaad la aamusan tihiin, markii ay maqnaydba waad haysateene markay timid maxaad u aamusteen ma baqdeen?”.

“Qofka la heystay ma anigaa?” ayaa Ugub tiri

“Haa” ayaa Xaaran tiri kuna dartay “Aakhiro qof dhinaca ii galaya ma leh”.

Waji gabax hadday tagtay arrintii, lana is hor fadhiyo ayaa Cambaro tiri:

“Ugubeey wax kale maahine waxaan maqalnay in gabadha Sagal ah la soo doonay, intaas ayaan isku keennay maahine wax kale maahan”.

“Cid hadda soo doontay uma jeedo, haddiise la soo dooni lahaa sow gabdhaha lama dooni jirin, taasi wax cusub maahan ee warka runta ka sheega, waxaad isku keenteen sow maaha gabadhii Ugub nasab dhimman ayaa guursanaya, waxa xaafadda meeraysanaya war waan ogahaye”.

“Afkaaga caano lagu qaayay Ugubeey”. Ayaa Xaaran tiri

“Saas maahan ee waxaan isku keenay hadii gabadha markii hore sida gabdhaha kale loo gudi lahaa saan uma dagdagteen oo ayada oo yar salka kama kacdeen”.

Ugub ayaa inta fadhigii qaabaysatay tiri:

“Horta dad is yaqaan oo walaalaa ayaa nahay, in aad warka igala gambataan maahan, arrintaan uurkiina ka guuxaysa mid ayaan idin ka leeyahay, tan gudniinkana mid ayaan idin ka leeyahay”.

Xaaran ayaa u jiibisay oo tiri:

“Midba”

“Waxaan idin weydiinayaa gudniinkan aan caadaysanay xagee ayuu ka yimid ma taqaanaan?”.

“Fircoon ayaa keenay ayaan maqlay meel xun ha ka baxe” Canbaro tiri:

“Fircoon kumuu ahaa ma taqaanaan?”.

Xaaran ayaa tiri:

“Xaaraanku waa kii Ilaahnimada sheegtay”.

“Haaa, marka sow ma ogidin qofkii fircoon warkiisa raacaa in uu yahay qof ilaahnimo u qiray?”.

“Bismillahi Raxmaani Raxiim, Ugub naa ma walaatay, cid kaas Ilaahnimo u qiraysa maleh waaba gaalnimee” ayaa Canbara tiri ayadoo dhawr dharayaaxyo xabbadka iskaga dhufaty. Mayran oo amusnayd ayaa hadalkii soo gashay oo tiri:

“Wallaahi warka Ugub waa war weyn oo sax ah, oo waligayba saa uma fiirine, wadaadada waxaan ka maqlay in diinteenu aysan ogolayn gudniinka fircooniga oo Rasuulku “scw” uu yiri “nacaladi ha ku dhacdo qofkii gabadha quruxdeeda iyo raaxadeeda wax u dhima oo kala gaasira” ha la sunneeyo gabdhaha dhiig yar ha laga keeno, waxayba wadaadada qaar leeyihiin waaba loo dhaafi karaa gabadhu say

ku dhalatay, marka soo jid maahan qofkii nabiga iyo diintu waxay tiri diida oo fircoon warkiisa yeela in gaalnimo lagu tilmaamo…" Canbaraa ka dhex gashay hadalkii, sidii caadada u haydna jugta isku haysa oo tiri:
"Subxaannallaah, war bal daya, oo hada ma gaalaan nahay gudniinkaan waligeen ayaan ku dhaqmi jirnee, waa war cusub, qofkii ifka joogoow maxaa wax maqlid kuu laaban".
"Wixii aqoon daro kuu gayso dhib maleh Eebana waa kaa dhaafi, wixii aadse bareer u samayso abaalkeeda waa lagu marin, shalay dadkeena dhaqan ku adayg iyo gabadhaha saanaa u roon iyo aqoondaro ayaa nahaysay, maantase wadaadadii ayaa wada sheegaya in aan lagu dhaqmin gudniinkaas oo uu xaaraan yahay, shalayna wadaadadii joogay dhaqankii ayaa ka xoog batay oo kii runta sheega dayruuba ahaa, marka qiil noo banaynaya ma leh, marka qofkii ku dhaqaaqa gudniinkaas waa muslin ma dhihi karnaa Canbaro?".
Canbaro intay dibnaha xoog iskugu keentay, farahana taagtay ayay tiri:
"Anigu wareeray, waxayse ila tahay inaan wadaadadu aysan masabidanayn Rabbi iyo Rasuul, oo waa xaaraan haday dhaheen ay xaaraan tahay, "u u u u" Eeboow na cafi".
"Naa Maxaad la wareeri, "u u u u" ku lahaa, warku waaba cadyahee ama fircoon raac ama Eebihii ku abuurtay raac, warku waa intaa, war qoftu see tahay" ayaa Mayran ku tiri, kuna dartay "oo dhaqtar ayaaba waxa uu igu yiri ummul raacashada inta badan waxaa keena gudnninkaas, cudurro badana waa keena sida infekshin iyo waxyaabo badan oo aanan garanayn oo uu ii sheegay".
Waa la aamusay qaar ayaa hoos danbi dhaaf Alle weydiisasho galay, qaarna waaba yaabbanyihiin, kuwa kalena dibnaha maroojiyeen si ay diidmo u muujiyaan oo warkuba sheeko baraleey ula muuqdo, hadalkii ayaa waxaa bilaaayay Canbaro oo ayadu dhab iyo dheel si wax yiihiin iyo si wax u socdaan kala garan la' oo tiri:
"Haddaan gabdhaha iska dayno oo aan saas aad sheegaysid ku dhaafno sow jidadka lagu fuul fuuli mayo, ilayn isma ilaalin karaan markaase".

“Kuwaan jar jarnay oo tol tolnay sow maahan qaarkood kuwa hadda jidadka lagu fuulayaa, maxaa la soo kordhiyay ii sheeg, raaxadoodii
waa lagu ciyaaray, caafimaadkoodii lagu dheelay, warkii Eebbana waa la gees maray, hadana waa kuwaas qaarkood suuqa ku jiraan,” oo hadalkii sii wadatay Ugub oo tiri: “Warkaan gudniinka waad igu maaweelinaysaane oo kii kalaad igu iloowsiinaysaane, waase fiicneyd inaan ka hadalno, ee gabadhayda hadalkeeda maxaa fadhi ku dirirka xamashada keenay, dad intaa is yaqaanay ayaa nahaye intaad ii timaadan wax ma i iweydiin weydeen”?.
Muslima oo aamusnayd oo inta badan aaban hadlin, balaayase la aamusan ayaa tiri: “Dad hoos ka cunida waan isla wada naqaan, wax dheeriyana anagu hada ma samayn, xan fudud uun ayaan meesha ku haynay, raalina ahoow haddaad ka xumaatay”.
Ugub oo yara xanaaqday balse aan muujinayn ayaa tiri:
“Naa ma anaa dad kula xanta?”
“Adiga kuma oran wax baad xamataa, afkaygana sooma marin, ee caado dumar ayaan ka hadlayay” ayay tiri Muslimo kuna dartay “Naag aan waxa uurkeeda ku jira run iyo beenba aan sheegin oo dumarka kale la qaybsan, naagba uma aqaan anigu”.
hadalkaasna waxay ku duraysay Ugub oo inta badan aan la fariisan dumarka mar mar maahine hadday la fariisatana xanta iska dhaafa ku tiraahda, Muslimo magaceeda runta ah maahan, cid u bixisayna lama yaqaan, waxaase loo badiyaa in ayadu naynaastaa suuqa gashatay, hubaalse waxaa ah in ayada iyo naynaasteedu aysan isku qalmin, warka iyo isku dirka aad ayay ugu dheeraysaa, waxay ku faantaa in ay waaya arag ku tahay sida guryaha loo bur bursho oo labada is qaba laysugu diro, waxay tiraahdaa daqiiqad kaliya ayaa igu filan oo aan naagta la hadlo si aan ninkeeda ugu diro, dad ayay sharad kula gashay xaaska madaxweynaha ma i tusi kartaan, inaan kala furaan idin tusiye ayada iyo madaxweynahee, ama aan dowladdaba anigu u taliyo oo warkaygu socdo anigoo ayada adeegsanaya, war

wuxuusan kugu daalin Muslimo waa Ibliis garab waayay ee mar horey kala diri lahayd dowladda iyo golaha wasiirrada iyo baarlamaankaba.
“dadka faraha ka qaad oo nabad gali” ayaa
Mayran ku tiri,
“Cid aan faraqa ku dhaganahayba uma jeedo” ayay ugu hadal celisay oo inta istaagtay tiri “Idin daayay oo idin ka tagay haddaad khayr isku haysaan”.
Xaaran oo sanka bololinaysa ayaa inta fiirisay ku tir:
“Sii soco macaanto, Soomaalidu waxay tiraahdaa balo markay kaa maqan tahay mus Islaameed ayay ku jirtaaye, kolley meel kalaad busta ka kicinaysaaye, nabadeey”.
Muslimo intay fiiro yasida fiirisay Xaaran ayay tiri:
“Naa sow taan aqaanay ma tihid waxba wadaad hayskaga kay dhigin, naarta meesha lagaa gaynayo Eebbe igama geeyo” dhaqaajisayna.
“Warka waxa keenay waa ayada, maanku ha ka guuree, doqontaana waa u jiibinaysay ilayn waxba ma kala ogee” ayaa Xaaran tiri markii Muslimo tagtay, ayada oo gacanta ku fiiqaysa Canbaro aragtayna in Cambaro war soo wado, markaasay tiri:
“Naa hadal adoon is dilin, Bismillaahi, xabadku kuma xanuuno miyaa xabad ku xoog badanidaa” intaysan warka dhmayn aya Canbaro is garaacday oo tiri:
“Bal Musllin alloow aflagaadada iyo nabsiimadaas eega, Ilaah waxaan ugu mahdinayaa inaan warkaaga cidi qaadan, saa waa lagu yaqaanaaye naag toora tooruhu go’ay ayaa tahay oo dheeli tirkii hadalku ka dhumay.”
Ugub ayaa soo dhex gashay oo tiri:
“Naga daayaa warkaas iyo is qab qabsiga cida aan hada haysto malehe, waana run gabadhayda hadii la soo doono ceeb maahan, Gallad nin ka fiicanna uma heleen ee warka kale oo meesha yaalaa waa maxay?”.
“Waa run war kale majiro oo meesha yaal, balse dad ayaan ka maqlay is kuma xirmaan oo nikaaxu iskuma qabto” ayaa Xaaran tiri

“Maxaan idin iri nagtaan hadalkeedu qabasho maleh sow idinma oran? waa la hadlaaye hadal weeye garaadkeedu” Canbaro tiri
“Afka ha i goosan waxaan maqlaan sheegayaaye anigu, santuuq maahi wax lagu qariyee”
“Oo haddaa ma nacas iska hadashaa tahay oo warkeedu soohdin lahayn, heedhee waxbaa layskula haraa” ayaa Mayran ku tiri.
Ugub ayaa soo dhex gashay kuna tiri:
“hadda dood uma joogno Xaaranna waxay maqashay uun bay sheegtay, sideedana in wax la qariyo waa laga fiican yahay, runtu waa nasiino aan dad badan ogayn, in warkaas aniga iyo qoyskayga laga sheegayo in uu jiro anaaba og, ee dan iyo heelaan ka lahayn, markaad qalad ku jirtid ayaad hadallada ka gubataa balse qofku hadduu toosan yahay hadalku ma dhibo, mana gubo, gabadhaydana nin wanaagsan oo xushmad badan oo diinta ku fiican ayaan Alla uga baryi, Gallad hadduu noqdana kaba sii fiican hadal dad iyo qabiil kuma jiro, raali ahaanshada Eeb ayaa wax kasta igala weyn iyo laba jacayl isku guursada kuna wada jooga”.
Xaaran ayaa soo dhex gashay oo tiri:
“Sidii heestu tiri jacaylkeenaa ka weyn ,waa run wax walba jacaylkaa ka weyn, jacayl la’aan waa nolol la’aan iga qora taas aniga, qofku jecel markaad haysato ayaad dareentaa inaad nooshahay, aaaaaah ilaahow Jannada kaa waaraabi, iftiin ayuu ii ahaa, hamigaygii noloshuu ahaa, indhahaan wax ku arkayuu ahaa, maalintuu dhintay ayaan mugdi galay, Eebbihii abuuraase oofsaday, alxamdullillaahi.”
“Bes dheh dee calooshaad na hurisee, jaamc waa naga wada tagee Weynuhu ha u naxariiste”. Ayaa mayran tiri.
Xaaran waxay ahayd xaaskii Jaamac, ayaduse waxay leedahay weli xaaskiisii ayaan ahay in kastoo uu dhintay, nin kalena gadaashii waa diiday, saddexda caruura oo Eebbe kala siiyay ayay korsataa oo hadda weynaaday, qalbigeeda maalin kama uusan maran, waxayna ku nooshahay xusuustiisa, waxayna laabta gashatay in jacaylkii jaamac oo kale aysan arkayn, xushmadii iyo farxadii ku xayndaabnayd noloshooda oo kale in aysan helayn, in kasta oo wax badan guurso la yiri haddana

waa ka dhaaratay, markay kaligeed tahay oo ay soo gocato wanaagii Jaamac ilmadu waa soo dhaftaa, ma jirto salaad ay tukato oo aysan ku ducaysan Ilaahoow ooridiisii jannada iga yeel. Wax yar hadii la amusnaa ayaa Ugub tiri:

“Waa sax hadalkaas, wax walba jacaylkaa ka weyn ee Eebbe khayr ha kala siiyo labadii is calfata, danbi Soomaali maara uma hayo, Ilaahay ayagana wanaaga ha tusiyo oo coloolahooda isku fiyoobaysiiyo, dhaqankaan xunna naga ayaabi’iyo”.

Sidii ay is ogaayeen ayay hal mar wada yiraahdeen.

“aamiin”

**DHIBBANAHA DHEX JOOGA**

## CUTUBKA SEDDEX IYO TOBNAAD

## KADIYE

Markii dumarka xaafadu haasaawaha ku haysteen kabiska guriga, Warfaa waxuu u sii socday dukaanka Kadiye oo kiisa u dhow, salaanta markay is weydaarsadeen oo uu fariistay ayuu yiri:

"See tahay? Dhuuxeey iyo caruurtiina ka waran?".

"Aad ayaa loo nabad qaayaa ee adigu bal waran Ugub iyo caruurtii see yihiin?".

Alle mahadii wax dhiba majiraan ayuu ugu war celiyay, halkaas ayaana sheekadii ka bilaabatay, waayo waayo iyo beri samaadkii dib ugu laabteen,

markii cabaar la sheekaystay ayaa Warfaa weydiiyay

"Wiilkii agoonkaa ahaa dugsigii ma u heshay?".

"Maalin dhaweyd ayaan waxaan tagnay dugsi lagu xaroodo oo Islaami ah oo caruurta agoontaa la geeyo, wadaadkii maamulka hayay waxa uu noo sheegay inaysan wiilka wax kaalmo ah u hayn iyo waxbarasho, markaan weydinnay see ayay ku dhacday ,meeshaan waxaa nala ku yiri agoonta tabaalaysan ayaa lagu daryeelaye, is qorniinkiina waa socdaa Ayaan maqalnaye, shiikhii waxuu nagu yiri waa run meesha agoonta taakullayn tooda ayay u furan tahay, deeq Eebbe dad walaalaheena nooga soo qaaday ayay ku dhisan tahay, balse buuqii ayaa batay iyo is qabqabsigii iyo is eedayntii, marka waxaan door bidnay in beel ahaan aan u shaqayno oo madarasad walba ninka maamulka ka hayaa beeshiisa aqbalo, marka wax idin ka halaabi mayaan ee qoloda aad tihiin madarasadooda taga inshaa Allaahu waa idiin hagaagi wiilkuna waa helayaa wax barasho iyo hoy, waxaan ku

iri shiikhoow ninkaan beshiisu meel lahayn ka waran, xagee la gayn agoontiisa,, Ilaahay subxaanahu watacaalaa waxba kama daahsoona faraj asagaa u furi bi'idni llaahi kariim, laakiin habkaan ku dhaqanno waa habkaas, imaatinkiinana shukaran jassaa kumu llaahu khayran, waana naga dhaqaaqay annaga oo bartii taagan.
Warfaa ayaa yiri markaas.
"Ha hodmin Kadiye dalkaan ninba maqaayad ayaa u furan, sidii uu rabo ayuuna u maamusha, waxa maanta laguu diiday magaceena ayaa lagu soo qaaday cid ay wax ka siiyaana maleh xataa tolkood, wax yar oo ay carabta tusaan, tolkana isaga aamusiyaan weeye waxay sameeyaan, dhowr dugsi iyo dhowr arday ah bes, oo beel ahaan lagu qaybsado, mid maanta wax u soo dagayaan oo baabuur cad ku socda ayaad arkaysaa, bila gudohood ayuu dhaqaalahaas fataha badan ku helay, ma circa ayaa lacagtu uga soo dagatay, waa maya, marka ayaga iyo Ilaahood".
"Waaban iska dhaafay".
Warfaa ayaa bilaaayay in uu ka hadlo arrinti uu u yimid oo yiri:
"War ma ka haysaa in Gallad iyo Sagal ay nuxnux hoose wadaan ayaantaan".
"Waan maqlay arrintaas walise mase weydiin, inaan weydiiyase waan ku tala jiray, waxaan kaloo maqlay inayba gurigaaga isku shukaansadaan".
"Gurigu waa gurigisii oo kama baxo waana ogtahay Gallad in uu wiilkayga oo kale yahay, shukaansise ma aqaan, habeen dhaweyd ayaan mid falani war igu tuurtay, warkii haddaan u sii dhabba galay oo caruurtii weydiiyay waxaan ogaaday inayba tashi guur ku jiraanba, waxayna igu yidhaahdeen waan soo soconay si labadeena nala kugu sheego".
"Kow" Kadiye yiri asagoo yaaban
"Khayr ayay noqon ayaan iri, waxaan aad ula dhacay dhiiranaantooda iyo siday runta iigu sheegeen".
Kadiyaa markaa yiri:
"Yaab" oo inta kursigii dib isugu jaleecshay yiri:
"Maxaad ku talisay marka".
Warfaa ayaa inta si fiican u neefsaday yiri:

“Gallad nin ka fiican oo gabadhayda aan siin lahaa ma jiro”. Kadiye ayaa hadal damcay, waxaase ka booayay Warfaa oo yiri:
“Waxaad ku fakarayso waan garan karaa, waxaas wax kama jiraan, gabadha anaa dhalay oo waa gabadhaydii oo xilkeeda iyo xarragadeedaba anaa leh, Galladna adaa ii dhalay oo waa wiilkaygii oo kale guurintiisa iyo hagaajintiisa wax ayaan ku Leeyahay, waxa kaliya ee aan kuugu imid waxay tahay caruurtaas is jecel ee hiyi kacday in aynaan niyada ka jabin, waxaan qabaa wax kasta waxaa nooga horeeya farxadooda”.
“Anaaba kadis igu heshay Warfaayoow wanaagna waan kaa filaa markasta,” oo inta kursigii uu ku santeecsanaa horay uga soo durkay yiri:
“Warfaa niman saxiibo mudo badan ahaa ayaa nahay oo walaala ah oo meel ku soo wada koray, runta markaan u hadalo nin fiican inaad tahay waan ogahay, caad igama saarna cadayn tii u danayaysay inaad wanaagsan tahay arrintan ayaa markhaati u ah, hase yeeshee waxaan ku diidayaa waa dadka aan ku dhex nool nahay, waa taqaan siday yihiin, diin xumidooda waad taqaan, dhaqan xumidooda waa taqaan......” Warfaa ayaa ka dhex galay oo yiri:
“Intaas aad sheegaysid waan la socdaa hase ahaatee dhaqan xun waa laga gudbaa, wixii Alle necebyahayna waa laga tagaa, maanta haddii tusaale wanaagsan oo la raaco aynaan dadka u noqon, goormaa laga baxayaa dhaqankaan qurunkaa oo dadkii kala dilay?”.
“Taas waan la socdaa oo wax kasta biloow ayay leeyihiin, ee waxaa ka baqayo ma aadan garan Warfaa, kuwaan is guursanaya maahan ee waa kuwa ay dhali doonaan wareerka ku imaan doona, nolol sideeya ayay ku noolaan doonaan, hadday dalkaan ku dhashaan oo ku koraan, waad garan kartaa ayaan u malayn ee dal gaalo miyaan gaynaynaa ha ku koraane, Soomali haddaan nahay gaalada ayaa na cadaalad dhaanta oo nolol qofka u ogol, waana wax laga xumaado anaga oo diin tii u wanaagsanayd haysana in gaal naga cadaalad fiicnaado, wax badan ayaan ciil soo arkay amaba soo aragnay bahdeena oo dhami iyo Soomaali badan oo nala mid ah, hadana dalkaan waa dalkaygii aniga iyo kuwaan dhalay iyo kuway sii dhalaan in

aan meel kale ku noolaano ma rabo, kanaan ku dhalanay kuna dhiman doonaa, wax iga barakiciyana ma rabo, dhib inta nala ku hayo hadda ayaa nagu filan ka badanna ma rabo" warkii ayuu sii watay kadiye asaga o oleh "Warfaa waxyaabaha dhacay qaarkood maskaxda qof fiyoow waa diidi inay rumaysato".

Kadiye wuxuu uga sheekeeyay Warfaa dhacdooyin hore oo ay ka mid tahay, nin shiikh ah oo kitaab u meerin jiray dad masaajid isugu imaan jiray, maalin ayaa markii uu dhameeyay kitaabka sharraxaadiisii iyo salaadii isku soo beegmeen, imaamkiina waa uu maqnaa, nin ayaa yiri shiikh salaada naga bixi, raggii meesha joogay ayaa intii badnayd diiday oo tiri, nin aan nasab ahayn salaad nagama bixinayo oo imaam noo noqon maayo, diintuna nasab dhiman inuu imaam noqdo ma ogola. Shiikhii ayaa ku yiri:

"Diintu sow taan anigu idin barayo maahan, ma anaa warkaas iyo wax la mid ah iga maqasheen, waa maxay diintaan kale oo sidaas qabtaa oo aad idinku haysataan oo aanan anigu aqoon, waxba diinta ha masabidanina waan isnaqaanaaye Soomaali ayaan ogolayn dhaha, oo dhaqan xumo iyo aqoondaraad ku diideene diinta yaan loo gafin, Eebihii nawada aayuuray waxaas iyo wax la mid ah kama suuroobaan iyo inuu dadkiisaa kala faquuqo ,ee yaan la masabidan oo Alle u towbad keena."

In kasta oo dadka qaar u riyaaqeen hadalkii shiikha qaarna ay is moodsiinayeen oo dad aan maqalba warka shiikha iska dhigayeen, haddana muran dheer ka dib waxaa laysku raacay inuusan noqon Karin imaam oo dhaqanku ogolayn.

Waxa uu uga sheekeeyey ninkii naagta guursaday markii dambana ayada oo uur leh xoog looga watay, marmarsiiyana laga dhiganayay, markii hore waa isla baxsadeen oo meelay isla aadeen waa la waayay, cid isku dartayna ma lahayn, masaafaduna waaba xaaraan, kay dhashay iyo kan ay caloosha ku sidana waa wacallo oo diin kuma dhalan sidaa darteed mar asagoo la baxsaday marna uu nassab dhimman yahay gabadhu kuma xirna, wiilkii ay u dhashayna bartii ayaa looga tagay, ayada oo barooranaysana ayaa xoog lagu waday, wiilkii yaraa oo ka daba oynayana xoog ayaa looga reebay, ninkii qabay sidii loo garaacayay mayd ahaan ayaa looga tagay, ilmihii ay caloosha ku sidayna laga soo riday markay carradoodii

tageen, dadka qaar waxay leeyihiin dhex intii la sii waday ayaa caloosha laga garaacay oo ayada oo dhiig baxaysa oo isku dhiman rabta ayaa isbitaalkii la gaarsiiyay.

Waxuu u sheegay tii asaga ku dhacday oo uu yiri:

“Anoo yar oo dugsi quraan dhigta, waad aragtay reer miyiga meel ayaa dugsi laga oodaa, reeraha aaggaas dagan ayaa caruurta wada geysta oo mar mar laga yaabo in ilmuhu laba saac u socdaan dugsiga ama ka badan, maalin ayaa nala yiri cid meel kore dagan ayaa Alla bari qabta marka ardada oo dhan xagaas ayaa loo wadayaa si ay quraanka u subciyaan oo cidda loogu duceeyo”

“Casir liiqii ayaan dhammaanteen wada baxnay macallinkiina na hor qaaday, maqrib ku dhawaad ayaan tagnay gurigii, markii la tukaday ka dib waxaa la bilaaayay subicii, kuray yar ayaan ahaa laakiin quraanka aad u yaqaan, qayb libaax ayaan ka qaatay, markii subicii la dhameyey oo cunnadii oo saxamo waaweyn ku jirta la keeni rabo, ayaa afar afar isugu leexda la yiri, affar aan anigu ku jiro ayaa isku bayrtay, gaajada i haysay cunada carafteeda ayaa i qaaday oo maa la keeno ayaan is lahaa, markaan arkay suxuunta hilbaha ah ee la soo wado waan farxay, saan uumati ma cunin tan iyo saakaye, intaan cunadii naloo soo dhigin ayaa nin ii yimid oo igu yiri kaalay adeer adiga saxan kaagu waa gaare oo gacanta i qabtay korna ii kiciyay, anoo hadlin ayaan warkiisii yeelay oo istaagay, waayo waxaan maqli jiray ajiyi gabooyo kama naxdo umana naxariisato, saas ayaa baqdin ii gashay oo aan warkii ninka war uga soo celin waayay, markaan sii istagayo ayaa wiil aan saaxiib ahayn oo aan isku loox ahayn yiri, adeer daa annaguu nala cunayaaye, aamus waryaa ayuu yiri waana i waday meel gees ah oo dadka ka go’an ayuu i fariisiyay kaligay, saaxiibkay murankii markuu badiyay iyo maxaa Kadiye noola cuni wayay ayaa macalinkii dugsiga noo dhigayay wuxuu ku yiri dadka nassabka ah lama cunaan dadka gunta ah ee nassab dhimmanta ah ee waxba ma ogide aamus cunnadaada cun”

“Waxaan maqli jiray oo aan la yaabi jiray balse aan isoo marin ayaan habeenkaas arkay, farxada iyo qosolka la i tusi jiray inay been ahayd ayaan arkay, nalama sinnid

in la i yiri ayaan arkay, doofaarka najaasada ah si aan loola dhaqmin ayaa layla dhaqmay, macallinka quraanka ayaa iigu darna, dugsi danbe in aanan aadin ayaan go'aansaday oo gurigeena aanan dhaafin"

"waxaana ku shallaayay maxaad galabta u soo raacday, haddii ay kaa soo tagi lahaayeen haddaa gurigii ayaad joogi lahayd, waxna waad cuni lahayd dhibkaanna kuma soo gaareen iyo caydaan, waxaan is iri bax intaan cunnada la ii keenin oo gurigiinii aad, hadana waan baqay meeshu waa meel bahal daban, saxan yar ayaa xoogaa cunna ah laygu keenay oo hortayda naagi dhigtay oo markay gadoon damacday aragtay inaan ooynayo markaasay igu tiri:

"waxba ha ooyin hooyo, iska samir Ilaah waa ujeedaa wax walba anigu qof dumaraan ahay wax yalahaas wax kama aqaano, dumarna warkooda cidi ma dhagaysato, balse waxa lagu kacayo inaysan fiicnayn waan u jeedaa ee rag iska dhig caloosha adkayso, tan iyo saaka afkaadaad qabtaaye cun waxaani maalin uun waa dhamaane" igana tagtay"

"Markii hore cun isma lahayn ee hadalkii naagta iyo anoo tan iyo saaka qadsanaa darteed ayaan iska cunay cuntadii, si ay u dhadhamaysay cunadu ma aqoon, waayo waxaa is dhex galay ilmadii iga socotay iyo cunnadii, wixiiba dhanaan ayay isla noqdeen, markii aan dhargay ayaan dhinac isku dhigay bartii aan ku cunay aniga oo ka baqsan haddii meesha dadku seexanayo aan tago in hadana layga cayrsho oo meel gaara la ii bixiyo, dug ayaan iri meeshaydii, islaantii ayaa ii timid oo tiri kakac meesha oo inta i waday geed duggaal leh i ag seexisay marana i huwisay, macallinkii galabta isoo waday qof aan la socon oo uusan aqoon ayaaban u noqday, oo marna inta ii yimid war see wax kuu yihiin ima oran, dadka kalena warkoodaba daa, daalkii badnaa iyo ciilkii hurdaan la dhacay, miyir waxaa iigu danayaysay inta aanan seexan anoo laabta iska leh, *Ilaahay muxuu dadkaan kaliya u abuuri wayay oo haddaan la sinayn idinka iskaga kiin dhaafi waayay, shinbirka galayrka ayaan jeclaa waxaana is iri haddii ilaahay galayr kuu uumi lahaa dhibkaan kuma jirteen manta, xor meeshuu rabo aada, waxuu rabo sameeya ayaad ahaan lahayd, dadkaan oo dhanna waad ka sarayn lahayd, lagumana ciileen''*

hadalkiina sii watay Kadie oo yiri:
“Waxaas iyo wax ka daran ayaa nala ku hayay, haadana nala ku hayaa, marka ma waxaad Warfaa rabtaa caruur cadaabtaas la mariyo oo reer abtigood dayra ka ah in aan keenidooda sabab u noqonno Alla ka sokoow, oo noloshooda ciil iyo caro ku dhamaystaan , waxaan ka cararayo ma garatay, hadda anaga dhexdeena dadkaan iska dhalno awalba dhibka waa nalu ku hayay, balse reer abtiga ha ku caayaan oo ha ku fogeeyaan oo ha iska kaa dhowraan waa dhib, saddex magac Eebaan kuugu dhaartee waan ogahay inaan wiilkaygu Sagal oo kale heleynin, mid ay isku cidyihiin iyo mid kaleba, adi iyo Ugubna dad lala
xidido kuwa ugu fiican inaad tihiin waan ogahay ee ilmahas dhalan doona illinta ka daadan doonta ayaa i hortaagan”.
Warfaa ayaa aamus yar ka dib yiri:
“Kadiye aduun waa isbadalay in kastoo dad uusan wada fiicnayn, haddana wax badan ayaa is badalay, waa la ilbaxay sidii hore waa la dhaamaa, diintii waa la bartay .......”
Kadiye ayaa ka dhex galay oo yiri:
“Culumadaan kuwii hore wax ma doorshaan, kuwii horaaba ila roonaa oo warkoodu bannaanka yaalay, diinta labartay oo aad sheegayso sow tan dadka lagu bireeyo maaha, sow tan Soomaali oo wada muslin ah lagu yiri intiinna badan gaalaa tihiin maaha, wadaaddada inta badan sow maahan kuwa na leh xaaraan ayaa dadku kuwada dhasheen, maantana qof walba gaal ku sheegaya, hadalkii ayaan kaa dhex galee warka ii wad, waxaan ka xanaaqay diinta sida loogu tuntaye”.
Warfaa ayaa yara qoslay oo yiri:
“Waan aqaan markii dhinaca diinta laga hadlo in dhiigu ku karo, hase yeshee dhibku dhinac walba waa naga saameeyey ee Allaha na dhowro” hadalkiisii horena meeshiisii ka sii watay” Waan garan karaa waxaad ka hadlaysid anigaba illaa aan nin weyn ka noqday oo shaqo bilaaayay oo la ii baahday horteed si kale ayaa la ii arki jiray, waana ciddiina aan la soo koray waxa la ii riixayay oo barbar ka xaraan ayaan ayaga u ahaa, wax badan ayaase is badalay, waan kugu raacsanahay dibad

diidnimadaada oo aniguba ma jecli caruurtaydana lama jecli, wixii xun oo dhib wada fool ka fool ayaa loo abaaraa oo layska celiyaa, waana taan rabo inaan adiga iyo anigu dagaalkeed biloowno, horseedna u noqono dad badan oo wanaagsan, kuwa badan oo xunna ay tusaale u noqoto, aniga iyo adigana xil weyn ayaa naga saran sidaan dadkaan u toosin lahayn, dhaqankaan xun sidii looga gudbi lahaa, anigu Warfaa ahaan Alle ka fogaansho ma rabo iyo danbi, wiilkaas gabadhaas wax aan ugu diido uma jeedo, arrin aan ugu diido oo aan jirinna abuuri mayo hadda, saa maba jirtee, laabtana waan gashtay inaan labadaas la isku guurino, saan u jeclahay war kama haysid iyo saan dadkaas curdunka ah farxadooda u rabo ee isma kay hortaagteen, qorshahaygana haraati kuma dhufateen, waxaanse kuu sheegayaa Gallad waa nin weyn aniga iyo adigu isku mid ayaan u nahay, qof wax jecelna indho iyo dhago kale maleh qofkuu calmaday maahine, waan isku guurin buuqa haddaad badisana walaaltinimaddeenii ayaad illoowday, oo haddaan labadaba dhoofsho oo dibadda u diro ka waran?".

"Maya maya, ilmahaygu dhib ay dalkooda uga qaxaan alle ima tuso, naxdin waxaa iigu filan ilmaha Soomaaliyeed ee rafaadku ku haysto qurbaha, gabdhaheenna gaal iyo muslin meel kasta lagu xoogayo iyo wiilasha la adoonsanayo, dalka siday ugu soo noqdaaana ay ku adkaatay, kuwii dalkooda ka didiyay allaha cadaabee".

"Marka la'aantaa ayaan tashan una talin carruurta, Galladna caruur maahan waa nin weyn, in kasta oo aan hubo inuusan kugu caasinayn, taasna talada ku darso saaxiiboow".

"War bal cawdu billayso sheydaankaan dusha kaaga soo dagay waa maxay sidaan u joognay, waanaageena iyo walaaltinimadeena ifka waxaan siisanayo oo ku badalanayo maleh, adna waa sidoo kale waan ogahay ee taas ha igu handadin," oo kaftan ahaan uyiri "xoogna haddaan is galno waad ogtahay inaan laba laba raga u garaaci jiraye, arrintuse halkaa naga gaari mayso, Eebana nagama gaarsiiyee, imaqal".

"Waan ku maqlayaa, ogoowna waagaad laba labada u dili jirtay raga lama joogo, da' ayaa kaa daba timid".

“Anigu waan isku diiday kuma oran igamana maqal ee ha i masabidan, waxaa ku tusinayay dhibka dhici kara, Warfaa ooddin ayaa igu taagan aan is iloowsiiyo, adiga saaxiibkeeya maahane aan cidkale kala sheekaysan, taas oo kale ayaan u diidanahay carruurteena iyo kuway dhalaan, intaas maahine wax kale ma jiraan, si sharaf iyo wanaag ku jiro ayaad gabadha noo siisay, si ka sii wanaag iyo sharaf badan ayaan kaaga guddoonnay ee gaajaa i haysee soo bax wax soo cunee oo qadada ku dul Sheekaysane, mise Ugub ayaad ka baqi adiga oo dharagsan haddaad guriga tagto?”.
“Waagii aan yar yarayn ayaan ninkii dariskeena ahaa ee guriga naga danbeeya daganaa hadal ku iri, markaas ayuu igu yiri war af xumidaa, waxaan ku iri sow Kadiye saaxiibkiis ma ahi, inta i fiirshay ayuu igu yiri laba cunug oo cirka laga soo tuuray ayaa tihiin, igana tagay, marka af xumida waan kugu aqaan ana waad i bartaye ku gula yaabi mahayo, lixdan ayaan ku dhawahay markaas ayaad i leedahay waad baqaysaa, ma baqayee waa xushmad, adiguba kaliga intaad baxdo maqaayad wax kama cunteen waan ogahay, anigaad igu daba ganban, Warfaa ayaa qado isoo siiyay oo aan ka diidi waayay inaad tiraahdid ayaad rabtaa, Eebana aan u mahad naqno laba oori oo rag oo dhan uusan haysan ayuu nasiiyeey, na mari anigaba gaajo waa igau dhagan tahaye”.
“Mahad allaa iska leh, rag waxaan ku dhaafnay oo kaga hormarnay waa labadaas dumar ah waan ogahay, ayagana allaha dhowro abaalkood ma gudi karnee.”
In kasta oo reerka uu ka dhashay Kadiye ay dhaqaale lahaayeen oo xilligaas dadka ladan lagu tirinayay, hadana Kadiye waa dareensanaa in si loo guul guulo oo loo dheereeyo, balse aan si bareer ah war aan cidi u oran karin ama u cayn Karin, waana tan uu ku ogaaday hanti in ay ninkeeda gaashaan u noqon karto, oo kii garaad xun ay meel ka marin karto, kii kalena asagaaba alle toosiyay.
Kadiye aad ayuu uga xumaan jiray sida gaarka ah ee loo eego ama dhabarkiisa looga hadlo, gaar ahaan markuu gabdhaha la soo haasaawo oo ayba gaartay in oday uu yiraahdo gabdhayada ii dhaaf maandhoow, shukaansi iyo waxaas ma gaarin gabadhayduye, balse Siman oo aad u jeclayd Kadiye ay ayadu soo doonatay, oo asagoo jidka maraya istaajisay, wada hadal xoogaaya ka dibna ay u sheegtay inay

maqashay waxa aabaheed ku yiri balse ay ayadu jeceshahay oo aysan cidna ka haybaysanayn, dulmiga aabaheed wadana aysan raali ka noqonayn diyaarna u tahay inay isla baxsadaan.
Kadiye wuxuu isku dayay in u sheego in uu asaguba in uusan cidna kaga haybaysanayn jacaylkiisa oo meeshii ay raabaan isla aadi karaan balse wuxuu tusiyay in uu dad ka tagayo oo cidiisa oo dhami qaxi Karin guurkiisa dartii, haddi ay joogaana dhib uu ku imaan karo, balse uu hubo in dhib weyn soo gaarayo oo dadka ay banaankaas kaga baxsan waayeen aysan qosol iyo dhoollo cadayn ka dhaxayn doonin, wuxuu tusiyay cabsida haysa inaysan ahayn mid asaga ah ee uu u baqayo reerkiisa in dhib soo gaaro, hadal dheer ka dib wuxuu ku yiri, bal waan ka soo fakari sidii aan wax u maarayn lahayn, ayaduna waayahay ayay tiri balse soo dhaqso.
Intii aysan kala tagin ayaa waxaa ku soo baxay aabaheed oo jidka marayay, asaga oo aan eray u furin ayuu dharbaaxyo darandooriya gabadhiisii ku bilaaayay, oo inta tintii jiiday u sii hantaataqiyay dhincii guriga ayada oo oynaysa asna uu leeyahay intaad caruur nassab dhiman ah ii keeni lahayd adoo sharmuuto noqota oo wacallo ii keenta Ayaa ka qurxoonaan lahayd oo aan ka jeclaan lahaa. Kadiyana bartii asaga oo taagan ayuu maqlayay baroorta ka dhacaysay gacalisadiisa, markii guriga la geeyay oo ciddii oo dhan ay ku goobatay Siman, waxaa dhagahiisa soo gaarayay qaylada hooyadeed oo leh
“War garaacistu waa naxariise middida qaado oo gowrac, alla gablamay tani iga dhimatay, dad sinji xun intay raadsanayso ayada oo gaalada talyaanigu fuulaan ayaa ii dhaanta, gablamay, alle ba’aye kulanoow gowrac”
codka oday kulan se mar mar ayuu soo gaarayay asagoo leh.
“Hadday ii noolaato xalaal layguma dhalin”
Kadiye horayna waa u socon waayay gadaalna waa u noqon waayay, dhulkii ayaa qabsaday, ciil iyo caro dartood indhihiisa illin ayaa ku soo istaagay, *ma u tagtaa oo maka celisaa* wuu is yiri haddana marmarsiyihii ay ku dili lahaayeen ayay helayaan haduu illinkooda tago, waa ogyahay nolol inuusan kaga soo baxayn gurigooda, waa

uu hubaa, asagoo caga jiidaya oohintii Simanna ay dhagahiisa iyo maskaxdiisa ka dhawaaqaso ayuu tagay.

Maalintaas ayaana ugu war danayaysay Kadiye arag uu arko Siman, maalin labaadiina waxaaba loo ka xeeyey baadiye halkaas oo ay ku dhimatay sannad iyo bar ka dib, waxaana waa danbe loo sheegay in murug iyo uur xumo darted ay u dhimatay, oo markii miyi la geeyay la takooray, gabar miyiga ka timid waxay sheegatay in Siman sidii doofaarka lays kaga dhowri jiray, si kastaba markii ay dhimatay Siman hooyadeed baroorteeda waa la aamusin waayay, oday kulan aamuskii uu galay waa uu ku dhintay asaga oo ugu danbayntii garwaaqsaday in uu gabadhiisii asagu wadka u waday alle ka sokoow, maalintii uu dhimanayay oo sakaraadku saarnaa ayuu dalabaday in Kadiye loogu yeero, inkasta oo Kadiye markii hore uu diiday gadaal danbase waa yeelay markii aabihii si fiican ula hadlay, markii uu u tagay Kulan oo sakaraadkii saran yahay oo hiraagaya, Kadiye waa uu illooayay dhibkii uu u gaystay ninkaan aakhiro u sii socda, wuxuuna bilaaayay in uu yaasiinka ku akhriyo, waana uu eegi waayay indhaha Kulan ee kor u soo eegaya ilamaduna ka da'ayso, inta yaasiinkii oo dhex u maraya joojiyay ayuu yiri, waan ku cafiyay adeer, Kulan oo nafis yar inuu helay oo culays ka gaday ladareemi karo, balse ay ka muuqato in uu weli qoomamo ka qabo in Simantii cafin lahayd ay aakhiro kaga hormartay, ayaa mar qura hinqaday, Allihii abuurayna oofsaday, oo naftii ka baxday.

Intii maydka laysku duwayay ayuu soo baxay Kadiye, banaanka markuu soo istaagay ayuu isha ku dhuftay gambar banaanka yaal oo Siman hooyadeed ay ku fariisan jirtay, oo ayadu qaracankii dhimashada gabadheeda aan cudur ka bixin ilaa ay ka dhimatay, inta in doora
eegay ganbarkii ayuu yiri
"Adna waan ku cafiyay, Quman".

**DHIBBANAHA DHEX JOOGA**

**CUTUBKA AFFAR IYO TOBNAAD**

**BAXSASHADII WARFAA-2**

Markii iftiin yar uu bilowday ayuu si aayar ah u dhaqaaqay Warfaa oo aqalkii uga baxay, in doora markuu socdayna orod ayuu bilaaayay si hadii la soo raadiyo aan loo soo gaarin, markii uu ku daalay orodkii ayuu geed hoos fariistay oo buraashaddii biyo ka cabay, saaka biyo kuma soo shuban oo in lagu kaco ayuu ka baqayay, kuwii shalay ayaa wax uga hareen aan badnayn, in doora markuu fadhiyay geedka harkiisa ayuu gadaashiisha jalleecay wuxuuna arkay raad laba libaax oo ka kacay geedka uu fadhiyo una dhaqaaqay dhinaca uu ka yimid, qarracan ayuu la suuxi gaaray, *ilaahay kuwaas ima tusin dhib kalena alaha iga hayo* ayuu uurka iska yiri oo orodkii bilaaayay asagoo hadba gadaal soo jalleecaya oo eegaya bal in labadii liayaax soo muuqdaan oo soo daba galeen, mar uu isleeyahay ciddii ku soo dabagasha iyo libaaxba fudayd kuugu imaan mayaan ayuu socod bilaaayay marna rucleys, gabal dhicii mar ku dhow ayuu tuula yar tagay meelna iska fariistay, asaga oo sheeda ka ilaalsanaya baaayuur ari sida, in kasta oo uusan ogeyn baabuurku meel uu u socdo hadana waa ka go’nayd in uu raaco si kastaba.

Maqrib maarkii la tukanayay oo dadkii salaada galeen ayuu inta hareeraha iska fiirshay iskana hubiyay in aan la arkayn gaariga qaybtiisii danbe si dhib leh ku tafay, arigiina dhex galay, sidii uu isku lahaa maa mar uun baabuurku socdo oo meesha laga tago ayaa cishe markii la tukaday oo la casheeyay baabuurkii dhaqaaqay, neef weyn ayaa ka soo fuqday ilmahii yaree baxsadka ah.

Saq dhexe ayaa baabuurkii joogsaday, waxa uu maqlay nin hadalkii oo ku leh mid kale ariga fiiri, ninkii la soo diray oo furka hore saarnaa ayaa
furkii gadaale soo fuulay oo ariga dhex qaaday, si uu u hubiyo in arigi bad qabo, Warfaa darbiga ayuu isku dhajiyay sagxaddana dhabacday go'iisii cadaana huwaday, in yar ka dib ninkii waa dagay oo qaybta hore ku laabtay asaga oo kor u leh ariga wax kama halaysna, baabuurkiina waa dhaqaaqay.
Salaaddii subax markii loo istaagay ayaa daba ka fuulkii furka danbe soo fuulay si uu u hubiyo in arigu nabad qabo, waxa uuna dhex qaaday arigii oo fiir fiiris ugu dhaqaaqay, markii u soo gaddoomi rabay ayuu isha ku dhuftay wax kuusan oo geeska xiga, wuxuuna is yiri ma neef baqtiyay, baa hadiise uu u soo dhawaaday waxuu arkay qof duuban inuu yahay, waa u dhawaaday oo cagta jug ku siiyay, Warfaa oo jugtii qoobabka ariga qabatimay tan iyo xalay waa uu diiri waayay jugtaan, daba ka-fuulkiina inta foorarsaday ayuu marada ka qaaday, Warfaa oo meel looga yimid aan aqoon ayaa booday oo fariistay.
"War maxaad ahayd" ayaa daba ka fuulkii yiri asaga oo yaaban kana naxsan arraga wiilka iyo waxa rafaad ka muuqda, hadal waa ka soo bixi waayay Warfa, indho baqdin badan ka muuqato ayuu kor ugu fiirshay, ninkii ayaa markaas yiri:
"War bal soo dag"
Warfaa inta hareeraha fiirshay arkayna in meel cidlaa la joogo oo aan magaalo la gaarin ayuu yiri:
"Adeeroow waan ku baryayaa ee cidladaan ha igu dajin" oo illin iyo oohin isku daray
"Adeer cidladaan kaaga tagi mayno ee soo dag, meel fiican ayaan ku fariisine, arigaan ka soo dhex bax".
"Alla adeeroow meel aan aado maaqaan haddaad iga tagtid, cidladaan bahalladaa igu cunaya".
Inta naxay ninkii arkayna baqdinta iyo dhibka wiilka haysta oo calooshu hurtay ayuu ku yiri:

"Adeer meel la is kaga tago lama joogo, kaana tagi mayno waa igu saddex magac Ilaahay ee soo dag oo dhaqdhaqo, meeshaan fadhino ayaad nala fariisane, qaybta hore ee baabuurka".

Waa uu istaagay si uu gaariga uga dago ayuu garan Waayay, ninkii ayaa kaalmeeyay si uu u dago, dhulka hadduu cagaha dhigayna wuxuu arkay dhawr nin oo meesha taagan iyo qaar weyseysanaya oo si yaab leh u eegaya, aroor ayay ahay waxaana soo carfayay cawska iyo geeda iyo ciidaba, wuxuu maqlayay ciga raha ka qaylinaya balli uu is yiri meesha kama foga, uurkuu ka ooyay, noloshaan macaan waxaa u qoonsatay eedo ku sheegtii uu ka soo cararay, hadday qof wanaagsan ahaan lahayd haddaa ayuu inta shah cabo iyo caano iyo waxii cuno la hayo cuno ayuu arigiisa raaci lahaa, xasuusta ariga ilma ayaa indhihiisa ku soo joogsatay, laba maalin ayuu ka maqnaa waana uu u xiisay, wahel kale ma uusan aqoon intuu noolaa oo aan arigiisa ka ahayn,

Wadihii gaariga ayaa meeshii uu ku weysaysanayay ka soo qayliyay oo yiri:

"War xagee nooga timid adigu, yaa gaariga ku soo saaray".

Nin ag joogay ayaa ku yiri:

"War ilmaha yarkaa dhaaf, asagaaba argagaxsane" oo inta u yimid yiri "adeer magacaa?".

"Warfaa ayaa lay dhahaa adeer".

"Gaariga xagee ka soo raacday?"

"Tuuladii aad shalay joogteen adeer, ma meeshaan cidlada ah ayaad iiga tagaysaan?".

"Maya adeer kaaga tagi mayno, ha baqin ee orod wajiga iska dhaq oo soo kaadi".

Markii uu soo dhaq dhaqday ayaa odaygii siiyay timir shirka uu ka soo bixiyay, markii uu dhamaystay ayaa wadihii gaarigu ku yiri daba ka fuulkii asaga oo sii socda, wiilkaan yar kor saara ma fuuli karaan u malaynayaaye kaligiis, haddana inta istaagay oo Warfaa fiirshay ku yiri:

"War see gaariga u soo fuushay xalay, yaa ku soo saaray?".

Nin kale oo dadka ka mid ahaa ayaa yiri

“War naf ayaa wadaye baabuurka na saara”

Rako yar oo dusha laga sameeyay ayaa dhowr qof saarnaayeen, dadkaas ayuu dhex galay oo garka iyo jilbahana isla galay asaga oo fadhiya, go’iisana isku duuayay. Markii la warsanayay wuxuu u sheegay ninkii odaga ahaa iyo intii kaleba in uu agoon iyo rajay labadaba yahay oo cid ifka u joogta aysan jirin. Adeerkii uu la joogay iyo wiil hooyadii dhashay oo uu maqlay in uu jiro balse uusan waligii arkin mooyee, in uusan cid kale lahayn, adeerkiisna inta badan geela la jiro oo uusan guriga joogin, eedada adeer qabana ay silcisay, wuxuuna tusay ulaha dhabarkiisa ku yaal oo ay ka naxeen dhamaan intii argtay, odaygii ayaa yiri bes adeer xiro funaanadaada timirtaadana dhamayso, hadalkiina intaas ayuu ku xirmay dadka qaar eedada habaarayay maahine. Barqo dheer ayaa baabuurki meel tuula ah tagay oo laga quraacday, ka dibna socdaalkii ayaa horey loo sii watay, lamana joojin gaariga in cunno loo istaago iyo salad maahine, waayo xilli qaboow ah ayay ahayd.

Maalin saddexaaddii galabteedii ayaa waxaa soo muuqtay xamar, guryo cad cad iyo biyo badan oo ka danbeeya oo Warfaa is yiri waa balli weyn,

“*meeshu barwaaqo badanaa waxaan oo biya ah oo dhulka jiifa, Xamar jiilaal lagama yaqaan, balligaan waligii guri mayo?,* ayuu laabta iska yiri, rayn rayntii magaalada uu yimid iyo miyigii uu ka soo baxsaday waxaa ka jiiray murug ah xagee aadi marka xamar timide,

“*cid kama taqaanid, qof waliba gurigiisa ayuu aadayaa adiga maahine, adigase maxaa kuu tala ah, haddana wuxuu isku dhiirri galiyay, dhiman maysid si uun baad yeeli, la joogii eedo iyo rafaadkii waa kuu dhaantaa, yaa reer hebel ah weydii dadka wax cidihiinaa weyn mayside, xamar dad uun baa jooga oo sheeda laga weheshanayo mooyee cidladii duurka wax ma dhaanto, waa magaalo aadan qof ka aqaoon, meelaad ka aaddana aadan garanayn”, ayuu* uurka iska yiri,

Yoobsan ayaa baabuurkii istaagay dadkiina waxay bilaabeen in ay dagaan ayaga oo nabadeey is leh, markii dhowr qof dagtay asna weli aan dagitaan ku jirin, meel uu tala ka qabtana la’yahay ayaa odagii hoos ka soo dhawaaqay:

“War aaway wiilkii yaraa?”.

“Waa ikan adeer” ayuu hoos u yiri asaga oo ka baqaya in la yiraahdo, war gaariga nooga soo dag maxaa ku saaray oo magaaladaada dhinac ka gal, wiilka tartiib u soo dajiya ayuu yiri ninkii wanaagsanaa, markii dhulka uu dagay ayaa odagii ku yiri: “Adeer anaa ku wadi oo meel ku gayn inta dad ciddiina ah lagaaga helayo, wax dhibana arki maysid”.
“haye adeer” ayuu yiri asagoo laabta ka ducaynaya,
Hareerihiisa ayuu eegay dadku tira badanaa oo bulaan badanaa, baabuur yar yar oo dadku fatuurad ugu yeerayaan iyo kuwa ka sii yar yar oo saddex addin leh, tiirar dhaadheer oo madaxa ka iftiimaya, faynuusyo cayn kala ah oo guryaha ka shidan, wax uu arkay maahan, wax uu maqlayna maaha, wax uu maanka waligii galiyayna maahan, dhul sidaana ayaa jira waligii kuma riyoon, wax kaliya ee uu xamar ka aqoonsaday waa dadka, ayaguna ka qurxoon kuwii miyiga uu ku arki jiray.
Bulxan oo Warfaa la socdo markay gurigii gaareen ayaa waxaa ku soo kala orday affar ilma ah saddex gabdhood iyo wiil, ayagoo kor ugu dhawaaqayaa, aabe, aabe, aabaa yimid, lugahay iskaga duubeen iyo dhexda, markuu nabaadiyay ayay hal mar wada fiirsheen wiilka la socda, wiilkaan Warfaa ayaa la yiraahdaa, waana nala joogi doonaa, Warfaa waa caruurtaydii yar yarkaa, idinkaaba is baran doonee na mariya, hooyo see tahay ayuu yiri, waa fiican tahay ayay la soo wada boodeen, habeenkaas Warfaa si uu u seexday ma aqoon, asaga oo joodariga riix riixaya oo raaxadiisa la yaaban iyo aqalkaan dugaalka ah ayuu hurdo la dhacay, yaabse waxaa ku dilay suuliga, waa qol yar oo illinka aad soo xiranaysid oo aan cidna ku arkayn, xishoodba reer magaal ayaa loogu yimaadaa iyo aqal lagu dhex saxaroodo.
Bulxan waxa uu raadshay wax ku hayb ah wiilka, waxa uuna tagay Shiikh Birre oo ay daris ahaayeen wiilkana isku hayb ahaayeen, una sheegay wiilka xaalkiisa, markii shiikhu warsadayna waa uu gartay waana aqoonsaday, markiise shiikhu uu u tagay tolka intiisii kale ee magaalada joogay, war wanaagsan se kama uusan soo helin, nin walba marmarsiyo ayuu sheegtay uu wiilka hayntiisa ku diidayo, tolkii waxay ku yiraahdeen shiikh adigaa guri cidla ah jooga oo aan caruur kuu joogine ha kula joogo, annaguna waan kugu ogaanaynaaye, dani waxay noqotay in shiikh

Birre uu u sheego Bulxan in cidii ay ka war wareegayan haynta wiilka yar, balse asagu uu haynayo oo qolku ku wada filan yahay,
balse Bulxan waa ka diiday asaga oo la socda tabarta shiikha darted iyo wax la'aantiisa, waxa uuna ku yiri caruurtaan ayuu iska dhex galayaa waxba ka hallaabi mayaan ee culays ha isa saarin, shiikhuse waxuu u sheegay in ay wanaagsantahay in uu dagaan ahaan asaga la dago balse ka tirsanado reer Bulxan sidiisa kale, waayo dadka maanta wax u qaban waayay hadday maqlaan Bulxan ayaa wiilkii haya buuq ayay kugu furayaan, wiilkana waa wadanayaan waxna u qaban mayaan, sidaas ayaa lagu heshiiyay, odaygii wanaagsanaa iyo xaaskiisuna ku go'aansadeen in ay koriyaan wiilka, markii danbe oo Shiikh Birre tii Alle u timid Warfaana nin weyn noqday waxuu u soo wareegay guriga reer Bulxan, rag ciddiisa ah oo badan oo dhowr jeer u yimidna si ay u wadaan
waa uu ku gacan sayray.
Muddo markuu joogay oo asaga iyo Kadiye dhiganayeen dugsi quraan iyo mid laga barto af talyaaniga iyo casharro badan oo kale oo
wax barashadii ay dhaadhacday ayaa waxaa la geeyay dugsigii dhabta ahaa oo ay meel fiican ka bilaabeen, labadooduna waxay noqdeen laba aan la kala dhex marin oo aad isku jecel oo walaalo ah, waxaan aboowe ahayna gabdhuhu uguma yeeri jirin Warfaa, in kasta oo maalmihii uu cusbaa ay ka maadaysan jireen reer miyin nimadiisa, Kadiyase waa u sheegay markii horeba in wax badan lagu qosli doono, waayo asaga qudhiisa ayaa laga maadaysan jiray oo mar dhow miyi laga keenay halkaas oo uu ayeeyo la joogay, oo ay aabihiis ka codsatay inuusan ka wadin markii cida inteeda kale soo guureen, kuwa Xamar ku dhashay maahine iyo wiil ka weynaa oo dhintay,
Sidaas ayuu uga mid noqday reer Bulxan oo wax barashadiisi ku dhamaystay oo ku shaqo bilaaayay, markii danbana intaan odogu dhiman ayaa xoolo Diiriye magaalada keenay oo uu iibshay lacag fiican ka soo gashay, waxa uuna siiyay lacagta inteedii badnayd Warfaa oo uu ku yiri wax ku qabso, Bulxanna waxa uu u sheegay inuu wax ugu darayo, Markaan waa duqoobay oo da' ayaa i haysa oo waan

cuslaaday ayuu yiri Bulxan, Kadiye ganacsigiisa ayuu ku wareejin, Warfaana inta walaalkiis keenay ayuu wax ugu darayaa, sidaas in ay ku hawl galaan oo shaqada dowladda isaga tagaan ayuu u sheegay, waana ka yeeleen, dhimashadii odayga cidla weyn ayuu dareemay, aabihii labaad ayuu waayay, hooyadiisii labaadna way ka horeysay, dad waxaa u soo haray Diiriye oo asaga oo nin weyn ah sidii ilmo yar markasta ka war haya iyo reer bulxan, gaar ahaan Kadiye.

## DHIBBANAHA DHEX JOOGA

## CUTUBKA SHAN IYO TOBNAAD

## GOGOSHII TOLKA

Odayaashii, wax garadkii iyo culumadii beesha Warfaa iyo beesha Ugub waxay isugu yimaadeen guriga Af-dheere oo asagu gogosha dhigay, Warfaana waa la war galiyay in tolku fariisanayo loona baahan yahay in uu ka soo qayb galo, reer abtigii gabdhu dhinac ayay fariisteen, dhinaca kalena reer adeerkii ayaa fariistay,
Gurigu waa cusbaa oo maalmo ka hor ayaa la dhameeyay, welina rinjigii ayaa ka soo uraya, qolka fadhiga oo dhinaca soke soo xiga marka aqalka la galo ayaa waxaa ku goglanaa laba fadhi carbeed oo laba jaad kala ah, maadama ragu badnaayeen iyo qolka fadhiga oo weynaa ayaa sidaas loo yeelay, fadhi carbeedyadana mid waxaa laga keenay guriga Af-dheere midna cid dariska ah oo aqal kale oo uu leeyahay Af-dheere kiro ugu jirta ayaa laga soo qaaday, cabitaan qasacado iyo dhalooyin ku jira oo kala jaad ah oo bandan ,na waa la keenay oo shirka ka hor iyo ka dib haddi la cabo aan dhamaanayn, uunsi aad u caraf badan ayaa lagu shiday guriga oo walibana barafuun lagu sii buufshay si urka rinjiga aan loo dareemin.
Af-dheere waxaa ka go'nayd in magaciisa iyo marti soorkiisu ay is lahaadaan waa sida uu asagu isku sheegay, in tolka iyo qaraabadu aragto ayuu rabay in uusan wax reeban oo arrinta uu isugu yeeray ay dhab tahay, oo waxaan oo dhib ah iyo kharasha uu u huray sidii magaca beesha dhulka looga dhowri lahaa oo wasaq looga ilaalin lahaa, tan kale waxuu doonayay in ay ogaadaan in gacan adayga lagu sheego ay been tahay oo aan waxba ka jirin, taasna wuxuu u qorsheeyay in markii laga reebo buskudka iyo xalwada iyo cabitaanka galabta, haddii Warfaa daaqada lagala baxo

galabta uu dhammaan ku casuumo berri aqalka uu dagan yahay oo qado sharaf aan horey loo arag loona maqal u dhigo, in kasta oo uu hatida uu haaysto uusan u soo dhididin dhaxagna u soo jabin ee uu handadaad iyo dil iyo qori caaraddii ku helay, haddana qof walba waa ogaa qarsoodina ma ahay in Af-dheere uu aad u gacan adagyahay, golaha xanka markii la joogo Xaaran waxay ugu yeertaa iimaan yare iyo iimaan laawe, muslimo waa ka xag jirsantahay oo waxay tiraahdaa, gaalkii Rabbi iyo Rasuul ka furtay ayaa sidaas yiri ama sameeyay, Canbaro oo allaheed ka Allaana intay xabadka iskaga dhufato labada calaacalood oo wada socda ayay dhahdaa war wadaadka iska daaya.

Markii shahii iyo cabitaankii iyo mac macaansigii loo keenay oo qof walba hoostiisa dhigtay wuxuu nafac bidayay, ayay laba laba u sheekaysi galeen inta uu ka imaanayey Warfaa, in doora ka dib waxaa soo galay Warfaa uu ku yiri ragii meesha fadhiyay raalli ha layga ahaado waan idinku soo dahaan u malaynayaaye, waxaana u yeeray asaga iyo Diiriye oo la socday Proff Calasoow oo yiri halkan soo fariista, oo asagu markii horeba gees u maray ragga, nin beesha Warfaa ka mid ahaa ayaa

Yiri, maya halkan ha soo fariisteene...., Warfaa ayaa ka dhex galay oo yiri dhib maleh, meeshaan fariisanaba waa meesheedii kale waad salaamantihiin dhamaan, waana fariisteen, Af-dheere oo luguhu isku dhaafsanyihiin colooshuna in doora ay kasoo horayso barta uu suunka ka xiran yahay oo surweelkii awalba gaabnaa soo xaytay oo jilbaha agtoodana keenay ayaa hadalkii furay oo yiri:

“Bismillaahi Raxmaani Raxiim aniga oo ah af- dheere sida dadku ii yaqaan badankoodu waan idin salaamayaa, gogoshaan maantana anaa dhigay, aniga oo uga jeeda in aan maanta meshaan isku aragno arrin nagu soo korortayna ka wada hadalno, arrintaas oo ah in Warfaa uu gabadhiisa u guurin rabo ina Kadiye oo aad wada taqaanaan, warkana in la caddeeyo oo dhabta laga sheego ayaa fiican, waana waxaan manta halkan isugu nimmid, waana ku mahadsan tihiin imaatinkiina, in kasta oo uu imaatinkiinu xil idin saaran ahaa si sharafta tolka loo badayaadiyo, gabadha reer abtigeeda nagala soo qayb galayna waa mahadsan yihiin, sidoo kale

idinkana xil idin saaran ayuu ahaa imaatinkiinu oo sharaf dhac ayay idinkaba idin ku tahay waana idin saamayn haddaad reer abti tihiin arrintaan, marka waad la socotaan ayaan filayaa waxaan iskugu nimid, waligeed wax dhacay maahan, waxaan ab iyo isir aan u lenahay maahan, inaan cidaas aan kala guursano, waa dad Alle uumay oo anigu wax ka sheegimayo, caado la burshaa caro Alleey leedahay ayaa Soomaalidu horay u tiri, Soomaali been waa sheegtaa beense kuma maahmaahdo, ninkii Kadiye ahaa wiilkiisa ayuu raabaa in uu gabadha uu dhalay uu ku daro Warfaa, anigu maalin dhawayd anoo warka og ayaan arkay kala mase hadal, niman ragga hada ku jira ayaa weydiiyay asna wuxuu u sheegay inay taasi jirto, arrintaas ka hadalkeeduna meeshuu ku habboon yahay waa gogoshaan, warka yaanan ku dheeraane talo ayaa nala ka raabaa iyo sidii arintaan wax loga qaban lahaa, guurkaasna loo baajin lahaa, Warfaana gardaradiisa u qaadan lahaa tolkana ugu soo hoyan lahaa, hadalkiina waan ka baxay".

"Bismilaahi Raxmaani Raxiiim, wa ssalaatu wa slaamu calaa ashrafil mursaliin sayyidinaa Muxammadin wa calaa aalihi wa asaaxbihi ajmaciin, akhawaanii fi'ddin anoo afkiina ku hadlaya iyo kan tolka aad ayaan ugu mahd celinayaa garadkeenna Af-dheere oo gogoshaan tolka u fidiyay, jazaa kumullaahu khayr ayaan dhahaynaa" ayuu hadalkiisii ku bilaaayay shiikh Abtidoon asagoo hadalkii si watana yiri:

"Akhwaanii nasabnimadu waa wax diintu sheegayso, Allaah Subxaanahu Watacaalaa quraankiisa ku xusay in dadku kala darjo badanyhiin, siyabo bandanna u kala daraja badan yihiin, waan hubaal taas oo quraankay ku jirta, Ilaahay faraha ma simin, sidaas oo kale ayuu dadkiisana u simin, mid ayaa mid ka dheer, mid ayaa mid ka qurxoon, mid ayaa mid ka lacag badan, mid ayaa mid ka dabeecad fiican, mid ayaa reer banuu Haashim ah, mid ayaa qolo kale ah, Ilaahay qabaa'il iyo shucuub ayuu naga dhigay, quraankay ku jirta, haddaan tan maanta u soo dago Rasuulkuna "scw"waxuu yiri naagta afar sheey midkood u guursada, quruxdeeda, diinteeda, maalkeeda iyo nassabkeeda".

Shiikh Abtidoon madaxa ayaa loo ruxay ayada oon cidna aysan weydiin kala sareynta quraanku sheegay waa noocee, ma nassab dhiman iyo nassab fiicnibaa, ma

wax kalaa, sida muuqatayna ragga inta badan maba rabin in ay ogaadaan, asaguna faallo uma galin, waana uu arkay siduu hadalka u rabay in looqaatay, balse Fanax oo nin karmeed ahaa waagiisii hore madaxase laga galay oo hadda xoogaa roon sidii horena dhaama ayaa yiri:
“Sheikh naagtu hadaysan nasab ahayn oo qurxoon tahay ama lacag leedahay ama wadaad tahay sow lama guursan karo, Kadiye waa nin lacag lehe sow gabadhiisu guur ma gasho?”.
Nin Af-dheere ag fadhiyey ayaa yiri:
“War wax yahow waalan naga aamus, waxaad kala og tahay ma jiraane”.
Fanax inta indha kulul ku fiirshay ayuu asaga oo cod dheer ku hadlaya yiri:
“War afka maxaad ii qaban, Rusuulkaaba yiriye sow tan shiikhu sheegayo, waryaada anigu aqoon diin iyo mid aduun midna ma lihi, nin waallana waad igu sheegtaan, hase yeeshee waxaan ogahay Rasuulku waxuu yiri oo shiikhu noo sheegay inay run tahay, taasna maskaxdaydaan ka ogaaday, hadalkii Rasuulka ha la ii faafaahiyaan iriye ma wax kalaan sheegay iyo wax danbiya” oo inta istaagay cimaamadiisiina dhulka ka haabtay u raaciyay “dooffaaro laysku keenaad tihiin, waxaad rabtaan ayaad sheegtaan ana haddaan hadlo afkaa lay goosan, dadkii ilaahay wada abuuray ayaad kala saraysiinaysaan, duufaantii wax lagu halaagi jiray idin duubatay” oo illinka xagiisa u dhaqaaqay, markii uu irida marayo ayuu soo jeestay oo fiiriyay Afdheere iyo ninkii ag fadhiyay yirina: “Caloolaha buuran day, xaaraan ayaad ka dharagteen garaadna bartii ma lihidin, waxaan anigu gartay oo Rasuulku yiri ayaad garan weydeen” iridana ka baxay,
Afdheere ayaa markaas yiri:
“Allaha caafiyo rag waa uu ahaaye balaa martay” oo inta shiikhii ku jeestay yiri sheekh noo wad wacdigii”,
Markaas ayaa shiikhii hadalkii sii watay oo yiri:
“Waxba ha u arkina waalidiisa aakhira ayaa Ilaah wax fiican ugu badalaayaaye, marka akhwaani dhaqanna waan leenahay soo jireen ah oo tan iyo awoowayaashenii lagu soo dhaqmayay, waxba warka yaanan ku dheeraane Ilaahay

Subxaun Watacaalaa towfiiqda hana waafajiyo, aslaama caleeykum wa rax matullahi wabarakaatuhu".

Intaas ayuu shiikhii hadalkii kaga baxay asaga oo aan wax cusub soo kordhin, ragga qaarkiina waxay u arkayeen inuu Rabi iyo Rasuulba masabitay, oo arintii meesha ka socotay uu u ekeysiiyay mid sharciga Islaamku qabo, qaar kale oo ragga ka mid ahina madaxa u ruxayeen, marin habaabis kiisana waa u riyaaqeen.

Hadalkii waxa uu wareegay reer abtigii waxaana u hadlay Tuur oo hadalkiisii ku bilaaayay oo yiri:

"Bismillahi, sano lixdanaad ayaan ku jiraa, ebedkeey tan oo kale waan maqli jiray igumase imaan, musiibo iyo magac maalineey ku raacaan ayaa la yiri, beriga anagay na haysataa musiibadan, ee Eebbe hanaga badayaadsho" garkiisa guddudan inta cantoobiyay ayuu dadkii mesha fadhiyayana isha la raacay, markuu arkay in bilowgii hadalkiisa dadka qaar u khushuuceen, oo madaxyada hoos loo lalmiyay, lana ruxayo ayuu hadalkii sii waday oo yiri:

"gabartaan beriga halkaan laysugu yimid arrinteeda anagaa abtiyaal u ah, dhiiggeeda iyo dhaqashadeeda iyo sharafteeda intaba waxbaan ku lenahay, waana na saamaynaysaa, waxaan aan Eebbe raalli ka ahayn ee uu ninka aan xilka kala mudannahay ee Warfaa uu ku dhaqaaqi rabo annagu raali kama nihin, wuxuu wadana waa waxii caro Alle lagu mutaysan jiray, annagu warka aan ku leenahay Warfaa waa wax yar, idinka ayuu idin ka dhashay oo qabashadiisa leh, haddii uu waashaba waad ceshan lahaydeen, maantana wax waalan hal ma dhaamo, hadalka ku dheeraan maye, IIlaahay ceebteena ha asturo, dadka uu gabarta siinayana dhib waa heysta oo wax aysan ab iyo isir u lahayn ayuu lugaha u galiyay, baqashii socodka dameeraha diiday socodkii fardahana gaari weyday ayay noqdeen ee ayagana caqliga Allaha u soo celiyo oo tubtii wanaagsanaayd ee aan ebidkeen ku dhaqmaynay ha ku soo hanuuniyo, wax gaara oo anigu hadda aan cidaas ku cayrsanayo maleh, dhaqankaase sidaas ah, hadalkiina waa iga intaas".

Markii dhowr nin hadashay ayaa Af-dheere oo hadalka qaybinayay ku yiri Diiriye oo ay labadoodu xurguf xun ay ka dhaxayso, adna maxaad ka leedahay Diiriye arrintaan.
Habeenkii Diiriye warka ka maqlay Muslimo ka dibna uu wax ka weydiiyay Warfaa maalintii ka danayaysay oo Warfaa warka dhabtiisii ogaaday, ayaa waxaa soo maray ayaga oo meel fadhiya Kadiye oo shaqadii u socda, markay is nabdaysteen oo Kadiye ka tagay oo uu hadalkii shaydaanta xalay xasuusty ayuu yiri:
"Warfaa walaaloow xalay warkii si ayaan u garan waayaye gabadha iyo wiilka ma wax ayaa ka dhaxeeya".
"Aniga qudhaydu saaka ayaan wax kala ogaaday maahine xalay, waxba kuma dhaamin".
"Haye".
"Sida muuqata wiilka iyo gabadhu waa is raabaan, in muddo ahna waa wada socdeen, arrin guurna waa isla meel dhigeen".
"Kow?"
"Arrini hadda waa saase maxay kula tahay, adigaa ninkii cidda u weynaa ahe".
Diiriye inta bakoorada salkeeda dhulka ku garaacay oo yara aamusay ayuu yiri:
"Aniga iyo adiga rag walaala ah ayaa nahay meelnana kala tagi mayno, Kadiye ama aan dhaho reer Bulxana tol ayaa tihiin, Soomaalidu tol iyo beel ma kala taqaan, beel waa kuwaad ka dhalatay tolna waa dadka aad is fahantaan ama isku meel ku dhaqanteen isku xusuus tihiin, waad isku tolan tihiin, isku dan iyo isku dagaan ayaa tihiin, marka reer Bulxan waa tolkaa dad wax idin ka dhaxeeyaan weeye, beeshaaduna waa dadka aad ka soo jeedo, dan ayaa laysku wataa iyo is garabsi iyo is gaashaan buuraysi, dhalyaa isku kiin keentay". Intuu bakoorada madaxeeda labada gacmood ku qabsaday garkana saaray oo xoogaa amusnaa ayuu hadalkii sii watay oo yiri:
"Kadiye iyo adigu waad isku tolan tihiin, waan ogahay dhexdiinana cid ma dhex gali karto, gar ayaadna u leedahay, aniga kula hadlaya reer Bulxan say u dhanyihiin

madaxay ii saran yihiin waana siday kuu wanaajiyeen darteed, markii kuwii aad dhalyada wadaagteen kaa jeesteen adoo Gabana, reer Bulxan waa ku wanaajiyeen oo ku gacan qabteen wiilna kaa dhigteen, adigu kii la wanaajiyaaba tahay oo iigaba sokaysid, kumana weydiinayo talada aad ka qabtid arrintaan saa waan garan karaaye, anigase ma laba mid".

"Midba?".

"Dhaqankeena haddaan fiirsho iyo warka la wareejin doono iyo gabadhaad adeerka u hayd gun ayaa guursatay waa i dhibaysaa, been kuu sheegi mayo, hor fariisiga odayasha iyo la sheekaysigooda ayaa i dhibi doona".

"Tan kalena?".

"Tan kale Ilaahay xaggii haddaan fiirsho, [inkasta oo Soomaali haddaan nahay markaan wax diinta ku lug leh aan diidi rabno aan diintaba iska indha saabno], iyo haddaan fiirsho wanaagii ay kuu galeen reerkaas oo anigana i samaynaya iyo aniga oo og haddaan ku dhaho baaji oo jooji arrintaan in aadan iga yeelayn inaan kala dhimano labadeenu maahane, taasna ma rabo inay dhacdo, intaas aan soo sheegay haddaan fiirsho, guurka caruurtaas raalli ayaan ka ahay".

Warfaa ayaa markaa yiri:

"Ilaahay iyo walaaltinimadeena iyo wanaaga la ii galay iyo abaal gudidii wax ka sareeya maleh ayaan u malayn".

"Waa run".

"Walaalkay iga weyn ayaa tahay dhib waxaad iga soo martayna waan ogahay, adoon wax badan iga weynayn ayaad i korin jirtay, kala dhimasho warkeeda daa horta, manta heerka aan aan gaaray ilaahay iyo adiga iyo adeer Bulxan iyo Sheikh Birre ayaa mahada iska leh, marna inaan ku garab dhaafayo ha u malayn, walaal kaliya iima tihide aabe iyo hooyo aanan arkin booskoodii ayaad ii buuxisay, intaan soo korayay agoonnimo iyo rajaynimo ma dareemin waana adiga dartaa iyo adeer, waan garan karaa dhaqan ayaa ku jiidanaya oo ku haya, waan garan karaa hadalka dadka, waan garan karaa warka sayladaha laysla dhex wareegi doono intaasna waxa aniga igala weyn in aanan Eebbe danbi ka galin, saad u sheegtayba tolkeey ku abaal

dhici maayo iskana xumayn mayo, adna saan wax u arko inaad iila aragto yaan filayaa jeclaan lahaana, marka waxaan kaa codsanayaa walaalkay iga weyn ahaan iyo waaridnimaba in aad adoo raaliya ilmahaas faataxada u marto, iskugu ducayso".

Intuu yara aamusay ayaa Diiriye yiri:

"Wax badan waa lay orandoonaa waa inan gumaydkii, taasna waa dhammaan ama anaa inta la wadwado dhimanaya, da'ayaaba I haysee, waxaanse kuu sheegayaa haddii laysku yimaado waana ay dhici doontaaye, oo beeshu isku timaado, inaan kuu doodo ha iga sugin, inaan dhaho daaya ninku waa toosan yahe ha iiga fadhin, warkaygu ma cadyahay".

"Si fiican" una raaciyay "war kalana waan kuu soo wadaa".

"Haye".

"Reer Warfaa waxay doonnad kaaga yihiin gabadhaada Aragsan oo ay kaa raabaan in ay ku gula xididaan".

"Aragsan adoon i weydiin, wiilkeygaan ku darsanayaa ayaa kugu filneyd balse waad i sharaftee, Allaha ku sharfo, waana filayay, muluq muluq dooda ayaan u bogi waayay markay isla joogeen".

"Oo waaba la socotay miyaa?".

"Cidi wax iima sheegan, oo duul aan waxba kala ogayn ayaa la ii haystay, balse waan la socday arrintooda, khayr Allaha ka dhigo".

"Amiin".

Diiriye asaga oo og in uu uga digay Warfaa in uusan garab ka sugin, ayuu haddana markuu arkay waxa Af-dheere dabada ka wado iyo foolka Afdheeraba xanaaq is xiray, hadalkiisiina ku bilaaayay oo yiri:

"Bismillaahi Raxmaani Raxiim, dhamaantiin waad salaamantihiin, arrinta gogoshaan loo fidiyay maanta waxaan filayaa ninba in uu aragti ka qabo, inta aanan dhex gallina ka hadalka arrintana waxaan jeclahay in aan wax yar dhaho, oo ah haddaan nahay odayaasha Soomaaliyeed is badalka xilliyada lama socono, noloshu maanta tii hore oo kale maahan, dhillinyarada soo kacday garaadkeena iyo koodu meelo badan iskama qaban karo, waa caruurteennii inaan u tallino ma xuma

balse waa inaan ogaanaa xilligay joogaan in uusan keennii oo kale ahayn, isbadal joogta ah in nolosha iyo nooluhuba ku jiraan waa inaan la soconaa, arrintaan haddaan u soo gudo galo, waxaa dhici lahayd in haddii tan oo kale dhacdo dhallinyara nimadeenii boqolkiiba sagashan iyo sagaal lagu gacan sayri lahaa, balse maanta waxaan hubaa da'da cusub in boqolkiiba sagaashan iyo sagaal ay soo dhaweyn nayaan, waayo wax yaabo badan ayaa is badalay, aqoon ayaa soo korortay mid diimeed iyo mid kale ba leh, dadkii kala durugsanaan jiray oo qayba meel daganayd waa isku soo dhawaadeen, dhabarkaa laysku hayaa, guryihii ayaa isku dhagan, magaalooyonkii ayaa weynaaday dadkiina ku soo bateen, caruurtii sidaas ku soo kortay waa iskaga dhow yihiin kuweenii hore oo dhaqan miyi iyo beeshooda kaliya ku soo koray, reer hebel maanta da'daan cusub waa ku yaraatay, meesheedii waxaa u galay isku ciyaal xaafad ayaa nahay, waana wax wanaagsan sidaan qabo, inaan ku sii dhiirri galinana waa loo ayaahan yahay, qolo qolo inta ayna soo marsisay iyo meeshay na dhigtay wad aragtaan, intiinaan meesha fadhida nimaan aabbihii ama walaalkii ama ina adeerkiis ama qof xigtadiisa ka mid ah asaga oo aan waxba galabsan waa reer hebel aan loo dilin idin kuma jiro".

Raggii meesha fadhiyay inta isha la raacay ayuu hadalkiisii sii watay oo yiri:

"Anigu miyi ayaan intaan ku soo la ekaaday oo wax ma baran, mid diimeedna geel jire ayaan ka ahaa, balse in la siman yahay oo Ilaahay uu diiday in lays takooro waan garan karaa, waayo garaadka igu jira ayaa ii sheegi kara aniga oo aan wadaado weydiin, hadalka yaanan ku dheeraane waxaan qabaa in go'aanka Warfaa uu yahay horseed fiican oo in lagu daydo mudan, waana ka baxay hadalkii".

Warfaa wuxuu laabta iska yiri

"*balaayadii qofku dhacdaa qof kalay wax tar u leedahay, xurgufta Diiriye iyo Af-dheer iigama darin, garab aanan filayn ayayba ii noqotay"*.

Bulaan yar oo raggii ay laba laba iyo saddex sddaex afka iskula galeen ka dib ayaa Afdheere oo meeshii laga saro aysan dhiig lahayn yiri:

“Oo hadda ma waxaad leedahay ha lagu raaco Warfaa oo sharaftii beesha oo dhan dhulka ha lala galo, bal waxaad ku hadlaysid fiiri nin weyna waad isku sheegaysaaye”.
Rag kale ayaa hadalkii soo galay oo yiri wax dhici kara iyo wax la qaadan karo maahan talada Diiriye, buuq yarna meesha ka muuqday, markii buuqii damay ayaa Diiriye oo daba jooga hadalkii Af- dheere yiri:
“Af-dheere ma iloowsan tahay in aynaan isku beel ahayn aniga iyo adigu, oo Warfaa aan walaallo isku hoya ah aan nahay, mise waa kaa hoos baxday taas”.
Shib ayaa la yiri wax la filayay maahayn, ragga qaarkiina xumaan uu ula danleeyahay beeshooda ayay u qaateen, asna guduhuu ka qoslayay tan uu Af-dheere ku dhigay, hadalkiiayuu sii watay oo yiri:
“Si xun ha ii dareeminina, beesha inaan ku xumaynayo ha u qaadanina, meel ma kala jirno hayb koraa naga dhaxaysa, sina kuma kala hari karno, wixii idin dhibi anna waa i dhiayayaan, balse beeshayda iska daaye gabadhayda maanta haday la timaado nin dadkaad diidan tihiin ah oo nin wanaagsan ah uma diideen, waxaase iga xanaajiyay in ragga qaarkii ay arrintii ka dhigeen kacbada oo la burburin rabo, waana mahadsantihiin, haddaan gafayna raalli ha layga ahaado, waana ka baxay”.
Af dheere ayuu fiirshay oo ciil buuxa,
“*qorshihii Afdheere kala daaday marba hadii asagii Warfaa la dhashay raali ka yahay guurkaas, rag ciil cadaab ka dooray ayaa la yiri, ee jabad ma ku saaray Afdheeroow cirrid xumayde sidii doofaar dhalan dhoolayee, waxaad qastaad baratay, tanaase laysku baran”* ayuu uurka iska yiri Diiriye.
Hadalkii waxaa qaatay Prof Calasoow oo sagal abtigeed ah, markii horena cid u yeertay aysan jirin, Af-dheerena in uu meesha yimaado maba rabin, Calasow waa geed adayg aan hadalka la gaban, galabtaasna markii odayaashu beeshiisu isa soo qaban qaabinayeen oo Tuur soo hor kaci rabay ayuu la kulmay, xagee loo socdaa markii uu weydiiyay ayaa nin raggaa ka mid ah ay ka soo fakatay oo yiri:
“Af-dheeraa ayaa noo yeerayoo arrintii Warfaa ayaa laga hadlayaa, kuna saabsan gabadha Sagal ah oo uu boon siin rabo”.

“Oo maxaa laygu soo sheegi waayay” ayuu yiri

“Anagaba Tuur ayaa noo sheegay, ee lama socon miyaa?”.

Waa uu iska aamusay, guriga Tuur hortiisaa ayaa la taagnaa, durbadiiba Tuur ayaa soo baxay oo yiri na wadsha, markaasuu isha ku dhuftay Prof Calasoow, inta is galay asagaoo xusuusan balantii Afdheere ee ahayd Calasoow yaan la keenin goobta ayuu yiri:

“Arrin yar ayaan u soconaa inteenaan ayaana loo yeeray”. Intuusan hadalkii dhamayn ayuu ka dhex galay oo yiri:

“Walle inaad lugtaad qaado ku jabiyaa galabta, ma waxad rabtaa intaad iska kay reebto oo aad talada walaashay iyo gabadhaan abtiga u ahay adigu falanqaysid, eey aa tahay, adiga iyo kii ilkaha faran farka lahaa waxaad wareegtaan ma anaad igu keenteen, habartey ayaa ii banaan haddaan wax dhicin”.

Oo inta dhaqaaqay kuwii kale ku yiri:

“Haddaad socotaan soo baxa”.

Hadalkiisiina waxa uu ku bilaaayay.

“Bismillaahi Rahmani Raxiim, dhamaantiin waad salaaman tihiin waana ka xumahay in aniga oo aan la ii yeerin aan galabta imaado gogoshaan, waxaase xusid mudan reer abti markii loo yeerayay maxaa aniga la iiga qariyay, aniga oo gabadha abtigeed ah, oo ay ku dhacday ragga oo soo socda inaan arko layskuna dayay in la i reebo, waxay ku dhacday waa dulmi ragga qaarkii ee nagu dhexjira ay wadaan, in badan oo cirrid xunna ay la qabaan sida Tuur oo kale iyo Af-dheere oo ku taliyay in layga soo tago iyo kuwa kale oo meeshaan fadhiya, magacaabi doodana hadda dhay macaan ku dhami mayee inaan iska dhaafo maahe, waxaan gartay dulmi in uu meesha ka socdo oo garsoor Eebbe ragga intiisa badan aysan u imaan bartaan, waxaanse kala helnaan leenahay”.

Barkhad ayaa ka dhex galay hadalkii maanta oo dhanna aamusna oo yiri:

“Barafisoore waan ka xunahay arrinta dhacday aad iyo aad, nin meel weyn kaga jiraa tahay bulshada, waan kaa raali galinaynaa”.

Barafisoor waa calasoow oo asagu soo dhamaystay wax barasho sare dalka gudihiisa iyo dibadiisaba dowladana meel fiican ka joogay barena ka ahaa jaamacadda dal dagaalkii sokeeye ka hor, ka dibna aan ka bixin dalka go'aansadayna haba yaraatee in dalkaan iyo dadkaan wuxuu u qaban karo u qabto, waxaana uu bilaaayay olole ah in deeqda galeeyda ee WFP keento oo dalal kale laga soo gado la joojiyo oo beeralayda soomaalida laga gado galayda ay tacbeen, meel kastana uu ka sheego in ay niyad jab ku ridayso beeralaydeena oo markii dalagu u soo baxo mid bilaasha ay WFP suuqa soo daadiso, taasna ay keentay in qofkii beer lahaa uu xilliga soo socda wax tacban waayo ilayn khasaare ayuu galaye, waa gumaysi daahsoon iyo dib u dhac nalala doonayo, dalka iyo dadkana la rabo in dhinac walba laga burbursho ayada oo la adeegsanayo calooshood u shaqaystayaal nagu dhex jira oo soomaali isku sheegaya, taageerayaal badan waa uu helay oo la ololeeya, nacab badana waa yeeshay naftiisa halis galiyay. Warkiisii ayuu sii watay oo yiri:

"Waad mahadsan tahay Barkhad, Ibliis cid walba waa ku dhex jira, keena waa naqaan, idinkuna waad taqaaniin ayaan u malayn kiina, haddaan taas ka gudbo, beri hore ayaa awoowgay maalin igu yiri dadka boonta la dhaho maxaa boon loo yiri oo loo fogeyay ma taqaan? maya ayaan iri, waxuu yiri waa hore oo dadku miyiga wada joogay oo xoolo raacato la aha, garaadna wax badan aan la dhaamin xoolaha la raaco, diintuna dadka ku yarayd, magaalo weyna aysan jirin, dadkaan boonta la dhahaa waxay joogeen tuulooyinka iyo magaalooyinka, farsama yaqaannay ahaayeen aad ayayna iskula weynaayeen oo waxay gaareen heer ay dhahaan ninkii waran wanaagsan raba ama kabo aan ka dhammaan ama ableey fiican oo af leh, adigu wax fiican qofkii raba waa inuu gabar nasiiyo, colaadana waa jireen oo nin walba ableey fiican iyo waran waa u baahnaa, sidaas ayay dadka kula dhaqmi jireen, balse waxaa la gaaray, ninkii gabar ka guursadaa inuu nin karmeed yahay, waxay sidaa ku socotaba biloowgii gaalada ay imaanayeen dalka, waxay arkeen gaaladii farsama yaqaanadaan maahine cid kale oo wax kala og kana hor imaan karta in aysan jirin, wadaadada diinta marka laga reebo oo ayaga il gaara gaaladu

ku fiirinaysay, hadde waxaan ka hadlayaa boqollaal gu' ka hor, ayada oo sidaas la yahay ayaa farsama yaqaanadii waxay toleen kabo labada dhinac laysku soo rogo oo kor xarig laysaga xiro marka la gashanayo, markii aan la qabin oo ay dhulka taallo kabtu, oo labada dhinacna geesaha u kala dhacaana u ekaata aummada kirishtaanka, catabka, taas gaaladii waa ka caraysiisay, ciilkii xoola raacatadu u qabtay iyo kii gaaladu u qabtay ayaa isbiirsaday oo gaarsiiyay in lays kugu tago inta laga gaarsiiyay halka ay maanta joogaan." Calasoow ishuu la raacay dadkii meesha fadhiyay hadalkiina sii watay:

"sidaas waa sida awoowgay ii sheegay, mana ka beensan, aniguse waxaan ogahay nin farsamo yaqaan kaa nasabsan, waayo adiga ayaa u baahan markasta ee asagu kuuma baahna, danta ayaa kugu qasbaysa in aad hoos joogtid, waayo agabkaaga oo dhan ee nolosha ayuu sameeyaa, balse sida hada aan qabno oo aan ka rumaysanahay in lagu dayriyay, oo ah baqti ayay cuneen, wax ka daran ayaa la sameeyaa maanta oo wax badan bakhti cunidu dhaanto, horeyna soomaali u samayn jirtay, cid cid ku cayaysana la ma arko, waaba lagu faana dilka iyo dhaca iyo boobka maanta, marka runtu waxay tahay in dadkaan naga fiicanaayeen, haddana naga fiicn yihiin, dhabtuna waxay tahay nin wax yaqaan midkaan wax aqoon inuu ka fiican yahay, diinta ayaa sheegaysa iyo garaadka toosan intaba, ayaguna dad farsama yaqaan ayay ahayeen, oo tan iyo hadda yihiin, dadka maanta lagu faano aduunka ee wax walba oo hurumar ah keenay, oo gaarsiiyay bani'aadamka in ay dayaxa ku dul dagaan, oo isgaarsiintaan iyo horumar ifka keenay, waa dadka aad liidaysaan idinku, waa kuwa sameeya kabaha iyo boorsooyinka qaaliga ah, oo laga yaabo qaarkiin inaysan gadan Karin"

"Waxaa caddayn markhaati ma doonto u ah inay dad wanaagsan ahaayeen, haddna yihiin magacyada loo yaqaan sida, Madhibaan oo ah ma dhibe, dad dhib yar in ay ahaayeena ku tusinaysa, dad nabadeed, Howraarsame oo ku tusinaysa dad hadal wanaagsan, eray wacan in ay ahaayeen oo lala dhaqmi karo, Waraabiye ama Waraabeeye oo ay ugu baxday in xilliyada abaarta oo biyo la'aantu jirto oo Soomaalidu biyaha isku diidaan ay ayagu dadka u yimaada waraabin jireen, dabato

(jaaji) oo kaba hormarsanaa Soomalida inteeda kale, oo barwaaqada badda dhex jiifta ogaaday kana faa'iidaysan jiray, magaca Tumaal oo ku tusiya nin howshiisa haysta, oo aan la'aantii dadkuba horumar gaareen, iyo magacyo kale oo wada wanaagsan, Eebbe waxa uu yiri hal naf ayaan idinka abuuray, balse waxaa lagu kala hor maray oo lagu kala sharaf badatay waa xumaan ka tagida iyo wanaag u jooga iyo Alleka cabsiga, waana inta magacyadaas ku tusayaan, oo ah wanaag uun bes, si kastaba nimaan naarta kaa celin Karin yuusan idin habaabin, dadnimadana idin ka bixin, Weynihii na abuurtayna aan ka baqno, warkaygu waa cadyahay ayaan u malayn, tan maanta laygu yeerayna ama aan soo diriqsaday imaatinkeeda ayada oo aan la ii wacan, Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa maalintii oday oday, habeenkiina hooyo hooyo, marka aniga ayaa gabadha u abti ah, waana idin kaga sokeeyaa, waana ku raacsanahay Warfaa, war kale ninkii uu ku jiro waa hadli kara, jawaabtiisa anigaa u haayee, waana ka baxay".

Barkhad ayaa yiri, Warfaa bal wax dheh warkii aduu ku joogaaye, inta fadhigii hagaajistay ayuu hadalkii ku bilaaayay

"Bismillaahi, dhammaantiin waa idin salaamay, salaan ka dib warka inaan ku dheeraado ma rabo, war la ogyahay waxa loo dheereeya waa daaman daalis iyo daldaloollo raadis, marka hore anigu nin dadkiisa diidan maahi waxii wanaaga oo ciddu ku tashato nin diida maahi, waana igu taqaanaan, waxaan u cuntamin nin qaatana maahi waad igu taqaanaan taasna, runtana kama gambado waad ogtihiin taana, maantana waxaan idiin sheegayaa Weynihii i abuurtay iyo aniga dhexdeena nin soo gali kara ma leh oo aan u ogolaanayo".

inta yara aamusay ayuu hadalkii sii watay oo yiri:

"Maalin dhaweyd oo aan xanuunsanaa dad badan ayaa ii yimid qof walba Alle ha ku caafiyo ayaa wax tarkiisu ahaa, intaas kaliya ayaa awoodiisu ahayd, qof iga qaadi karay jiradaas malahayn ama anaa kaa qaadaya i yiri, marka jiro yar oo i haysay ayaad iga qaadi weydeene side ayaad ugu tala jirtaan inaad naarta iiga badayaadisaan haddaan Weynaha warkiisa diido oo kiina yeelo" dhinac ka dhinac ayuu isha la raacay, raggii meesha fadhiyay shibtay wada galeen,

“Hal mid waan ugu diidi gabadhayda wiilkaas, waana haddii aad balan qaadi kartaan ama midkiin ballan qaadi karo inaan Alle ii caroonaynhaddii uu caroodana aad naartiisa iga bad baadin kartaa, ma ii balan qaadi kartaan taas? Waa maya ayaan fili, mood {maal} maanta waan haysta iyo caruur Eebe ayaana mahadda leh, magacna Warfaa ayaan u ahay, ifka waxa aan raadiyaa waa raalli ahaansho Eebbe iyo sidaan naartaa uga badayaadi lahaa iyo caro Alle in aysan helin, garaad hadduu idin ku jiro waad ii garaabi lahaydeen waadna igu dayan lahaydeen.” Cid hadasha waa la waayay, markii danbe Sheikh Bacool ayaa hadlay oo yiri:

“Waa runtaa intaad sheegtay balse dhaqankaan xun wali waa jiraa Allaha naga baabi’iyee, waana baabi’doonaa, balse annagu kuwa bilaaba yaynaan noqon uun weeye waxa meesha laysugu keenay oo aan ka hadlaynaa, waxaa la yiri qofaan dhaqan lahayn ceebi uma dhowrna” maahmaahdaas Shiikhu meel uu ka keenay lama yaqaan, waxayna u badan tahay in ay jeebkiisa tahay, rag badan baa se madaxa u lulay oo ku raacay.

Warfaa ayaa hadalkii sii watay oo yiri.

“walaalayaaloow Ilaah aan ka baqno, tan kale maanta oo aan tarmay oo mood iyo noolba Rabbi isiiyay ayaan tolka ka mid noqday, maalintii gaban yar oo agoon iyo rajaya aan ahaa nin i qaada oo i meeleeya waa laydin ka waayay, shiikh Birre oo tabar daran oo aan waxba haysan ayaa kaalay i yiri iyo Bulxan oo gurigiisa ii furay, caruurtisa igala mid dhigay, maalintaas oo aan hiil iyo hooba u baahnaa tolkay waan ka waayay, waxba uma arag taas, ka gadaasheed nin ii sheegi kara ma idin ku jira wax tolku i warsaday oo wanaagsan oo aan maya iri oo aan diiday, qaaraan ayaad igu soo qorataan, waliba qaybta weyn, waan bixiya kama hadlo, markaas ayaad idinkuna maanta ileedihiin Ilaahay ka sokoow ninkii heerkaas i gaarsiiyay oo waxaan idin taro maanta saldhigga u ahaa ku caasi, oo kir ku dheh, in yar oo dadnimaa qof ay ku jirtaa ma sameeyeen waxaad igula talinaysaan, dadna kuma waaniyeen, aan dib isugu noqonno ifka iyo aakhiro kala badan, dadka dulmiga ha laga daayo, kuwaa gabdhahooda gaalo qabto ayaa jira oo beesha ah oo markay yimaadaan fadhiga looga kaco oo istaag lagu salaamo, weynaysiin la weynaynayo

darted, waayo gabadhiisa ayaa gaal qabaa, kii muslinka ahaa oo Soomaaliga nala ahaana gabdhaheenna ma geeyo ayaad leedihiin oo guurkoodu waa xaaraan, war ma anigaa waalan mise cadan ayaa laga heesayaa, intiinaas oo odayaal ah waxaad iila timaadeen manta, waa diinta ka bax, waa Rabbi iyo rasuulkiisa daba maryee, mana idin ka yeelaayee Ilaahay ha idin soo hanuunsho idinka, warkiina waa ka baxay".

Aamusnaan ayaa goobtii qabsatay, cabbaar markii ninba goonidiisa u humbulsanaa, ayuu hadalkii ku soo laabtay oo yiri:

"Jimcada ayaa meherkii dhacaya, waana idiin furan tahay irrida gurigaygu, waana idin ku soo dhaweyn dhammaan, ninkii yimaadana walaalkay, kii aan imaanna walaalkay".

Ugu danayayntii ugaaskii ayaa hadlay oo is ilaalinaya, oo see xeero lagu xagtaa ilkana ku nabad galaan maskax ah wata wuxuuna yiri:

"Bismilaahi, dhamaantiin mahad ayaan idiin celinayaa sida wanaagsan ee aad uga soo qayb gasheen fadhigaan, marka xiga ninba garaadkiisa ayuu ka hadlay anaga oo wax dhiba aan is weydaarsan, waana wax wanaagsan, Waa xilli danbe Warfaana warkiisu wa cadyahay, mar kale ayaan isku imaan doonnaa oo waxii laga qaban lahaa arrintaan go'aan ka gaarayna, inta ka horreysana Allaha na nabad yeelo".

## DHIBBANAHA DHEX JOOGA

## CUTUBKA LIX IYO TOBNAAD

## MUSLIMO & DHARAS

Dharas oo ay Warfaa isku hayb yihiin aadna u fudud oo aan wax hubasan oo aad is leedahay waali iyo fiyoobi ayuu u dhaxeeya mararka qaarkood, kana mid ah odaasha beesha ayaa isku xilqaamay asaga oo cidna aysan dirsan in uu baajiyo guurka wiilka iyo gabadha oo sharafta cidda badbaadiyo, taasna ay u keeni karto in uu ka mid noqdoono odayaasha waaweyn ee beesha oo aan warkooda la soo celin iyo ayada oo markastan la xasuusan doono wanaaga uu tolka u sameeyay, waana siduu asagu is yiri.

Dharas xaafadda ayuu wax ka daganaa oo dadka aagga si fiican ayuu u yaqaanay, waxayna aad isugu taagnaayeen Xaaran oo markii golaha xanta la joogo oo asaga laga hadlayo ugu yeerta, madax lagu khasaaray, ilaahay madax weyn ayuu siiyay balse maskax yar ayuu ku abuuray ayay tiraahdaa, Dharas madax weyn ayuu leeyhay iyo qoor dhuuban oo lala yaabo siday madaxiisa wayn ay u celiso qoortaan aad u dhuuban, wuxuuse saaxiib fiican la ahaa Muslimo oo warkeedu war shiikh yiri ula mid Ahaa, fudayd dartii wax walba oo ay dhahdo waa la dhici jiray, wuxuuba u arkayay Muslimo in ay tahay qofka ugu caqliga badan ee xaafadda daggan markii la reebo asga oo isku haysta in garaadka Eebbe siiyay aan dad oo dhan la wadasiin kuwa gaar ah maahine.

Muslimana waxay ogaatay meesha Dharas uu u jilicsanyahay oo ah isla weynida aan waxba ka jirin taas oo ay ka faa'iidaysato, hadalada ay ku tiraahdo marka ay been faaninayso waxaa ka mid ah,

“*Soomaaliya shan adoo kala ah hadday u dhalan lahayeen dad jira ayaan maanta ahaan lahyn”* iyo *Dharasoow madaxda dowladdu hadday kula tashan lahayd ama hogganka dalka wax lagaaga dhiibi lahaa dalku waa toosi lahaa, maxayse kuugu taal nin wax garad ah Soomaali ma rabtee, ciil badanaa Dharasoo kale oo aan laga faa'iisanayn oo maskaxdiisa qabri la galaya”*
wax yaabo badan oo jaadkaas ah ayay ku faanisa, waana waxa uu u siiyay kaalinta labaad ee garaad garashada dadka dagan xaafadda.
Muddo hadduu raadinayay sidii uu arrintaan waajibka ah xal ugu heli lahaa ayuu soo xasuustay Ibliisadii Muslimo, wuxuuna laabta iska yiri “*baadiye nimaan lahayn ayay ag joogtaa, bal baan mar hore soo xasuusto naag ayayba shaqadeeda tahay arrimahaan oo kale”,*
Horay ayuu ka dhaqaajiyay oo aaday gurigeedii, balse nasiib wanaag ayada oo guriga u socota ayuu jidka ku arkay, wuxuuna u sheegay in uu u wado arrin muhiim ah oo xallinteeda labadooda looga fadhiyo.
“Yaa nooga fadhiya oo na sugaya?” ayay tiri
“Tolkoo dhan”
“Tolkee? illayn aniga iyo adigu isku tol maahine”
“Waa runta, waan ilooayay ilayn isku tol ma aynaan ahayn” oo inta gacmaha kala rogay hadalkii sii qatay “wallaahi jacayl walaaltinnimo oo aan kuu qabo ayaad dad oo dhan iiga sokaysaa, waa tolkayga dadka wax sugaya, anna adiga maahine inuusan qof kale wax ka qaban Karin arrintaan waan huayaa.”
*Wax waalan badanaa* ayada oo uurka iska leh ayay tiri;
“Waa arrin seeya? bal ii faahfaahi”
“Sow ma ogid in Warfaa gabdhiisa ina Kadiye guursan rabo?”
“Haa, maxaase laga raabaa dadkaas is jecel?” ayay tiri ayada oo baaritaan ka wada rabtana inuusan wax uusan dib ula harin oo warka u wada sheego.
“Jacayl warkiis majiro, waxaas waa sheeko caruureed markii sharfta beesha laga hadlayo” ayuu yiri

“Oo beesha miyay arrintii gaadhay, howl hoose in ay tahay ayaan u haystee” ayay ku tiri ayadoo uurka iska leh, *ku toos wadada Dharas oo warka soo daa,*
sidii ay filaysayba waddadii ayuu saani u qabsaday oo wixii dhacay oo dhan u sheegay, sidii cajal ayuu u soo duuayay wixii meesha ka dhacay oo eray eray ugu sheegay, hebel saan ayuu yiri oo hebel saan ayuu yiri oo hebelna saan ayuu yiri, Warfaana saan ayuu yiri warkiina waa mari waayay tolkiina ku gacan sayray.
Intii uu waraka u waday Muslimo waaba xajiimootay, naarba naar ayay ka cawdu billaysata, Muslimana sideedaba hadday magaca Af-dheere maqasho canaanyaa kuba kacda, meel uu lug ku leeyahayna waa ka la labootaa, dadnimo xumo ayuu doofaarnimo ku darsaday ayay tiraahdaa, dagaal furan ayaa ka dhaxeeya labadooda oo tan iyo hadda Af-dheere guusha wato, ilaahayna waxay ka baridaa ayada oo aan dhulka la goyn eygaas ilakaha dheer in uusan dilin asaga iyo ayadaba, nolol iyo raaxa adduun oo ay filaysay ninkii kala tuuray waa asaga, ilkuhu midba mar ha ka soo dhaceene, ifka kay ugu jeclayd ninkii aakhiro u diray weeye, ayadana qalbigeeda mugdi ka dhigay, wadaadka hada qaba ee ay meelaha ku burbursato hortii ninkay jeclayd waxaa loo eedeeyaa in shirqool Af-dheere dhigay lagu dilay, balse wax cad waa lagu waayay, dhimashadii noloshii Muslimana waxaa loo saariyay dableey aan haybtooda la aqoon, balse wariyayaasheeda gaarka ah waxay u sheegeen in loo badinayo asaga, ayaduna waaba hubtaa oo asaga ayaaba ku yiri, nimaan aniga ahayn naayaa ku dhihi maayo, balaayaan asaga ahayn ifka cag ma soo dhigin, mar qura  intay xusuustii ka soo baraarugtay ayay tiri:
“Dharasoow dadka markaan sheekaysanayno oo magacaaga laysku keeno waxaan dhahaan, ilaahay hadduu garaad cid siiyay dharas ayuu siiyay, oo wallaahiya, waayo waxaan kugu jeclahay waa caqliga iyo xikmadda, waagaan inanta ahaa haddaan ku baran lahaa afkaan kugu la carari laha, maya, wallaadan iga maqasheen”
Dharas foolkaa dhalaal ka baxay, farxad uu isku celinayo ayaa maqaarkii soo dhaafatay, waa wada iftiimay, hadalkii ayay sii wadatay ayadoo leh, “maantase maankayga ma ka daadagayso ninkaan aqiinay in Af-dheere ka caqli badiyo, mana

dhacayso oo waan hubaa in xoolahaas wax uu soo maleegay aysan ku marayn, ee see wax u jiraan".

Farxaddii ayaa bar go' ku noqotay Dharas, qaracan ayay ku noqotay sidii cirka loo marinayay in dhulka lagu soo daayiy, wuxuuna galay is difaac asagoo leh:

"Maya, maya, arrintaan Af-dheere shaqo kuma leh, anaa is xilqaamay oo tolka u xaytay, mana uu la socdo asagu waxaan damacsanahay, intaas inaan dhaamo adba waad ogtahay Muslimo, oo kaas oo kale warkiisa aanan meel ka soo qaadin".

"Waan ogahay, ee sideedaba nimaad ka garaad roontahay qorshe uu wato waxba laguma darsado, ceeb ayuu lugaha kuu galin, waana maqlay in arrinta dhan uu asagu wado oo gogosha dhigay adna aad ii sheegtay, tan kale nin ehlu diin ah ayaad ahayde oo dadka shiikh u ah, ee dhaqankaagii wanaagsanaa ku soco qabiil iyo ilaahay kala weyn, aakhiro iyo aduunyo kala badan, naar iyo jannano kala qaboow, wallaahi waan ku jeclahay, aduun iyo aakhiro inaad liibaantana waan jeclahay".

"Ilaahow kun jeer towba, walaalay waa runtaa ilaahow tooba" asaga oo leh ayuu dhaqaaqay nabadeyna ku yiri.

Muslima waa ka hehsay sida fudud ee ay u kala wareejisay Dharas, waxayna ku shallayday haddii dadka dhan sidaan u ahaan lahaayeen, jikadeeda ayay Soomaliya uga talin lahayd, Af-dheerana in uu silic u dhinto waa ay hubin lahayd, ayada oo ubax baxaya ah ninkii jeerin qallalay ka dhigay oo farxadeedii af duubay, aakhirana u diray gacaliyaheedi, Muslimo waxay iska dhaadhacsiisay in ifka hal farxad ugu hartay, taasna ay tahay Af dheere oo aan dhimanna noolayna in ay aragto, taas weeye farxada ifka ugu hartay, waana waxay ilaahay labadoodaba cimri dheere uga barido.

War badnida Muslimo iyo fudaydka Dharas waxay labadoodaba illoowsiisay in goobta ay taagan yihiin oo ay ku sheekaysanayaan ay tahay dariishadii aqalka Xaaran oo warkoodi oo dhan dhagta u dhigtay, waxay maqshayna ay filan waa ku noqotay, markii ay dareentay Xaaran in asagii tagay, ayay inta roortay oo qolkii ka soo baxday oo alaab dayrka taalay ka dul tallaabsatay si aysan ugu daahin ka leexashada alaabta, [in kasta oo aydu aysan kala sheegi karin hadda, inay ka booday

iyo in ka weecatay] ayay illinka hore soo istaagtay oo Muslimo oo meesha maraysa ku tiri:
“Nabad ma sheegtay?”
“Waa nabad walaaleey” ayay tiri Muslimo soona xasuusatay in sheekadoodii ay ka dhacday dariishada Xaaran agteeda, markaasay u raacisay “si fiican ma u duubtay Xaaraneey, anaaba og war kaama fakadee”
“Maxaan duubay?”
“Ma annagii ayaa isku keen keennay Xaaran, waligaaba inkir, dan ayaan suuqa uga maqli waxaad duubtay oo dhan” oo inta wajiga kala maroojisay tiri “ilaahay ayaan ku mahdin wax wanaagsan mooyee in aadan wax xun iga maqal”
Xaaran intay dibnaha ka sharqamisay ayay tiri:
“Waxaan ka naxayba waa warka wanaagsan ee aad ku hadashay, ee maxaa ka danbeeya wanaagaas?”
“Maxaa ka danayayn lahaa? waligayba saasaan wanaag u waday ee dad aan wanaagaba aqoon ayaan dhex joogaa maahine, oo …” oo inta hadalkii joojisay tiri “ducaysan bal biyo isii balaayadu waa i harraadshee, adna waad iigu darsantaye”
Gurigii ayay galeen oo galaas biya ah u keentay, laba ganbar oo iska soo horjeedna la fariistay, warkiina waxaa bilaaayay Xaaran oo tiri:
“Naa xoolahaan la soo daystay muxuu lahaa?”
“Ha layaabin waa maangaab tahliil qabiil la cabsiiyaye, asaga oo kale raggu waa u badanyihiin, haddayba wada ahayne”
“Dumarkaba waa ku badan yihiin” ayaa Xaaran tiri.
“Dumarka raggaa baray, isku halayn rag ayay u sameeeyaan, ee hadday ogyihiin inaan rag is dagaalayn ayaguna badaas ma galeen oo beel beelna kama hadleen, ee duul doqomo ah oo rag la yiraahdo ayay arkeen oo ay isku diri karaan”
“Walle inaysan been ahayn”
“Been maahan dumar, haddaan nahay dhibkeen ma yara, hadal badan iyo muran, isku dir, walle Aadan wax la tus”
“Aadan kee?”

“Awoowihii aan ka soo farcannay, suu ayeeyo Xaawo ayuu dad kaligiis kala joogee”, oo inta yar aamustay oo yara qososhay tiri: “tolow yay ku diri jirtay, ilayn dad lama joogine? Yay la xaman jirtay?”.
“Naa ha I danayaajine waxaan ku weydiiyay, wanaagaan kuguma aqoone maxaad uga celisay wankaan qorshihii uu watay, wadnuhu ha karee”
Muslimo intay qososhay oo istaaq furulaysatay ayay tiri:
“Caqli badnidaa weel daloolaan kuu haystee oo qaylada uun ku fiicane, wanaag aan u samaynayo ugama celin, ee magac xumo iga soo raacaysa ayaan uga celiyay iyo jacayl aan u qabo jabaka eyga ilkaha dheer”
“Magac xumo seeya kaa soo gaaraysa?” ayaaa Xaaran tiri ayada oo rabta in warku is furfuro.
“Duulku daba dhilifyada daacada ii ah ayuu ka mid yahay, dadkuna waa ogyihiin, marka hadduu inta i taqaan dhexdooda waxaas oo kale la tago anaa farta laygu soo fiiqayaa, ayada ayaa ka adanayaysay baa la oran, ilayn asagu garaad ma lehe, waana waxa uu ii soo raadsaday”
Xaaran oo yaabban ayaa uurka iska tiri
“*tan haddii aanan cidooda aqoon lahayn, Ibliis ayaa dhalay ayaan ku dharan lahaa, dabayli ku qaaday oo jahannama dalaq kugu siisay”,* balse waxay tiri:
“Adiga see kula tahay guurka labadaas?”
“Aniga Muslima ahaan ma kala jecli Gabooyaa tiriye jinni haddii loo guuriyo, balse waan ogahay in laysku diido in ay diin ka bax aysan waxba ka yarayn, saa hadalkii Eebbe iyo rasuul baa la diidee”
“Jacayl rabbi iyo rasuul aad u qabto maahan waxaad saan u leedahaye, dhaga beelihii Af dheeraa meesha ku jira, waan maqlayay hadalka” “Warkiisa igaa wadnuhu ha go’ee, dhiig dad inaan galo marabo, balse qorshe uu wato oo aan ogahay in uusan socon ayaan ballan ku qaaday” ayaa Muslimo tiri ayada oo ciil ka muuqdo.

Xaaran oo caan ku ah inaysan wax qaboojin in ay ka darto mooyaane ayaa is tiri bal arrinta qabooji markay aragtay murugta iyo ciilka foolka muslimo ka muuqda oo tiri:
“Ma iloobe lagama fakado, ilaah ayaa jooga oo ka jaaseyn, intuu halleeyay oo dhan aakhiray ku sugi oo laga abaalmarin, ha murugoon macaanto, ilaahay talo saaro” oo durbadiiba kala wareegtay oo tir ”walaaleey asagu waa inkiray ayaa la yiri in uu dilka ka danbeeyay, anna warku tifiq tifiq ayuu igu soo gaaraye see wax u dhaceen?, Af dheere silsilado naareed ha lagu xiree”
Muslimo waa qof uurkeeda in la ogaado neceb balse markii arrintaan laga hadlayo Xaaran kun jeer ayay ka daran tahay, oo biloow ilaa dhamaad ma joojiso, hadalkeediina waxay ku biloowday oo tiri:
“Nuur alle ii soo diray ayaan is jeclaanay, qurux iyo edeb iyo aqoon intaba Alla u dhameeyey, waanaagiisa mid aan la calfanayn waa u ekaa”
“Haa, horaa loo yiri, qof wanaagsan ma waaro, allow kuu naxariiso, haye” ayaa Xaaran oo hadalkii ka dhex gashay tiri, ujeedkeeduna ahaa inaan Muslimo intay murugooto war ka joojin, in ay u jiibisana ay fiican tahay.
Muslimo hadday sida dadka lays kugu diro xariifad ku tahay, Xaaran sida warka looga soo saaro ayay macallimad ku tahay, Muslima warkii sii wadatay oo tiri:
“Aamin jannatu firdowsa allaha geeyo, muddaan isla soconay aad ayaan isku jeclaanay far iyo faraanti ayaan ahay, ma kala hari jirin oo dadku waxay na dhihi jireen labadii jacaylka la sarqaaamy, balaayo sideedaba ilayn meel nagama jirin, oo Ibliiskaan Afka dheer ayaa ilayn hawada cashaq dooro ku helay, been kuu sheegi mayo biyo dahab ayaan ahaa markaan yaraa, cadceeda soo baxda iyo aniga nalama kala aqoon, naag intii ilaahay qurux siiyay ayuu ii dhamaystiray, asna cambaruudkaas bislaaday ayuu dusha ka arkayoo is yiri cantuug cidi kaama xigtee…” Xaaran ayaa ka dhex gashay oo tiri:
“Mas ku cantuug dheh oo cawrada kaa goosay, kaasaaban nacee, ahaan jiray adna ha dhihin, haddaabad dayax soo baxay aad u egtahaye” Muslimaa oo uurka islka leh

“*walle Xaaran munaafiqnimo baratay”,* ayaa hadalkii sii wadatay, oo tiri:
“Maalin ayuu ii yimid oo igu yiri waan ku raabaa oo inaan cidda kaa doontaan raabaa, si wanaagsan ayaan ula hadlay oo waxaana ki iri, walaaloow wiil ayaan wada soconaa oo aan is jecelnahay asagaana ku heshiinay inaan isguursano, waadse ku mahadsantahay inaad dhicayga soo eegtay, asaga oon aan hadal oran ayuu iga tagay, anna wax weyn uma arkin oo waxaan is iri reer miyinnimadii ayaa weli ku jirta iyo sidee naag kuu diidi kartaa, maalmo kadib ayaa niman dhallinyaro ah u yimaadeen Xareed, waa wiilkaan is jecleyne, waxayna ku dhaheen gabadhaas agteeda ka dheeroow haddaad nolol rabto, laba iyo labo markaan isa saaray waxaa ii soo baxday in faran farkii ka danbeeyo howsha, maalin ayaan arkay oo aan ku iri, ma adaa nimanka u soo diray Xareed, kitaab jaamaca ayuu maray, waase haddaan kitaab galti miyi magaal ah rumaysto, walaaleey dad waxaa ugu aqoon xun tuula jooga, oo miyi iyo magaalo midna aan la socon, dhaqanna aan lahayn, asna saas ayuu ahaa, sheekada yaanan kugu kala goyne wuxuu igu yiri, nimaan aniga ahayn naag u noqon maysid, ma qasab baa markaan ku irina waa dhaqaajiyay, gadaal ayaan war ku tiri ku keentay ah ku maqlay in asagu rag soo diray, dayixii isoo baxayna tiisii ayaa dhamaatay oo maydkiisa laga helay meel luuq ah, ibliiskuna waa inkiray balse cidna caad kama saarnayn, balse ayada oo caddeyn aan lahayn iyo asaga oo beel hubaysan ka dhashay ayaa arrintii la iska ilooayay, aniguse ma illoobin mana illoobi doono”.
“Dhulka meeshaad cag dhigtaba kula duntay, oo ciidu ku laqday”
ayaa Xaaran tiri, si ay Muslimo hadalka u sii wado, una raacisay oo tiri
“wadaadkaagan ayaa kuu qornaa, calaf waa cajiib”
“Haa, wixii ilaah qoray lama seego”
“Xaajigaaga hadda ma is barateen mise waa ku soo doonay?” ayay weydiisay ayadoo og sheekada, haddana waxay is tiri bal in ay sheegto wax aysan maqlin oo laga illooayay markii hore.
“Alle u naxariisaygii markii Alle oofsaday, rag badan ayaa ii soo saftay, balse mid walba waa iga dhuuntaa markaan maalmo wada soconno oo

waa la handadaa, aniga oo calaf guur ka quustay inta ehlu naarkaas nool yahay, ayaa wadaad kaan maalin ii yimid oo i yiri waan ku raabaa, oo cidda inaan kaa doontaan raabaa , waxaan damcay inaan ku dhaho “*oo ma inaad dhimataad rabtaa, ma noloshii ayaa ku dhibtay”,* mise oran oo iftiin ii bidhaamay ayuu ahaa iyo raja nolol iyo guri iyo nin iyo hadii Eebbe caruur hooyo i dhaha i siinayo, haye ayaan iri, raalli ayaan ka ahay”

Xaaran ayaa ka dhex gashay oo tiri:

“Calaf waa kaas, adna cimri waa kugu socday, caruur waad u baahnayd”

Muslimaa inta qosol guuxday tiri:

“Xaaran sheeka naageedka naga daa iyo waxa naaguhu is kugu sheekeeyaan, caruur in ilaahay iga siiyaan u guursaday, waa sheeko naageed, rag iyo dumar caruur qof u guursada ma leh, salkaan ka wada kacnay, is qaboojiya ayaan isku raadsanaa haddaan rag iyo dumar nahay ee caruur cidi kama fakarto marka hore” oo hadalkii sii wadatay, “Wadaadkayga ayaa markaas ciddii u tagay oo i weydiistay, anna markii la i weydiiyay waan ogolay ayaan iri, waxaan ogaa in Af-dheere uusan qori ka jabin Karin agtiisa, asagu waa nin miskiin ah, balse kuwo dadka istaagga ku diirta ayaa la dhashay, lafta uu ka dhashay oo dhan waa rag oo madaxa la galin karin, beeshiisuna waa hubaysan tahay, kana xoog badan tan eeyga Af ka dheer, in aanan cidla ku duqoobin oo aanan gablan ku dhiman ka cararideeda, ayaan qori iyo hub u magan galay iyo rag wada dilaa ah, asaguse waa nin wanaagsan oo Muslim ah, nin hanuunsan weeye, haa, waxaas kuma jiro”, oo inta yara qososhay tiri:

“Markii hore waxaan is lahaa kan waa miskiin ee iska iimaanso, balse sariirtii ayuu war la yimid, ninba kama xoog badna, ilayn ninka ragannimadiisu is qaad qaad maahan iyo xoog badni, ee howsha uu la yimaado marka runtu timaado weeye, dadku waxy i dhahaan maxad odoga u dhibtaa, anna yuusan kaa fakan ayaa igu jirta, sidii naagoo dhan ogyihiin libaax nimadiisa iyo wanaagiisa,”

“Naa naga aamus” ayaa Xaaran tiri siina wadatay hadalkii “kaligaa maahan ee gabdho badan ayaa dhibban sidaas oo kale, adiga mid nacaladi ku dhacday ayaa ku helay, balse gabdho kuwii dhalay iyo kuwii la dhashay ay ku qasbayaan niman

aysan rabin oo indhahooda oo shan ah jacalkoodii iyo dadnimadoodii laga xayuubiyay oo nolosha ku dhamaysta hadday saan ahan lahayd, haddii aan diidi lahaa, haddii iyo haddii, oo ubdka Alle siiyay maahine nolosha inteeda kale mugdi u tahay oo aan cidna u ogayn ayaa jira, ciil badana, kuwa gabdhaha qasboow qabriga Alle idiinma waasiciyo".

Aamin intay tiri Muslimo ayay ku dartay

"waad I daahisay, goormaan qado Karin" oo inta istaagtay tiri "Warka ma qariside niskiinkaas Dharas ah ha ceebaysan, oo ilaahay ka baq, tan kale meelaad habaarka ku baratay maaqaane, waxaad ku fiican tahay ba asagaan arkee, har iyo habeen Af-dheere ii habaar"

"Hadal layga maqli mayo, Af-dheere waa shaydaan shaydaanna habaar laguma karo, dhulka iyo cirkuba ha diideene, walaahi ninkaas aniguba waa nacay, naxariis Eebbe naarta ha ka arkee".

Markii Muslimo illinka ka sii baxaysay ayay inta garbasaar soo haabatay, gabar guriga joogtay ku tiri:

"Naa qadada sii kari Ugub ayaan gaarayaaye"

durbadiiba waxay u tagtay Ugub oo sheekadii uga sheekaysay, Raaxo oo lagu naynaaso war safrisa oo meesha fadhidayna inta maqashay sheekadii ayay la roortay, oo cidii koowaad iyo labaad iyo kuwii ku xigay oo dhan dhaaftay ayada oo is leh, kuwaan warku hadduu soo gaarayaa ee kuwa fog fog warka u gee intuu kulul yahay, sidaas ayayna ku tagtay xaafad shanaad iyo ka gadaal, oo warkay soo maqashay iyo xardhid ay ku dartay u sheegtay, durbadiiba warkii Xaaran soo tabisay sidii dab bal qabsaday ayuu u faafay oo meel kasta gaaray, warkii oo muuqii kore ka jooga, balse macnihii wax badan is badaleen.

Muslimo oo qadadii wali dabka u saran tahay ayaa waxaa u yimid islan dariskeeda ah oo isku raran lagu naynaaso, oo ayada oo aan wali fariisan, salaan haba sheegine tiri:

"Naa Muslimo, wax baa lays kula haraaye see kaa noqotay, oo sirtaan aan soo maqlayna immisaad qarinaysay?"

Libaax nin ganay iyo meel laga soo ganay waa yaqaan, warkii oo waji kale lehna in la wado waa dareentay, markaasay tiri:
“Bal fariiso horta, oo hadalka tartiib iigu sheeg, warkana ii taana taanee”.
Isku raran intay ganbar soo haabatay oo garbasaartii ka sii dhacaysay dhusheda soo celisay oo fariisatay ayay hadalkii ku bilowday:
“Gabadhaan dariskaygaa ayaan hadal ka soo maqlay, ayaduna Xidday ka soo maqashay, Xiddana Canabaray ka soo maqashay, Canbarana
Suleekhay ka soo maqashay….”
Muslimaa inta ka dhex gashay tiri:
“Naa aniga xaddiis rasuul ii sheegi mayside warka nuxurkiisa ii sheeg, meeshuu ka yimid waan aqaanaaye”.
Isku raran inta neef xoog leh jiiday mid ka sii xoog badana soo tuurtay tiri:
“Waxaa suuqa ku jira in adiga iyo xoolhii aad wadatay Dharas aad balo maleegaysaan, si guurka ina Warfaa loo baajiyo, oo fidno tii u danbaysay oo casriya aad wadaan, oo maanta oo dhan aad shir ku jirteen irduhu u xiran yihiin, oo aad xataa odagaaga illinka ka furi weyday, oo uu irida garacayay maanta oo dhan, oo adiga iyo Dharas qol isku soo xirteen qorshe weyna dajinayseen, go’aana aad ku gaarteen in Warfaa kabtiisa cirka loo tuuro, adiguna fulinta qorshaha aad madax ka tahay oo lacag lagu siiyay, balse aad diiday oo aad tiri inaan Warfaa oo aan ka aarsado ayaa lacag igala weyn, lacag….”.
Muslimaa ka dhexgashay oo tiri:
“Naa bal sug, waa maxay dakanaha Warfaa iga galay oo aan ka aarsanayo?”
“Kuuma sheegin miyaa” ayaa Isku raran tiri ayada oo iska dhigaysa inay ka xuntay inaysan weli warka nuxurkiisii u sheegin, oo hadalkii sii wadatay
“waxaa la yiri barigaad yarayd Warfaa ayaad aad u jeclayd, asna waa ku diiday oo Ugub ayuu kaa raacay, ciilkii ayaad u qabtaa oo maalintii adoo la hadlaya oo baryaya uu jidka kaaga dhaqaayay, ayaad kitaab jaamaca ku martay inaad ka aarasato, waa sida la yiri, anigu war kama hayee, qabri ayaaba tahay, anagoo intaas in naqaanay inaan sheekadaas maanta maqlo, waaban yaaayay”.

Mulimo haday ahaan lahayd qof beer jilec u dhashay mar horey qaylin lahayd oo ku waalan lahayd waa been iyo habaar, balse si daggan ayay u tiri:
“Waxaas waxba kama jiraan, waa been la soo dhoodhoobay, wanaagga aniga iyo reer kaas naga dhaxeeya ayaa xaasidiinta u cuntami waayay, Eebase waxaan ugu mahdinayaa tii warka qaaday markii hore oo Ugub u gaysay inaysan wax ku darid aqoon, balse in ay war tabinta ku dheerayso waan aqaan”.
Isku raran intay foolka foolka u soo saaraty Muslimo ayay tiri:
“Waa tuma taas walaaleey?”
“Yaa kale, xaafadaan adiga iyo Xaaran cid idinka war tabis badan miyaa jirta?”.
Isku raran waa is gashay, wanaagii ay u samee is lahayd iyo warkay ula soo rooraysay masaanay dhashay, intay istaagtay ayay tiri:
“Horaa loo yiri asxaan ha falin shar kuuma timaadee, naa nabadeey, adba war kuguma yaree” oo illika u dhaqaaqday,
Muslimana waa ka daba tuuray oo tiri:
“Dhammaanteen allaha na nabad yeelo walaaleey, ifkaba wixii war wareejis yaqaan ayaan ugu necbahaye”

## DHIBBANAHA DHEX JOOGA
## CUTUBKA TODDOBA IYO TOBNAAD
## TASHIGII DILKA WARFAA

Af-dheere wuxuu gacan qaadkiisa ka wacay Gunud oo markii oo ka qabtay ku yiri:
"See tahay Gunud".
"Nabad adeer, adigu see tahay".
"Waan fiicnahay maandhow, adaan raayay inaan is aragno weliba si dhqaso ah".
"Dhib maleh, markasta diyaar ayaan kuu ahaye goormaad jeceshahay".
"Galabta aan iskugu imaano, maqaaxida Barni ee suuqa xoolaha sow ma taqaanid?".
"Haa waan aqaan, duhur haddii la tukadaba waan jooga".
Sidaas ayaa lagu balamay, Gunudse wuxuu la yaabanaa waxa uu Afdheere ugu ballamiyay halkaas fog oo degaanka laba doodaba ka fog.
Gunud ma ahayn mid magac wanaagsan ku leh dadka dhexdooda, yarantiisii wuxuu la socon jiray jabhadii, kadib markii qalaalasuhu Xamar ku batay oo hogaamiyo kooxeedyo badan ay soo baxeen asaguna uu yara weynaaday wuxuu u shaqayn jiray hogaamiye kooxeedka beeshooda, halkaas oo uu ku caan baxay geesinimo doqonnimo ah iyo naxariis yari, markii maxkamadaha Islamigu ay qabsadeen meelo badan oo ay ka mid tahay Xamar, qab qablayaashiina laga awood roonaaday wuxuu calooshii u shaqayste ugu shaqayn jiray maxkamadaha asaga oo aan la jirin ujeedada maxkamadaha, hase ahaatee nolol maalmeedkiisa ku soo dhacsan jiray, naftiisana ku badayaadinayay la joogista maxkamadaha Islaamigaa, aabihii wuxuu ku baxay gacan dad oo aan haybtooda la aqoon meydkiisana waxaa laga helay jid

caddaha gurigiisa ka soo gala dhinaca bakaaraha, cid dilkaas loo eedeeyo ama loo saariyo looma ooyaanba Allaha ka dhigee waa la waayay, dadka qaarkii waxay si hoose isugu sheegaan in asaga qudhiisu uu dilay, waayo xiiso ba'an ayaa ka dhex aloosnaa xilligaas asaga iyo aabihiis oo dhowr jeer isku dhacay , isku dhacaasna wuxuu ka imaanayay aabaha oo aad uga soo hor jeeday arrimaha xun xun oo uu ku jiray wiilkiisu, in kasta oo beeshu aad ugu faani jirtay Gunud oo uuba gaaray in la dhaho waa ninka besha ugu geesisan hawsha uu u qabtana aan nin kale u qaban Karin beesha, balse aabihii arintaas waxay ku ahayd oodin, ciil iyo caro markasta ku taagan, sida wiilkiisu dhiiga iyo xoolaha dadka uu u banaystay iyo sida odayaasha beesha qaarkood ugu taageerayaan xumaanta, oo dana gaar ah oo ay ayagu leeyihiin ugu fushanayeen ayagoo magac beeleed adeegsanaya.
Si kastaba dhimashadii odaygii wanaagsanaa cid loo raacdo waa la wayay sidaas ayayna ku dhamaatay, in kasta oo uu Gunud handadaad iyo maalin waan ogaan ninkii dilay aabahay uu muddo waday, hadana xilligii socday ayay la dhimatay raadintiisii in kasta oo uu uurka wali ciil ka qabo.
Gunud Af-dheere aad ayuu u yaqaannay inuusan ducaysnayna waa ogyahay, inta uu dil iyo dhac uu asagu gacantiisa ku gaystay in kabadan in uu Af-dheere maskax ku geeystay waa uu hubyaa, inuu maskax ku dhiigle yahay waa ogyahay, dad badan in uu dilay asaga oo rag u adeegsanaya, hantidoodiina dhacay waa uu la socdaa.
Af-dheere lacag uusan shaqaysan ayuu siiyaa Gunud, asaguna u jeedada uu u siiyo waa garan waayay, ma baqdin ayuu u siiyaa iyo yuusan kugu soo jeesan mise yuusan kaa dheeraan aad ku shaqaysatide ayuu u siiyaa, si kastaba Gunud ilna waa kula jira ilna waa isaga ilaaliyaa Afdheere.
Afdheere waa nin ay wax walba ka suuroobaan, hantida uu maanta haysto bilowgeedii agoon ayuu ka dhacay, markii aabahood dhintay ayuu markhaatiyaal been ah keenay, asga oo sheegaya in xoolo intaas la'eg uu ku lahaa marxuumka, hadii aan laga siina tii xumayd ay dhacayso, markii danbana lagu dhex dhexaadiyay in wax fiican la siiyo si loo badayaadiyo nolosha qoyskaan aan beelaha hubaysan oo Xamar daggan ka dhalan, tan iyo maalintaasna dhac ayuu

wadaa asagoo si gaara ula eegta looma ooyaanka kuwa ah oo hantida haysta iyo kuwa beelohoodu aysan xamar joogin. Wuxuu aad uga macaashay boobida dhulka, waxaa magaalada ugu jira dad rag iyo dumar leh oo uu wax siiyo markii wax u soo boodaan, oo u soo sheega meeshii jilicsan sida dhul qofkii lahaa lagaran waayay ama mid qofkii lahaa waraaqihii lahaanshadu ka dhumeen oo uu kula dhago, ayda oo laga yaabo in markii dhulkaan la gatay in uu asagu uuba joogin Xamar, waxaase inta badan u fududaynayay dhicida dhulka markhaatiyaal iyo odayaal uu lacag waalan siiyo iyo wadaado dhuuni qaatayaal ah oo garta sidii uu asagu raba dadka ugu sheega, dadkaas oo qaarna ay dhaar u maraan inuu leeyahay dhulka qaarna awooda qabiil ay adeegsadaan iyo haddii aan saan la yeelin waa laysku ayaabi'I, tiisuna ay gaar u tahay sida handadaada, shirqoolka, iyo dil uu la beegsado dadka uu ogayahay in aan beel hubaysan ka danayayn.
Af-dheere halaagii dhacay qayb weyn ayuu ka qaatay, qayb uu asagu is leeyahay waa nimco Eebbe ku siiyay ayuu ka qaatay, dhul baylah ah oo dadkii lahaa qaxeen oo Xamar iyo aagiisa aan imaan karin ayuu helay, dadkaas qaxay guryahooda iyo dhulalkoodu waxay ahaayeen kuwa uu aad u jecel yahay oo qofkii u soo sheega uu dhaqaale fiican siin jiray, waayo cid iska hortaagaysa maleh, kii ku jiray ee aan awooda lahayna xoog ayuu uga saaraa, haddi arrintu dhabaqdo oo sheekadu xumaatana meel ayuu ku fadhiyaa in ay jiraan kuwa badan oo garab siinaya oo kuwa qaxay ee dhulka lahaa beel ahaan u neceb, labadaan gad, labadaan soo dhac ayaa shaqo u noqotay, qaska dalka iyo daganaansha la'aantu in ay sii socotana ducuu ka dhigtay, xaaraan ka dharag oo jeego u seexo oo Alxamdulillaahi dheh ayuu garaadkiisii iyo noloshiisii ku soo gaba gabaystay, oo calooshiis ku fil ku noqday,
Galabtii ayay isugu yimaadeen goobtii ballantu ahayd ee maqaaxida shaaha ee Barni, qol gudaha ah ayay u sii gudbeen oo dad oo dhan aan loo ogolayn, Af-dheere ayaa Barni ku yiri tarmuus shaaha iyo biyo noo keen qolkaana anaguu noo xiran yahay maanta cid kale ha nagu soo dayn, waayahay ayay tiri, qaadkii uu waday ayaa meeshii lagu qabysaday nin walbana qabybtiisii soo dhaweystay , biyo iyo

shah toona lama sugin ee waa la bilaaayay ruugidii, sheekana laqabsaday, Barni shaahii iyo biyihii ayada ayaa u keentay oo uguma soo dhiibin gabdhaha meesha ka shaqeeya, markay u dhigtay ayay tiri wax kale oo aad u baahan tihiin miyaa jira, maya ayay ugu war celiyeen kaliya cidna ha noo soo dayn, waa yahaay ayay tiri illinkiina u soo laabtay mana wada xirin, ganbar illinka geeskiisa yaalayna ku fariisatay oo dhagahana furka kala baxaday, gacan qaadkii ay wadatayna damisay si ayada oo meesha fadhida uusan soo dhicin ama gariirkiisa loo maqal oo aysan labada nin u ogaan in warka laga duubayo.

Barni waxay ahayd qof war jecel sirta dadka inay ogaatana aad uga heshey, qolkaan yar wuxuu u ahaa dabinka ay warka ku gaado, siiba marka la marqaamo oo hadalka aan hoos loo dhigin, waxay iska dhaadhicisay ogaatayna in ganbarku uu ka fiican yahay kursiga marka xanta la dhagaysanayo, oo qof qayilaya oo fadhiya aan sifiican warkiisa looga maqlayn kursi, raadiyana waaba ka dheeraysay qolka iyo agagaarkiisa, ganbarkeedii ayay baroosinka dhigatay, gabdhihiina waxay ku tiri madaxaa i xanuuniye ee shaqada iska celiya.

Marqaankii markii la gaaray muddo ka dib Barni na dulqaadkii ku yaraaday oo ay iskula hadlayso,

"*ciyaar meeshan uma aysan imaane oo qolka iskuguma soo xirine warka may bilaaayayaan",* ayada oo jees jeesanaysa, ayada oo is leh maxay warkay rabtay u bilaabi la'yihiin ayaa Afdheere hadalkii bilaaayay, Barnina neef ayaa ka soo fuqday, alxamdullilaahi ayay tiri, Afdheerana hadalkii wuxuu ku bilaaayay:

"Arrin ayaan kuugu yeeray aniga iyo adigana in ay na dhaafto ma rabo, odayaal ila og waa jiraan hase ahaatee inaan adiga kuu dirayo hawsha ma oga, adiguna ragga ila wada inaad ogaato looma baahna, shaqadaas ayaad tolka u qaban dhaqaale fiicana waa lagu siin".

"Cidna war iga maqli maysee, waa maxay shaqadu?" ayuu yiri.

Laamo yar yar oo uu gacanta ku hayay ayuu inta afka ku kuusay yiri:

"Waad la socotaa in maalmaahaan ninkii Warfaa ahaa iyo tolkii ay kala taagan yihiin".

“Wax waan ka maqlay arrintaas, haye?”.
“Gabadhiisii ayuu wuxuu siinayaa nin nassab dhimana, waxaasna sharaf dhac iyo ceeb ayay nagu tahay, warna waa diiday oo asaga ayaa isla qumman”.
“Aniga maxaa layga raabaa marka? inaan baryo oo wax u sheegaa?”
“Maya maya maya, nin baryootama waad ka Weyntahay, tol dhan hormoodkoodii ayaa tahay, nikaaxii berri ayuu dhacaayaa oo aroortii ayaa gurigiisa lagu qaban, saddex saac, adiga waxaan kaa rabnaa inta uusan dhicin nikaaxo in aad wiilka gabadha lagu nikaaxinayo aad ku tagtid, intaas kaliya ayaa lagaa raabaa , hawl kugu dhib ahna maahan ayaan filayaa”.
Gunud intuu xoogaa aamusay ayuu yiri
“Waxaas iyo wax la mid ah dhib iguma hayaane, waxaan ku iri ujeedada wiilka loo dilayo waa maxay ma nassab dhimman ahaan taas baa?”
“Haa, ma sharaf dhac ka weyn ayaa jira oo na soo fool saari lahaa hadduu guursado gabadheena?”
“Runta marka loo hadlo ninkaad dil I leedahay aniga iyo adigaba naga fiican, nagana nassabsan, sow ina Kadiye maahan, wiil la mid ihi waa yar
yahay wanaagiisa iyo sharaftiisa, taase hadda mid ii taal maahan ee meeqaa lay siin”.
Af-dheere oo hadalkii ka yara xanaaqay warse aan ku celin Karin oo lafihiisa uga baqaya ayaa yiri:
“Kun dollar”.
“Waa inaan ugu yaraan laba qof wataa oo wixii kor iiga yimaada iga ilaaliya, marka laba kun oo lacag ah ayaad keeni, warkuna intaas ha ku
yaraado,” una raaciyay, “Waxaanse ku weydiiyay maxaan caawaba noo diiday inaan kala tuurno oo berri noola sugaysaa?”.
“Soomaalidu waxay ku maah maahdaa ninkii soo joog laga waayo soo jiifaa laga helaa, Warfaa warkeena waa diiday si sharaf leh intaan ula hadalnay, wiilka oo caawa la dilaa xanuun badan kuma haynayso, hasa yeeshee gurigiisa dhexdiisa iyo

nikaaxa oo loo fadhiyo cashar ayay u noqon asaga iyo kii kale oo isku daya sidaan oo kale”.
Warkii waxaa lagu gunaanaday in berri hal saac uu keeno kun doolar oo hor maris ah oo maqaaxidan laysugu yimaado, wax yar hadii la kala aamusnaa ayaa Afdheere yiri:
“Gunud nin waaya aragaad tahay inaan kula tashtaan raabaa”.
“Haye”.
“Waxaa jira wax aan kaa qariyay, raggii odayaasha cidda ahaa ee i soo diray waxay i soo dhaheen Warfaa xataa ha la soo dilo, waana arrinta loo rabo in xilliga nikaaxa aad howsha fuliso oo labadoodaba hal dhagax ku disho, marka bal maxay kula tahay?”.
“Afdheere anigu nin shaqo u soo jeedaan ahay, wiilka aad dil leedahay waxba igama galabsan, haddana calooshaydaan u shaqaysan haddii lacag aad ogoshihiin, aniga Warfaa Waxba iigama duwana wiilka”.
Heshiiskii ayaa dib loogu laabtay waxaa lagu ballamay berri hal saac iyo bar iyo Afdheere oo laba kun iyo shan boql oo hor marisa wada, laba kun iyo shan boqol kalana markii shaqada la dhameeyo, waayo Gunud waa diiday in wiilka iyo Warfaa isku lacag noqdaan.
Markii la yara aamusnaa ayaa Gunud weydiiyay waxa uu sidaan soohdin ka baxaa ugu neceb yahay Warfaa.
“Ma necbi, nacayb gaara uma hayo ee tani waa mid tolku wato anna odayaasha cidaan ka mid ahay”.
“Tan ka hadli ma hayo ee sidiisaad u neceb tahay, wax badan annaga oo sheekaysanayna yaan kaa dareemay, xurgufna in labadiina juffo dhex taal waan maqlay”.
“Taasi mar horay ahayd, waa hore, geel jirayaal is dilay iyo buuq yar, waana laga heshiiyay mar hore xaal marina gabdhaa lays dhaafsaday, arrintaas waagiiba waa dantay, Allaa naga damiyay hadalkeediina waa joogsaday markiiba waana la heshiiyay, warkiina halkaas ayuu ku xirmay, intii dhimatayna Allaha u naxariisto”.

“Warfaa awoowgii dagaalkaas rag ayuu ku dilaan maqlay jufadiina ah, waxa Warfaa aabihiis loo dilayna waa aanadaas ayaa la yiriye maxaa ka jira?”.
“Maya maya maya, aargoosi maahan, waayo ninka dilay buux juffadeenna maba ahayn, waa nin ay is af dhaafeen kadibna isku gacan qaadeen, Allaha u naxariisto nin karmeed ayuu ahaa Jiiqle, Warfaa awoowgiis, in kasta oo uu da’ ahaan weynaa dagalkaas markuu dhacayay hadana nin baluu ahaa, Buux iyo walaalkiisna maba joogin umana dhaweyn meesha dagaalku ka dhacay, oo ka heshiintii xurguftaas Warfaa adeerkiis gabar ayaaba lagu daray jufadeena ah oo aabahay ayaaba gabadha bixiyay oo adeer u ahaa ayadu agoon ayay ahayd”.
Gunud ayaa uurka iska yiri
*“tuug tuug dhalay, adiga iyo kii ku dhalay waxba isma dhaantaan, laba Ibliis oo ifka loo soo diraad tihiin”.*
Intaas ka dib nin walba suxulkuu aastay oo naftiisa ku mashquulay, Gunud waxuu ka fakarayay sidii uu howshaa u qaban lahaa asaga ooaa n cid kale wax gaarsiin, lacagtiisana u duuban lahaa, Af-dheere waxuu ku howlanaa siddeentanka boos goofka ah ee asaga iyo Warfaa wada gateen ee uu asagu isku qoray, ballantuna ahayd in nootaayo la tago oo labada magacba lagu soo qoro sida uu meel cidla ah uga helayo berri marka tii Warfaa soo dhamaato, waayo wax cadayn ah ma jirto oo muujinaysa inuu dhulkaas Warfaa wax ku leeyahay, wax qoran maleh, hadal kaligiina sharci maahan, nin dhintayna aakhiro hadal kama soo tabiyo, siddeetan boos oo qiimahoodu maalin walba kor u sii socdo, *Ilaahay makuu gargaaraa mise gafuur gafuur ayuu kuu tuuraa, ma anaa iri mise reer xamar ayaa yiri,* ayuu laabta is ka yiri asaga oo uurka ka qoslaya.
Hal saac iyo bar markii uu yimid Gunud makhayadii ayaa Barni u sheegtay in Afdheere gudaha fadhiyo, waa uu u gudayay, hadal la’aan lacagtii ayaa faraha loo gashay, ma fiirin mana u baahnayn inuu fiiriyo ama tiriyo, waayo libaax asaga oo kala ah Af-dheere xoolo kama cuni karo, kamana hunguriyeen karo, beena uma sheegi karo, waxa uuse yiri ma dhan tahay lacagtu intaan ku ballannay sow maaha?, haa ayuu yiri.

Gunud waa nin dheer oo xorgogsan seed iyo muruq iyo laf ah, timo jilicsan oo sheexo u baxsantahay, indho cad birtana u madoow leh, shaarib leh, garmaleeytiya, qaad cun badan, sigaar cab badan, ilkuhuse cadcadyihiin, aadna u xarrago badan oo qofna aysan ku soo dhacayn kana ayaa baas abuur ah.

“Waayahay, wiilashii mid ka mid ah oo korkaas daggan ayaan halkan ku ballanay oo aan iska raacaynaa, ee iska sii bax adigu ka soo qaad in howshii fushay, waa inoo duhurkii iyo inta dhiman lacagta”, saas ayaana lagu kala tagay.

**DHIBBANAHA DHEX JOOGA**

**CUTUBKA SIDDEED IYO TOBNAAD**

**DILKII**

Markii qol weyn oo guriga Warafa la goglay oo joodariyaal iyo barkimo lagu safay ragiina qaar yimid ayaa waxaa illinka hore ee guriga soo istaagay Afdheere oo wiil meesha sii galayayna ku yiri Warfaa iigu yeer adeer, haddii uu soo baxay Warfaa waaba Afdheere ninka sugayaa yaab iyo ammankaag,

"*qaskii ma gurigayga ayuu la soo doontay. Inii tuu banaanka iigu gaystay ma ku filnaan weyday, dhagaxtuur inuu halkaan ka bilaabo miyuu u yimid" ayaa* Warfaa laabta iska yiri,

raggii kale qaarkood xalay ayay siin u soo direen oo waa dhunsanayn ku dhaheen ee naga raalli noqo, nikaaxana waan imaanaynaa qaarbaaba fadhiya hadda gudaha, asaguna sidii cir ka soo dhacii ayuu irrida isa soo taagay, Warfaa waa is dajiyay hadalna kuma kululayn, waxa uuna ku yiri:

"Af-dheere nin ka u danbeeya ee aan is lahaa waa iman ayaad ahayde, maxaa jira saaka oo dadkaad necayayd iyo gunta ku dhex keenay?".

"Saas ha dhihin Warfaa naf iyo sheeydaan ayaa nala xariira oo si kale qofka wax u tusa, Soomaalidu waxay tiraahdaa geesi waa ninkii gafkiisa qaata, saakana nin iga geesisan ma jiro ayaan filiyaa mar haddaan gafkaygii qaatay oo soo hoyday".

"*War bal tanoo kale war ninku sow Afdheere maahan, war illayn naxariis Eebbe lagama quusto",* ayuu uurka iska yiri:

"Soo gudub khayr Allaha ka dhigo, gacma furan ku soo dhawoow".

Saddex ujeedo kaliya ayaa Afdheere u yimid nikaaxa oo gurigaan keentay, mar asaga oo ka maqan meesha haddii dilku dhaco amaa tuhun yimaadaa waa is yiri, marna Warfaa amuu nikaaxa ka dhex hadlaa ciilka uu qabo dartiis uu ragga u sheegaa goofka ay wada gateen, taasna sida uu uga badbaadi karay waa isagoo nikaaxa ka soo qayb gala, tusiya in carro nabad tahay, tan saddexaadna Warfaa awoowgiis rag badan oo jufada Afdheera ah ayuu dhagta dhiiga u daray, in kasta oo laga heshiiyay oo gabdho lays dhaafsaday hadana mar uun waa ku tallamayay qof reer Jiiqla ah oo gacantiisa ku baxa in uu arko, reer Jiiqle waxaa ka haray Warfaa iyo inta uu dhalay iyo islaantii xumayd ee doqontaahay oo Afdheere ina adeertiis ahayd oo Warfaa adeerkiis qaayay intay dhashay, oo ayagu hadda ay heshiis la yihiin Warfaa oo islaantii iyo carruurteedii oo ku biilo magaalo ay daggan yihiin, "*doqontaas Warfaa wax waa ka qaban weyday waana ka soo fakaday, naagi kugu tol maaha, maantaase garsoorkii jiraa, ina buux sida uu u nafbaxayana daawan doonaa"* ayuu uurka iska yiri.

Dumarkii oo mashxaradaya markii nikaaxu dhacay ayaa Gunud illinka hore ka soo galay, labadii nine ee la socotayna mid banaanka igu sug ku soo yiri midna gaarigii yaraa looga soo dhex tagay, cid u fiirsatay ama danaynaysay ma jirin soo galitaankiisa, waayo alalaasaha iyo rayraynta ayaa ka weynaa in qof meel maraya la tabo iyo masharada Xaaran iyo Cambaro ee dhaga jabiska ah oo haduu madfac soo dhaco aan la maqlayn, wuxuu sii dhex qaaday dumarkii alalaasayay oo irida ka istaagay qolkii nikaxu ka dhacay, indhihiisu waxay qabteen wiilkii arooska ahaa oo macawis qurxoon iyo shaati cad oo gacma dheera ah xiran, cimaamadna garbaha u saran tahay oo salaan saf kala maraya raggii meesha fadhiyay, markii uu dhameeyay salaantii oo uu meeshii uu ka kacay soo fariistay, ayaa Gunud oo aan weli qolka si fiican u galin bastooladii la soo baxay oo afar xabadood oo daran dooriya ka riday, gadaalna u laabtay oo xabbad kalana kor u riday si dumarku ay wadada ugu banneeyaan.

baabuurki oo kacsan ayaa asaga iyo kii banaanka ku sugayay fuuleen kana dhaqaajiyeen, gudaha qolka markii isku dhex yaacii dagay ayaa la arakay Warfaa

oo nin rafanaya dul fadhiya oo cimamadiisa xabadka kaga haya si uusan u dhiig bixin, war ninka qaada isbitaalka ka gaarsiiya iyo hadalo jaadkaas ah ayaa mesha ka yeerayay, hase ahaatee Afdheere uma ekayn mid naftu la gaarayso isbitaal iyo meel kalaba, laba xabadood wadnahay ka haleeleen, midna dhuunta, midna garabka bidix, intii la dul dhoobnaa ayaa naftii daysay.

Nin oday ah oo meesha joogay ayaa yiri:

“Innaa lillaahi wa innaa Ileyhi raajicuun, Allaha u naxariisto marxuunkaan, waxaanse maqli jiray abeeso ninkii korsadoow adigaa u aayi, walle inaysan been ahay, saa Afdheeraba ninka saaka bartaan dhigay waa Gunude”.

Galabtaas waxaa la soo duugay Afdheere waxaana lagu ballamay in arooska toddobaadka dib laga dhigo, arooskiina si fiican ayuu u dhacay, maalin xusuus mudan ayay ahayd, maalin sooyaalka Soomaaliya meel weyn ka gashay ayay ahayd, maalin qofkii joogay ama xasuusta ay illin farxadeed ka timid ayay ahayd, iftiin cusub oo Soomaali u baxay maalin uu bilowday ayay ahayd, nolol rayn rayn bash bash iyo barwaaqo iyo dhibba leh ayaa u bilaabatay lammaanihii is jeclaa maalintaas, ayaga oo laabta ku haya sida geesinnimda leh ee ay ula duubteen waalidiintii ayaga dhalay iyo inta badan bulshaday ku dhex noolaayeen, ayagana laga sugayo sidaa iyo si ka fiican iyo Soomaalinnimo dhab ah oo xumaan iyo qalooc aan lahayn, kuna qotonta garsoorka Eebbe iyo mid nooleba, waxaa u biloowday lamaanaha iyo dadkii arooska ka soo qayb galay iyo Soomaali oo dhanba, ladagaallanka faquuqa, gooni dad u riixidda iyo kala saraynta bulshadeena in badan soo dilatay.

**DHIBBANAHA DHEX JOOGA**

**CUTUBKA**

**GUNAANAD**

Aroortaas markii Afdheere uu Gunud maqaaxida uga soo tagay inta lacagta soo siiyay, waxaa u yimid Barni oo sida caadadu ahayd warkoodii shalay oo dhan og, waxayna ku tiri:

“Qorshaha aad wadaan labadiinu waan ogahay ee ka joog Gunudoow”.

Intuu xanaaqay ayuu ku yiri:

“Adiga meeshu ma waxay kuugu furantahay inaad dadka ku basaastid, hal eray hadduu kaa soo baxo ama aan banaanka ka maqlo adaa u maqan”.

“War heedhee, waxa intaan iga reebay waa sidii laygu hanjabaayay oo laygu caga juglaynayay, taas waan isnaqaanaaye, imaqal, waxbaaan kuu sheegaya aanan cid kale u sheegin hada ka hor”.

“Waa maxay”

Barni ayaa inta si qumaatiya indhaha uga eegtay ku tiri:

“Kobtaad adiga iyo asagu dilka Warfaa iyo wiilka ku maleegayseen, qolkaa gudihiisa ayaa dilkii aabahaana lagu maleegay, Afdheeraha ku lahaa soo dil dadka ayaa Wiilwaal kula heshiiyay in uu aabahaa soo dilo oo lacag ku baxshay, intaas ayaan kuu sheegi”.

Gunud oo hadalkii filan waa ku noqday argagaxna ka qaaday ayaa yiri: “Waxaad ku hadlayso ma runayaa?”.

“Waxaan kuu sheegayo wax lagu kaftamo ma kuula eg tahay?”.

“Maya, maxaadse tan iyo intaas ula aamusnayd oo aad iigu sheegi weyday?”.

“Sidaad hada ii handaday ayaa lay handaday oo Wiilwaal i yiri caruurtaadaa u maqan, asagii haduu dhintayna, waxaan culayskaan uurka ugu sito ma jiraan, haddana cidaan aniga iyo adiga iyo
Afdheere ahayn ma oga, saad ka yeeli lahayd aday ku jirtaa”
“Wiilwaal baqdintiisa ayaa ku heshay waan garan karaa, waana mahadsan tahay saan yeelayo anay i jirta, maxaase Afdheere aabahay ku galay? koley waad ogtahaye,”
Barni oo cabsidii ka dagatay oo awal ka baqaysay inuu wax yeelo hadase ogaatay inuusan wax yeelayn, oo ciil keeda mid ka weyn uu u qaaday Gunud Afdheere ayaa tiri:
“Xoolo aduun lexa jecladood, waana tan uu hadda ku dili rabo Warfaa, iyo waanada uu kaa daba waday aabahaa oo ku oran jiray odayaashaan waa kugu danaysanayaan iyo maandhoow joogtii uu kulahaa aabahaa, intaas ayaa lagu dilay, wiilku waa marmarsiyo, ninka uu Afdheere aakhiro la raadinayaa waa Warfaa”.
Ninkii uu sugayay ayuu arkay, inta istagay ayuu ku yiri:
“Berri markii markhati lagaaga baahdo hadalkaas waa lagaa raabaa, hadii kale adaa u qoollan”, horana u sii baxay.
Intay sii fiirisay intay baabuurka ka korayeen oo qososhay ayay tiri:
“Kun markhaati anaa kuu noqon, Af-dheere haddaad i dhaafisid, noloshuu igu ciriirshee qabriga Allaha ku cariirshee”.

---

buugta qoraaga ee soo socota
Isma oran
Faq shaydaan
udubprinting@gmail.com
alishka5@hotmail.com
alishka5@gmail.com
Facebook: suldaan ali americo